# Ogow Xuquuqdaada

## Xuquuqdaada ka qof carruur ama da' yar ah

CHILDREN'S RIGHTS ALLIANCE

Uniting Voices For Children

Turjumaada iyo qaabaynta Hagahan Ogoow Xuquuqdaada waxaa si naxariis leh u maalgeliyay Guddiyada Adeegyada Carruurta iyo Dhallinyarada (CYPSC) iyada oo loo marayo Sanduuqa Ilaalinta Caalamiga ah ee CYPSC 2024.

Dukumeentigan waxa turjumay Adeegyada Luuqadda DCU ee DAC (Dublin City University, Invent Building, Glasnevin, D09 PH2K, Ireland.)

Daabacaadda Ogoow Xuquuqdaada ee asalka ah waxa soo saaray Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta oo kaashanaya Golaha Xorriyadaha Madaniga ah ee Ireland (Irish Council for Civil Liberties). Waa kii labaad ee hagayaasha Ogoow Xuquuqdaada ee loogu talagalay carruurta iyo dhalinyarada.

# Tusmada


Macluumaad ku saabsan hagahan 2

Erayada muhiimka ah waxa loo sharaxay (sida alifbeetada u kala horreeyaan) 4

Hordhac 10

1. Xaqa aan u leeyahay in si siman la iila dhaqmo, bulshada la iga qaybyeelo oo aan go'aanmadayda gaaro. 16
2. Xaqa aan u leeyahay waxbarashada 34
3. Xaqa aan u leeyahay caafimaadka 60
4. Xaqa aan u leeyahay in la iga ilaaliyo waxyeellada 78
5. Xuquuqda aan ku dhex leeyahay qoyska 94
6. Xuquuqdayda soo-galootinimo ama qaxoontinimo 110
7. Xuquuqdayda la macaamilka sharciga dembiyada iyo Gardaí (Booliiska Ireland) 126
8. Xuquuqdayda internetka 146
9. Xuquuqdayda helitaanka hoyga 152
10. Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? 156

    *Tilmaanta ku tusaysa ururo iyo hay'ado waxtar leh*

# Macluumaad ku saabsan hagahan

## Hagahan waxa qoray kooxda ku jirta Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta, wuxuuna kuu sheegayaa xuquuqahaaga carruurnimo ama qof dhallinyara ahaan.

Guud ahaan waxaan u qornay hagaha 12-18-sano jirrada, laakiin waxaad ogaan kartaa in meelaha qaar ay aad u adkaan karto in la fahmo, waxaanan soo jeedineynaa in qof wayni la akhriyo. Sidoo kale aad buu haguhu u dheer yahay, laakiin waxaad isticmaali kartaa bogga Tusmada ee xagga hore ku yaalla si aad u akhrido uun qaybaha adiga kugu habboon, iyo 'Tusmada ururrada iyo hay'adaha waxtarka leh' si ay kaaga caawiyaan in aad kala fahamto qaybaha hagaha.

Xuquuqdaadu waxay ku salaysan tahey sharciga qaranka, ka Yurub iyo sharciga caalamiga ah iyo Dastuurka Ireland.

Caadiyan waalidkaa ama qofka kaa masuulka ka ah ayaa ka masuul ah ilaalinta qaar ka mid ah xuquuqahaaga iyagoo ku metalaya. Haddii aanad lahayn waalid ama masuul ku caawiya waxa laga yaabaa in qof kale oo weyni uu kuu galo booska waalidka. Hagahan wuxuu kaloo ka jawaabayaa su'aalaha laga yaabo inay dadkaasi ka qabaan ilaalinta xuquuqdaada.

### Hagahu wuxu koobsanayaa sagaal qaybood:

- Hab-dhaqan sinnaan leh
- Waxbarashada
- Caafimaadka
- Ka ilaalinta waxyeellada
- Xuquuqda Qoyska Dhexdiisa
- Socdaalka
- Xuquuqdayda la macaamilka sharciga dembiyada iyo Gardaí (Booliiska Ireland)
- Xuquuqda dhijitaalka ah
- Xuquuqdayda helista hoyga

Hagaha wuxu kuu sheegaya meesha aad ka heli karto macluumaad dheeraad ah, caawimo ama taageero. Waxa jiro ilo badan oo laga helo talo wanaagsan oo carruurta iyo dhalinyarada caawiya. Liiska kuwan wuxu ku qoran yahay cutubka 10aad ee hagahan oo ka bilaabmaya bbogga 154. Haddii aad u baahan tahay talo faahfaahsan oo ku saabsan xuquuqdaada, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad la tashato looyar.

Isbaheysiga Xuquuqda Carruurta waxaanu kugu dhex siin karnaa macluumaad dhanka sharciga ah iyo talo ku caawin karta. Waxaan ku bixina macluumaad sharci oo bilaash ah khadka taleefanka, oo waxaanu ballan kaaga qaban karna qarankeena kaasoo ku siin doona talo sharci oo bilaash ah oo ku saabsan xuquuqdaada.

## Nala soo xidhiidh

Waxaad nagala soo xidhiidhi kartaa Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta:

- Taleefan, +01-902 0494
- iimayl, help@childrensrights.ie

Hagahan waxa uu isticmaalayaa ereyo laga yaabo in aadan garanayn. Ereyadan waxaan ku sharaxnay bogga xiga.

Macluumaadka ku jira hagahan wuxu koobayaa sharciyada soo baxay ama dhaqangalay illaa Juun 2022.

## Afeef

Hagahan intaan ku jirno, waxaan hiigsaneynaa inaan ku siinno macluumaad guud oo ku saabsan xuquuqdaada. Intii karaankayaga ah waxaanu sameynay inaanu hubino in macluumaadka uu yahay mid sax ah oo cusub, laakiin maaha talo sharci.

# Erayada muhiimka ah ee la sharraxay

## (oo sida alifbeetada u kala horreeyaan)

### Helitaanka

Ereygaan waxa la adeegsadaa marka laga hadlayo la xidhiidhka waalidkaa iyo xubnaha kale ee qoyska:

- marka aad ku jirto daryeelka
- marka waalidkaa aysan wada noolayn.

### Diiwaanka Carruurta la Korsado

Haddii aad tahay ilmo cid kale korsato, korsashadaada waxaa la geliyaa Diiwaanka Carruurta La Korsado (liiska). Diiwaankan waxa uu leeyahay tafaasiil ku saabsan qoyska ku korsanaya.

### Qoyska ilmaha korsanaya

Qoyska ilmaha korsanaya waxaa uu ka kooban yahay ugu yaraan hal ilmo oo la korsaday iyo ugu yaraan hal waalid oo ilmaha korsanaya.

### Magangeliyo doon

Qof ka tagay waddankiisa si uu magangeliyo uga raadsado waddan kale.

### Shahaadada dhalashada

Shahaadada dhalashada waxa ku qoran:

- taariikhda iyo goobta dhalashadaada
- magacaaga
- magaca mid ama labadada waalid.



### Guddiga Maamulka (dugsiga dhexdiisa)

Koox dad ah oo maamula dugsi. Caadi ahaan waxaa ka mid ah:

- waalidiinta
- dad matala macalimiinta
- mulkiilayaasha dugsiga

Maamulaha dugsiga wuxuu hoos yimaadaa Guddiga Maamulka.



### Amar daryeel

Kani waa amar maxkamadeed oo adiga oo caruur ah ama qof dhalinyaro ah ku wareejinaya qaybta daryeelka Tusla (Hay'adda Carruurta iyo Qoyska).

Haddii aad ku jirto nidaam daryeel, waxaad caadi ahaan la noolaan doontaa qoys ku korinaya ama xarunta hoyga carruurta.

### Digniin

Digniin ka timid Gardaí/booliska. Gardaí waxa laga yaabaa inay soo saarto digniin marka qofka dhalinyarada ahi qirto dembiga. Waxaa jira digniino rasmi ah iyo kuwo aan rasmi ahayn.



### Wakaaladda Carruurta iyo Qoyska (Tusla)

Tani waa Wakaaladda Gobolka ee masuulka ka ah horumarinta wanaagga iyo natiijooyinka carruurta. Waxay adeegyo ku bixisaa qaybaha soo socda:

- Ilaalinta iyo daryeelka carruurta;
- Adeegyada daryeelka waxbarashada;
- Adeegyada cilmi nafsiga;
- Daryeelka baddelka ah;
- Taageerada bulshada iyo qoyska ku salaysan;
- Adeegyada sanadaha hore:
- Adeegyada ku salaysan xadgudubka gudaha, galmada iyo jinsiga



### Haynta

Eray loo isticmaalo in lagu qeexo xaqa waalidka, ama xuquuqda qof kale oo weyn oo ku jira booska waalidka (*loo yaqaan qof metelaya waalidka*) u leeyahay daryeelka iyo xakamaynta jireed ee ilmaha.

### Amarka masaafurinta

Amar faraya qof aan ahayn muwaadin Irish ah inuu wadanka ka baxo sababtoo ah waxaa la go'aamiyay inaysan xaq u lahayn inay sii joogaan Ireland.

### Xarig

Xarigu waa marka qof lagu waajibiyo inuu joogo goob gaar ah - sida caadiga ah muddo cayiman. Tani waxay noqon kartaa:

- in dugsiga dhexdiisa lagugu hayo iyadoo anshaxmarin ah
- in dugsiga lagugu dhex hayo ciqaab ahaan dambi aad gashay awgeed.
- isbitaalka si loogu oggolaado inaad marto daawaynta cudurada maskaxda.


## Bixinta tooska ah

Kani waa nidaam dawladdu hoy iyo cunto dadka ku siiso inta ay sugayaan go'aanka codsigooda magangalyada ee Ireland.

## Sarkaalka Daryeelka Waxbarashada

Qof la shaqeeya dugsiyada, macalimiinta iyo waalidiinta si ay ugu dhiirigeliyaan carruurta inay dugsiga tagaan.

## Midowga Yurub (EU)



Midowga Yurub waa urur siyaasadeed, bulsho iyo dhaqaale oo ka kooban 27 waddan. Waddan kasta oo xubin ka ah wuxuu ahaanayaa waddan madax-bannaan laakiin wuxuu oggolaaday inuu raaco sharciyada iyo siyaasadaha guud ee ururka.

## Xafiiska Socdaalka Qaranka ee Garda (GNIB)

Hay'adda Garda (booliiska) ee u xilsaaran ilaalinta xeerarka socdaalka Ireland. Waxay:

- ilaalisa xuduudaha
- baartaa socdaalka sharci darrada ah iyo ka ganacsiga dadka
- fulisaa masaafurinta.



## Ilaaliyaha

Waa qof mas'uuliyad sharci kaa saaran tahay ka caruur ahaan. Badanaa waa labadaada waalid ama midkood. Si kastaba ha ahaatee, doorkan sidoo kale waxaa fulin kara:

- qaraabo kale
- daryeele
- shaqaale bulsho.

## Ilaaliyaha *ad Litem* (GAL)

Qof ay maxkamaddu u magacawday ilaalinta carruurta ama kiisaska daryeelka si uu:

- u hubiyo in garsooruhu uu maqlo aragtidaada
- maxkamadda ugula taliyo sida ugu wanaagsan ee dani kuugu jirto.

## Adeega Fulinta Caafimaadka (HSE)

Hay'adda Dawladda ee mas'uulka ka ah bixinta adeegyada bulshada ee caafimaadka iyo shakhsi ahaaneed iyada oo loo marayo:

- xirfadlayaasha caafimaadka
- isbitaallada
- xarumaha caafimaadka bulshada.

### Socdaalka

Kani waa socdaalka dadka ee gudaha Ireland si ay wax u bartaan, uga shaqeeyaan ama u raadsadaan magangalyo.

### Dhalashada Irishka iyo Adeega Socdaalka (INIS)

Waaxda Caddaladda waxey u xilsaarantahay:

- magangalyada
- socdaalka
- dhalashada
- fiisooyinka.

### Sargaalka Xiriirka Carruurta (JLO)

Boolis la tacaamula dhalinyarada ku jirta Barnaamijka Leexinta Dhalinyarada Ee Garda. Kani waa barnaamij hawleed lagu caawinayo carruurta inay u dhaqmaan si ay uga fogaadaan dhibaatada sharciga.

### Tahriibe

Qof u guura dal ama gobol cusub. Tani waxay sababteedu noqon kartaa:

- shaqada
- waxbarasho
- midnimada qoyska
- badqabka
- fursadaha wanaagsan
- heer nololeed wanaagsan.



### Tijaabinta

Tani waa ikhtiyaar ay maxkamaddu siin karto qofka lagu helay dembi. Haddii aad ku jirto 'tijaabo' waa inaad ballan ku qaadaa inaad si wanaagsan u dhaqmayso oo aad iska ilaaliso inaad dembi gasho inta lagu jiro muddada tijaabada.

### Hay'adda Soo dhawaynta iyo Is-dhexgalka (RIA)

Waaxda Caddaaladda ee mas'uul ka ah inay siiso magangelyo-doonka iyo kuwa kale ee Wadanka ka raadinaya ilaalin meel ay ku noolaadaan. RIA:

- waxey ku heeysaa magangalyo doonayasha xarumo hoy oo gaar ah
- waxay u abaabushaa adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada
- waxay ka caawisaa dadka saboolka ah (aad u liita) ee muwaadiniinta Midowga Yurub (EU) ku laabashada waddankooda.

## Qaxooti

Qof dalkooda uga soo tagay cabsi uu ka qabo in la dhibo sababo la xiriira:

- midabka
- diinta
- dhalashada
- xubinnimada koox bulsho oo gaar ah
- sabab la xiriirta inay qabaan fikir siyaasadeed gaar ah.

Haddii qof sidan oo kale loo dhibay, Wasiirka Caddaaladda iyo Sinnaanta waxa uu u aqoonsan karaa qaxooti.

## Cadaalada soo celinta

Tani waa hab lagu dhaqan celiyo dambiilayaasha iyada oo loo marayo 'heshiisiinta' dhibanayaasha iyo bulshada. Tusaalooyinka 'cadaalad soo celinta' waxay noqonayaa marka aad:

- raali geliso dhibbanahaaga
- bulshada shaqo u qabato.

## Waaranka baadhista

Tani waa amar sharci ah, oo badanaa ka yimaada maxkamadda, kaas oo u oggolaanaya Gardaí/booliska inay baaraan dhismo ama guri marka ay baarayaan dembi.

## Ilmo keli ah

Eeg qeexitaanka 'ilmo yar oo aan lala socon'.

## Jihaynta galmada

Tani waxay tilmaamaysaa jinsiyada uu qofku isu arko oo uu galmo ahaan soo jiito. Waxaa ka mid ah in uu yahay heterosexual (toos ah), khaniis, dumarka wax ka daya dumarka kale ama nin iyo naag u tage.

## Shaqaale bulsho

Shaqaalaha bulshadu waxay caawiyaan oo taageeraan carruurta iyo dhalinyarada loo arko inay halis ku jiraan ama aan ammaan ahayn. Tusla (Hay'adda Carruurta iyo Qoyska) waxay shaqaaleysiisaa shaqaale bulsho si ay ula shaqeeyaan carruurta iyo qoysaska.

## Qareen/looyar

Nooc garyaqaan ah oo ku siin kara talo sharci ama kaa caawin kara adiga iyo qoyskaaga inaad u diyaargarowdaan kiis la horgeyn doono maxkamadaha.



**Amarka daryeelka gaarka ah**

Amarka maxkamada ee dhigaya qofka dhalinyarada ah in uu ku jiro qaybta daryeelka gaarka ah, badanaa muddo gaaban.

**Qaybta Daryeelka Gaarka ah**

Qayb degaan oo xidhan oo si xafidan loogu noolaado. Maxkamadda Sare waxay carruurta ama dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 11 ilaa 17 sano ku riddaa halkan marka loo arko inay khatar ku yihiin caafimaadkooda ama badbaadadooda.



**Kaaliyaha Baahiyaha Gaarka ah (SNA)**


Qof u shaqeeya dugsi si uu u caawiyo buuxinta baahiyaha ardayda naafada ah ee fasalka dhigta.

**Ilaalinta hoose**

Tani waa ilaalinta ay bixiso Dawladdu. Waxaa loogu talagalay dadka halista ugu jira waxyeello haddii lagu celiyo dalkooda, laakiin aan ku habboonayn shuruudaha adag ee loo baahan yahay si ay u helaan aqoonsi qaxootinimo.

**Hoy la taageeray**

Nidaam loogu talagalay dhalinyarada da'doodu tahay 15 iyo wixii ka weyn kaas oo siinaya hoy deegaan qoys. Qorshahani waxa uu taageeraa dhalinyarada ka hor intaysan iskood u noolaan.



**Tusla**

Tusla waa magaca Wakaaladda Carruurta iyo Qoyska ee Dawladda. Waxay siisaa taageerooyin kala duwan carruurta iyo qoysaskooda.

Eeg 'Wakaalladda Carruurta iyo Qoyska'.

**Da' yar aan lala socon**

Haddii aad ka yar tahay 18 jir oo aad keligaa timaadid Ireland, ama haddii qofka weyn ee kula socday uu kaa tago marka aad soo gasho waddanka, waxaa laguu yaqaannaa 'da' yar aan lala socon'.

Eeg 'Ilmo keli ah'.

**Qaramada Midoobay (UN)**

Qaramada Midoobay (UN) waa urur caalami ah oo ujeedadiisu tahay ilaalinta nabadda iyo amniga ka dhexeeya dalalka.



# Hordhac

# Maxaan uga jeednaa xuquuqaha?

Xuquuqul insaanku waa xeerar sharci ah oo qeexaya sida uu wadanku kuula macaamilayo. Xuquuqdan waa in ay ahaato mid uu qof walba heli karo, si kasta oo uu yahay:

- jinsigooda
- midabkooda
- diintooda
- xaaladda guurkooda ama qoyskooda
- jihayntooda galmo
- da'dooda
- naafanimadooda
- heerkooda xubinnimada bulshada Safarka ah.

Dawladda Ireland waxay ballan qaaday, iyadoo la raacayo sharciga qaranka iyo kan caalamiga ahba, inay hubiso inay ixtiraamto, ilaaliso oo ay buuxiso xuquuqda qof kasta oo ku nool Gobolka.

## Waa maxay xuquuqda aan leeyahay?

Inta badan, carruurta iyo dhallinyaradu waxay leeyihiin xuquuq la mid ah tan dadka waaweyn, marka laga reebo meelaha qaarkood sida codbixinta. Waxa kale oo aad leedahay xuquuq gaar ah, oo dheeraad ah sida xaqa in lagu korsado. Sababta tani waa in carruurta iyo dhallinyaradu qabaan baahiyo ka duwan tan dadka waaweyn.

## Yaa hubinaya in xuquuqdayda la ixtiraamo?

Dawladda Ireland, iyada oo u maraysa dawladda, waa inay hubisaa in xuquuqdaada la ixtiraamo. Waajibaadkaan waxaa dejiyey sharciga:

- Dastuurka Ireland (Irishka looga yaqaan Bunreacht na hÉireann)
- Axdiga Yurub ee Xuquuqda Aadanaha (ECHR)
- Axdiga Qaramada Midoobay (UN) ee Xuquuqda Carruurta (CRC).

Dhammaan hay'adaha dowladda waa inay ixtiraamaan xuquuqdaada. Tan waxaa ka mid ah:


- An Garda Síochána (ciidamada booliska)
- dugsiyada
- adeegyada caafimaadka.

# Xaq ma u leeyahay in codkayga la maqlo ama inaan fikirkayga sheegto?

Haa, waxaad xaq u leedahay in codkaaga la maqlo marka ay dadku adiga ama wax ku saameynaya go'aan kaa gaarayaan. Haddii aadan fursad u helin in codkaaga la maqlo, markaas waxaad weydiin kartaa sida aad tan u sameyn karto.

Xataa carruurta yaryar iyo carruurta aan hadlin waxay fikradahooda ku soo bandhigi karaan farshaxan iyo cayaar hal abuur leh.

Dadka waaweyni waa inay tixgeliyaan aragtidaada markay go'aan gaadhaan.



# Ilmo miyaan ahay xagga sharciga?

Sharci ahaan, waxaad tahay 'ilmo' haddii aad ka yar tahay 18 sano, oo aadan guursan. Tani waxay ku siinaysaa ilaalin gaar ah oo sharciga waafaqsan. Si kastaba ha ahaatee, waxay sidoo kale macnaheedu noqon kartaa inaadan samayn karin waxyaabo ay dadka waaweyn samayn karaan, sida codeynta ama kasbashada mushaharka ugu yar.

Marka 'dhallinyarada' lagu dhex xuso hagahan waxa loola jeedaa dadka da'doodu tahay 13-17 sano.

# Waa maxay mas'uulka?

Mas'uulku waa qof gaari kara go'aan uu kugu metelayo. Caadiyan, waa mid ama labadada waalid. Doorkan waxaa sidoo kale fulin kara:

- qof kale oo weyn
- qaraabo
- daryeele
- shaqaale bulsho.

# Sideen u isticmaalaa xuquuqahayga?

Waxaad isticmaali kartaa qaar ka mid ah xuquuqdaada keligaa. Si kastaba ha ahaatee, mararka qaarkood waxaad u baahan tahay waalidkaa ama masuulkaaga si uu ku caawiyo. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan xuquuqdaada iyo sida aad u isticmaali karto, waxaad awoodaa:

- inaad wacdo khadka macluumaadka ee Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta 01-902 0494
- iimayl help@childrensrights.ie.

Carruurta iyo dhallinyaradu waxay inta badan ku tiirsan yihiin dadka waaweyn si ay u dhawraan xuquuqdooda. Waalidka ama mas'uulkaaga waxaa waajib ka saaran yahay inuu kaa caawiyo helitaanka xuquuqdaada. Tusaale ahaan, waa inay ku siiyaan cunto, hoy iyo daryeel caafimaad, oo ay kaa ilaaliyaan waxyeellada.

Waalidkaa ama mas'uulkaagu wuxuu kaloo xaq u leeyahay inuu gaaro go'aano adiga kuu saameeyn kara sida:

- nooca dugsiga aad dhigan doonto
- nooca daawaynta ee aad heli karto.

Waalidkaa ama mas'uulkaaga sidoo kale waxaa laga yaabaa inay fasax ku siin karaan inaad sameyso waxyaabo gaar ah, sida:

- helida baasaboor
- ku biirista naadi
- aaditaanka safarro dugsi.

Dacwadaha sharciga qaarkood, sida ilaalinta ilmaha, sharciga qoyska iyo kiisaska korsashada, ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay in laga dhagaysto aragtidiisa lana tixgeliyo. Sababtuna waxay tahay go'aamo muhiim ah oo noloshooda saamaynaya ayaa la gaadhayaa.

# Sidee baan u dacwoodaa ama arrin u soo jeediyaa?

Haddii aad dareento in urur ama hay'ad ay kuula dhaqmeen si aan cadaalad ahayn, waad caban kartaa. Markaad akhrisanayso hagahan waxaad arki doontaa tusaalayaal sida tan loo sameeyo. Iyadoo ururka aad ku cabanayso uu noqon doon mid ka duwan iyadoo ku xidhan waxa aad ka cabanayso, waxa jira dhawr talo oo faa'iido leh oo aad isticmaali karto iyada oo aan loo eegin cidda aad ka cabanayso.

1

**Tallaabada koowaad: qor tafaasiisha arrinta**

Faahfaahinta wixii dhacay qor. Waxa fiican in la qoro taariikhda, waqtiga iyo goobta ay wax ka dhaceen. Waa inaad sidoo kale qoraal ku qortaa magaca qofka ku lugta leh.

2

**Tallaabada labaad: la hadal adeegga ay khusayso**

Waxaad la hadli kartaa qofka aad la macaamilaysay ama dalbo inaad la kulanto maamulaha. Waa inaad qortid cidda aad la hadashay iyo sida ay kuugu jawaabeen.

3

**Tallaabada saddexaad: cabasho rasmi ah samee**

- Qoraal ahaan ku cabo oo hayso nuqul si aad u hesho diiwaan
- Si kooban u sharrax waxa dhacay
- U dhiga sida ugu gaaban ee ugu waadaxsan ee suurtagalka ah
- Mudnaanta sii arrimaha ugu waaweyn

Waa inaad sidoo kale qeexdaa waxa aad rabto in qofku sameeyo si uu wax uga qabto cabashadaada. Waa inaad haysataa koobiga warqado kasta oo aad dirto oo aad hubiso inaad taariikheysay.

4

**Tallaabada afraad: u dacwood hay'adda ay khusayso**

Haddii qofka ay khusayso ama kooxda ay xallin waayaan cabashadaada, waxaad u dacwoon kartaa hay'adda sharciyeed ee ay khusayso, haduu jiro mid ku shaqo leh nooca cabashadaada. Tusaale ahaan, Wakiilka carruurta ama Guddiga Xuquuqul Insaanka iyo sinnaanta ee Irishka.

Haddii aad eegto qaybta ku habboon ee hagaha, waxaad arki doontaa cidda aad u dacwoon karto.

Haddii aad u baahan tahay wax caawimo ah ama hagida, waxaad kala xidhiidhi kartaa Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta khadka macluumaadka sharciga ah:

- Taleefan, 01-902 0494
- Iimayl, help@childrensrights.ie.

# Sidee baan ku helaa talo sharci oo bilaash ah?

Dadka ku nool Ireland waxay heli karaan gargaar sharci iyagoo u maraya guddiga gargaarka sharciga. Waxa kaliya oo aad heli kartaa gargaarka sharciga madaniga ah adiga oo u maraya waalid ama masuul. Xaaladaha qaarkood Guddiga Kaalmada Sharciga ayaa aqbali doona codsiga cunugga haddii ay u maleynayaan inaad leedahay heer qaangaar ah oo kugu filan.

Isbaheysiga Xuquuqda Carruurta marka la joogo, waxaan ku siin karnaa macluumaad sharci ah iyo talo ku caawin karta. Waxaan ku bixina macluumaad sharci oo bilaash ah khadka taleefanka, oo waxaanu ballan kaaga qaban karna qarankeena kaasoo ku siin doona talo sharci oo bilaash ah oo ku saabsan xuquuqdaada.

## Nala soo xiriir

Waxaad nagala soo xidhiidhi kartaa Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta:

- Taleefan, 01-902 0494
- Iimayl, help@childrensrights.ie.



# Xaqa aan u leeyahay in si siman la iila dhaqmo, bulshada la iga qaybyeelo oo aan go'aanmadayda gaaro.



## Cutubka 1



Ilmo ahaan ama qof dhallinyaro ah, waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo si siman. Iyadoo ku xiran da'daada iyo qaar ka mid ah xayiraadaha sharciga ah, waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad ka qayb qaadato nolosha bulshadaada, shaqo hesho, iyo inaad sameyso doorashooyin madax-bannaan oo ku saabsan waxyaalaha adiga ku khuseeya.

Qaybtan, waxaan ku sharxeynaa qaar ka mid ah xuquuqahan. Waxa kale oo aanu ku siinaynaa shaxan muujinaya qaar ka mid ah waxyaabaha aad ku samayn karto da'da kala duwan.

# 1.1 Dhaqan Siman

## Waa maxay sinnaanta ama la dhaqanka siman?

Sinaan ula dhaqanka waa in la aqoonsado in dadka oo dhan leeyihiin qiimo isku mid ah oo ay tahay in loola dhaqmo si sharaf leh.

Takoorku wuxu dhacaa marka laguula dhaqmo si ka duwan ama si ka liidata qof kale oo aad isku xaalad ku sugan tihiin sababtoo ah:

**Jinsigaaga:** haddii, tusaale ahaan, aad isu aqoonsato wiil ama gabar. Takoorku wuxuu ku salaysnaan karaa aqoonsigaaga lab iyo dhedig kaasoo ah aqoonsigaaga gudaha ee sida aadka ah aad u dareemeyso sida dheddig, lab, ama aqoonsi kale sida kuwa aan lab ama dheddig midna ahayn. Waxa kale oo ay ku salaysnaan kartaa muujinta jinsigaaga oo ah sida aad jinsigaaga ugu muujiso dhar, timo ama cod.

**Xaaladdaada guurka ama wada noolaasnaha:** haddii aad guursatay iyo haddii kaleba ama haddii aad ku jirto xiriir madani ah.

**Heerka qoyskaaga:** haddii tusaale ahaan aad:

- uur leedahay
- ilmo waalid u tahay
- daryeesho qof kale oo naafo ah
- tahay qof aan qoys lahayn.

**Jihayntaada galmo:** ha aad tahay iyo haddii kale, tusaale ahaan, waxaad tahay heterosexual (toos ah), khaniis, lesbian ama qof dumar iyo rag isku ah

**Diintaada**, ama caqiido diineed la'aantaada

**Da'daada** (tani guud ahaan waxay khusaysaa kuwa 18 jir ah ama ka weyn oo keliya).

**Naafanimadaada** - haddii aad naafo tahay, waa in si dadka kale la siman laguula dhaqmo.

**Isirkaaga**, asalkaaga, dhalashadaada ama midabkaaga.

**Haddii aad tahay xubin ka tirsan** bulshada Traveller iyo haddii kale.

Sifooyinkan shakhsi ahaaneed waxaa loo yaqaan 'sababaha takoorka'. Waxaad kaloo xaq u leedahay in lagaa ilaaliyo tacaddiga. Tacaddiga waxaa ka mid ah waxyaabo ay ka mid yihiin faallooyin gaf ah iyo farriimo qoraal ah ama waxyaabo jireed sida riixida ama garaacida dadka.

Takoorka aan tooska ahayn waa marka qof loola dhaqmo si ka yar dadka kale sababtoo ah waxa lagu soo rogay shuruudo ay ku adkaanayso inay fuliyaan marka dadka kale la barbar dhigo.

Waxaad xaq u leedahay in lagaa ilaaliyo takoorka marka aad:

- dugsiga joogto
- wax iibsanayso ama iibinayso
- helayso adeeg sida baska
- ka qaybgasho koox dhalinyaro ama koox isboorti
- shaqada ku jirto.

Mararka qaarkood takoorka waxa keena sababahan:

- dabeecadaha xunxun
- faquuq
- aaminsanaanta, sida cunsuriyadda.

## Maxaan samayn karaa haddii aan dareemo in la i takooray?

### Guddiga Xiriirka Goobta Shaqada

Haddii aad dareento in lagugu takooray waxyaabaha kor lagu xusay midkood markaad isku daydo inaad hesho alaab iyo adeegyo ama waxbarasho ama shaqo, waxaad u dacwoon kartaa Guddiga Xiriirka Goobta Shaqada (WRC)..

Si aad ugu cabato WRC waa inaad marka hore ogeysiisaa qofka ama shirkadda aad rabto inaad ka cabato. Waa inaad tan ku samaysaa laba bilood gudahooda ka dib dhacdada. WRC waxay haysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida cabasho loogu sameeyo shabakadeeda, eeg Cutubka 10: Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? Faahfaahin dheeraad ah. WRC waxay soo saari doontaa go'aan sharci ah oo isku dayi doona inuu hagaajiyo xaaladaada. Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa inaad hesho magdhow.

### Komishanka Xuquuqul Insaanka iyo sinnaanta ee Ireland

Waxaad kala xidhiidhi kartaa Komishanka Xuquuqul Insaanka iyo Sinaanta ee Ireland  (IHREC) wixii macluumaad iyo hagis ah (eeg cutubka 10: Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? ama faahfaahin dheeraad ah).

### Waalidka, masuulka ama ururka taageerada

Waa inaad sidoo kale taageero ka raadiso waalidkaa ama mas'uulkaaga ama ururada taageerada ee ku qoran dhammaadka hagahan.

### Wakiilka xuquuqaha dadka (Ombudsman)

Waxa kale oo laga yaabaa inaad awoodo inaad u dacwooto Wakiilka carruurta.

## Maxaa dhacaya haddii aan dareemo in la ii geystay tacaddi ku salaysan midab, nooca galmada, jinsiga ama diinta?

Waxaad xaq u leedahay in lagaa ilaaliyo hanjabaada, aflagaadada iyo hadalada cayda ah iyo ficilada laguugu sameeyay:

- qaab foolka-fool ah ama onlaynka dhexdiisa
- qaab daabacan
- iyadoo la soo bandhigay
- qaab kale.

Haddii aad u malaynayso inaad dhibbane u noqotay hab-dhaqanka, waxaad Booliska kala xiriiri kartaa 112 ama 999 uguna gudbin kartaa dembi ahaan.

Qof kasta waa ku dembi inuu:

- jir ahaan kuu handado
- si joogto ah kuu dhibaa
- kugu tacaddiyo
- kuu geysto dhaawac halis ah sabab kasta ha ahaatee.

Sidoo kale waa dembi inuu qof waxyeeleeyo ama ku hanjabo inuu waxyeeleeyo hantidaada. Mar labaad, waxaad tan u sheegi kartaa Booliska.

# 1.2 Ka qaybgalka bulshada

## Da'dee ayaan ku codayn karaa?

Waxaad xaq u leedahay inaad codayso laga bilaabo da'da 18. Haddii aad tahay 18 ama ka weyn tahay oo aad tahay muwaadin Irish ah, waxaad codayn kartaa dhammaan doorashooyinka iyo aftida. Haddii aad ku nooshahay Ireland, laakiin aadan ahayn muwaadin Irish ah, waxaad xaq u leedahay inaad codayso doorashooyinka qaarkood. Si aad u codayso, waa inaad hubisaa in magacaagu ku jiro Diiwaanka Doorashada (liiska dadka codayn kara). Waxaad ka heli kartaa foomka codsiga si magacaaga loogu soo daro Diiwaanka Doorashada:

- dhamaan maamullada deegaanka
- xafiisyada boostada
- maktabadaha dadweynaha
- www.checktheregister.ie.

Waa inaad ku soo celisaa foomkaaga oo buuxa dawladda hoose.

## Haddii aan ka yarahay 18, ma ka qayb qaadan karaa go'aan gaarista?

### Comhairle na nÓg

Waxaad ka qayb qaadan kartaa go'aamada bulshadaada. Tusaale ahaan, Comhairle na nÓg waxay leedahay golayaasha dhalinyarada deegaanka kuwaas oo ku kulma meel kasta oo ka mid ah maamulka dowladaha hoose ee dalka. Waxay siinayaan carruurta iyo dhalinyarada fursad ay kaga qayb qaataan go'aan gaarista arrimaha iyaga khuseeya.

Si aad u ogaato sida aad uga qayb qaadan karto, eeg shabakada Comhairle.

Labadii sanaba, Comhairle na nÓg kasta wuxuu wakiilo u soo diraa Dáil na nÓg, baarlamaanka qaranka ee carruurta da'doodu u dhaxayso 12 ilaa 18 sano. Tani waa fursad weyn oo aad walaacaaga ugu gudbin karto siyaasiyiinta iyo kuwa kale ee go'aanada gaara.

### Wadahadalka Dhallinyarada Midowga Yurub

Wada-hadalka Dhallinyarada ee Midowga Yurub waxey ujeeddadiisu tahay in codka dhallinyarada la keeno golaha siyaasad-dejinta Midowga Yurub. Ireland gudaheeda wada-hadallada dhalinyarada ee EU waxaa bixiya Golaha Dhallinyarada Qaranka ee Ireland (NYCI) iyada oo loo marayo barnaamijka Codka Dhallinyarada. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg shabakada NYCI.

### Istaraatiijiyadda Qaranka

'Istaraatiijiyadda Qaranka ee Carruurta iyo Dhallinyarada ee ka qaybqaadashada Go'aan-qaadashada 2015-2020' waxay ujeeddadeedu tahay in la hubiyo in carruurta iyo dhallinyaradu ay cod ku yeeshaan nolol maalmeedkooda. Waxay diiradda saartaa meelaha ay carruurta iyo dhallinyaradu xaq u leeyihiin inay cod ku yeeshaan go'aamada saameeya noloshooda. Tan waxaa ka mid ah meelaha la xiriira:

- bulshada
- waxbarasho
- Caafimaadka iyo fayoqabka
- goobaha sharciga ah.

Si kastaba ha ahaatee, waaxaha iyo hay'adaha kala duwan ee dawladda ayay masuuliyadi ka saaran tahay inay dhaqangeliyaan.

### Hub na nÓg (Xudunta Dhalinyarada)

Waaxda Carruurta, Sinnaanta, Naafada, Is-dhexgalka iyo Dhallinyarada waxay leedahay Kooxda Taageerada ka qaybqaadashada ee dadka da'da yar. Waxay samaysteen 'Hub na nÓg' (Xudunta Dhalinyarada) iyagoo kaashanaya Foróige iyo Youth Work Ireland. Waxay ujeedadeedu tahay in la siiyo carruurta iyo dhallinyarada codkooda go'aan gaarista waxayna leedahay tiro agab ah oo laga yaabo inaad caawimo ka hesho.

Waxa kale oo aad ku biiri kartaa ururada carruurta iyo dhalinyarada deegaanka si aad uga qayb qaadato hawlaha oo aad wax uga beddesho bulshada deegaankaaga. Liiska ururada ka fiiri dhammaadka hagahan.



## Miyaa la ii ogol yahay in aan dhex mushaaxo xaafaddayda?

Waxaad xaq u leedahay in aad dhex mushaaxdo oo aad isticmaasho xarumaha bulshada. Qof kasta oo bulshada ka tirsan, oo ay ku jiraan dadka waaweyn, carruurta iyo dhallinyaradu waa inay ku dhaqmaan sharciga. Haddii hab-dhaqanka dadka ee bulshada dhexdeeda uu yahay mid ku carqaladaynaya markaa waad ka caban kartaa. Si lamida, dadka kale waxay xaq u leeyihiin inay dacwoodaan haddii ay u arkaan dhaqankaaga mid carqalad ah.

Haddii Booliska loo yeero, waxay kaa dalban karaan inaad horay u sii socoto. Waxaad xaq u leedahay in Boolisku ixtiraam kuu muujiyo. Haddii Boolisku si xun kuula dhaqmo, waxaad u dacwoon kartaa Komishanka Garda Síochána Ombudsman. Arag Cutubka 10 : Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? Faahfaahin dheeraad ah.



# Xaq ma u leeyahay inaan galo goobaha madadaalada, dukaamada iyo xarumaha wax iibsiga?

Haa, waxaad xaq u leedahay in aad gasho dukaamada, xarumaha wax iibsiga, goobaha madadaalada ama meel kasta oo kale oo dadweynaha loogu talagalay. Mulkiilaha ama maareeyuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu ku diido inaad gasho haddii ay ka walaacsan yihiin habdhaqankaaga si la mid ah sida ay ugu diidi karaan dadka waawayn. Si kastaba ha ahaatee, soo gelitaanka uma diidi karaan mid ka mid ah sababahaha takoorka (sababahani waxay ku taxan yihiin Cutubka 1: Xaqa aan u leeyahay in si siman la iila dhaqmo, bulshada la iga qaybyeelo oo aan go'aanmadayda gaaro.

Waxaa laguu diidi karaa in aad gasho baar iyado lagu saleeynaayo da'daada. Haddii aad ka yar tahay da'da 15 waxaad u baahan doontaa inuu waalidkaa ama qof kaa masuul ah kula socdo. Haddii aad ka weyn tahay 15 jir, uma baahnid waalid ama masuul kula jooga, laakiin waxaad joogi kartaa oo keliya ilaa 9-ka habeenimo. Waa sharci darro in la iibsado khamri inta aad ka yar tahay da'da 18.

# 1.3 Ikhtiyaar lahaanshaha: maandooriyayaasha

Haddii aad rabto inaad ka hadasho qaadashada maandooriyayaasha ama aad rabto taageero arrintaas khusaysa, waxaa jira tiro kooxo ah oo bixiya caawimo iyo taageero aan xukun lahayn oo dalka oo dhan ka jira. Helitaanka caawimada waxay dareemi kartaa dhib laakiin waxaa jira dad kaa taageeri kara habka loo maro. Waxaad ka heli kartaa macluumaadka Cutubka 10 : Halkee ayaan caawimo ka heli karaa?

## Xaq ma u leeyahay inaan khamri iibsado?

Maya. Waa sharci-darro qof kasta oo ka yar 18 inuu iibsado ama haysto khamri.

## Xaq ma u leeyahay inaan iibsado sigaar?

Maya. Waa sharci-darro in dukaanku ka iibiyo wax tubaako leh qof kasta oo ka yar 18 jir, xitaa haddii ay u iibinayaan qof kale.

## Xaq ma u leeyahay inaan qaato maandooriye sharci darro ah?

Qofna kuma qaadan karo maandooriye sharci darro ah gudaha Ireland.

Maandooriyayaasha sharci darrada ah waxaa ka mid ah (inkastoo aanay ku koobnayn) xashiishadda, herowiinta, ekastasy iyo kokain. Haddii aad maandooriye isticmaasho, waxaad heli kartaa taageero iyo caawimo. Booqo Drugs.ie wixii macluumaad dheeraad ah iyo taageero ah.

Xaalado xaddidan qaarkood dadku waxay codsan karaan helitaanka xashiishadda kannabis si loogu daweeyo xaalado caafimaad oo gaar ah. Wixii intaas ka badan la xidhiidh GP-gaaga (dhakhtarkaaga).



# 1.4 Ikhtiyaar lahaanshaha: Galmada

## Halkeen ka heli karaa macluumaadka ku saabsan galmada iyo xiriirka?

Waa muhiim inaad hesho macluumaadka iyo waxbarashada ku saabsan galmada iyo xiriirka si marka aad go'aan arrintan ka gaarayso aad u hesho macluumaad buuxa. Tan waxa loo yaqaan samaynta 'xulasho xog ogaal ah'. Macluumaadkani waa inuu noqdaa mid sax ah, madaxbannaan oo ku salaysan caddayn cilmiyeysan. Waxaad ka heli kartaa xog dhab ah oo dhexdhexaad ah oo ku saabsan cilaaqaadka iyo jinsiga:

- B4UDecide
- SpunOut.ie
- BeLonGTo In The Know Course

Arag Cutubka 10 : Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? Faahfaahin dheeraad ah.

## Waa maxay ogolaanshaha galmadu?

Oggolaanshaha waa marka dadku ku heshiiyaan inay si dhab ah u rabaan inay galmo sameeyaan, ama sameeyaan fal galmo la xiriira. Tan waxaa ka mid ah dhunkashada iyo taabasho kasta oo galmo ku tacaluqda.



# Maya ayaad odhan kartaa wakhti kasta

Waxa oggolaansho bixisay keliya haddii aad si xor ah u bixiso oo aan lagugu cadaadin inaad tidhaahdo haa. Runtii aad bay muhiim u tahay in la ogaado in xitaa haddii aad markii hore ogolaatay in aad galmo samaysato ama aad samayso fal galmo la xiriira, aad xor u tahay in aad beddesho maskaxdaada ka hor inta aanad bilaabin ama wakhti kasta ka hor inta aanay dhammaan. Haddii qof aanu odhan 'maya' ama aanu iska caabin fal galmo ah, macnaheedu maaha inay bixiyeen ogolaansho.

Waxaa jira xaalado qaarkood oo aanu qofku ku bixin karin ogolaansho xor ah oo ikhtiyaari ah. Kuwaas waxaa ka mid ah:

### a) Marka xoog la isticmaalo

Qofku ma bixin karo ogolaansho haddii:

- lagu qasbo inay ka qayb qaataan hawlaha galmada
- loogu hanjabo in la khasbi doono iyaga ama qof kale haddii aanay oggolaan galmada
- ay jirto sabab macquul ah oo uu uga cabsanayo in xoog loo isticmaalo nafsadooda ama qof kale haddii aysan oggolaan galmada.

### b) Uu hurdo ama miyir la' yahay

Qofku ma bixin karo wax ogolaansho galmo ah haddii uu hurdo ama suuxsan yahay.

### c) Uu cabsan yahay khamro ama maandooriye ku sarkhaamay

Waxaa laga yaabaa in qofku aanu awoodin inuu bixiyo oggolaanshaha ficil galmo sababtoo ah wuu cabsan yahay khamro ama maandooriye ayuu qaatay.

### d) Aanay awoodin inay oggolaansho bixiyan

Waxaa laga yaabaa in qofku aanu awoodin inuu oggolaado falka galmada iyadoo ay sababtu tahay naafo jidheed oo ka hor istaageysa inay sheegaan inay oggol yihiin iyo in kale.

### e) Aan fahmi karin

Qof si xor iyo ikhtiyaari ah uma oggolaan karo ficil galmo haddii aanay fahamsaneen dabciga iyo ujeedada ficilka.

### f) Aqoonsi khaldan

Qofku muu bixin ogolaansho galmo haddii ay khaldaan aqoonsiga qof kale ee falka ku lugta leh (taasi waa haddii ay aaminsan yihiin in qofka kale ee ka qayb qaadanayaa falka uu yahay qof kale).

**g) Qof kale ayaa sidaas dhahay**

Qofku oggolaansho ficil galmo oo ikhtiyaari ama xor ah ma bixin karo haddii oggolaanshaha qudha ee la hayo laga helay qof kale (qof baa yidhi qofkaasi wuu oggol yahay)

**h) Aanu bixin karin**

Qofku ma bixin karo ogolaansho fal galmo oo xor ah oo ikhtiyaari ah haddii loo diido inay baxaan iyadoo aanay jirin sabab macquul ah oo keensatay.

**Sababo kale**

Waxaa laga yaabaa inay jiraan xaalado kale oo ogolaansho galmo oo xor iyo ikhtiyaari ah aan la bixin karin laakiin kuwani waa qaar ka mid ah kuwa ugu caansan.

# Da'dee ayaan ogolaan karaa inaan galmo sameeyo?

Sharci ahaan, waxaad ogolaan kartaa inaad galmo sameyso markaad 17 jir tahay. Tan dhammaan waa laga siman yahay kumana xirna waxa fikirkaaga galmo yahay ama jinsiga ama jinsiyada aad galmada la sameynayso.

Sharcigu waxa kale oo uu aqoonsan yahay in dadka da'da yar ay isku samayn karaan fal galmo ah wuxuna ku soo bandhigay doodda 'u dhawaanshaha da'da'. Tani waxay ka dhigan tahay in haddii qof lagu soo oogay dembi ah inuu fal galmo ah la galay qof da'doodu u dhaxayso 15 iyo 17 sano, waxay soo bandhigi karaan difaaca 'u dhawaanshaha da'da' laakiin waa haddii:

- farqiga da'da ee u dhexeeya labada qof uu laba sano ama ka yar yahay
- si xor ah oo ikhtiyaari ah loogu heshiiyay
- qofna aanu dareemin in laga faa'ideystey ama la cabsi geliyay
- labada qof midna aanu xil hayn.

# Da'dee ayaan oggolaan karaa daaweynta caafimaadka galmada?

Waxaad ogolaan kartaa daawaynta caafimaadka haddii aad ka weyn tahay 16, tan waxaa ku jira baaritaan kasta ama daawaynta aad ugu baahan karto caafimaadkaaga galmada, sida baaritaanka STI (infekshanka galmada lagu kala qaado) ama kaniiniga dhalmo joojinta.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad iyo talo ku saabsan caafimaadka galmada, tag Cutubka 3: Xaqa aan u leeyahay caafimaadka.



# 1.5 Aqoonsiga Jinsi

## Waa maxay aqoonsiga jinsiga?

Aqoonsiga jinsiga waxa loola jeedaa jinsiga qofku dareemayo inuu yahay sida dheddig, lab, ama aqoonsi kale sida non-binary. Tani waxay noqon kartaa ama aynan noqon karin jinsiga la sheegay inay yihiin xiliga dhalashada.

## Waa maxay macnaha Transgender ama Trans?

Transgender ama Trans waa erey dalladeed loogu talagalay dadka aqoonsigooda jinsiga ama muujinta jinsiga ay ka duwan tahay jinsiga la sheegay inay ku dhasheen.

## Waa maxay muujinta jinsiga?

Muujinta jinsiga waxaa loola jeedaa sida ay dadku u muujiyaan jinsigooda sida xirashada dharka, timaha, codka iyo wixii la mid ah.

## Waa maxay sababta ay aqoonsiga jinsigu muhiim u tahay?

Aqoonsiga jinsigu waa muhiim sababtoo ah waxay u ogolaataa qofka in si buuxda oo sharci ah loogu aqoonsan jinsiga saxda ah.

## Xaq ma u leeyahay in la ii aqoonsado jinsigayga?

Waxaad aqoonsan kartaa jinsigaaga da' kasta. Si kastaba ha ahaatee, in jinsigooda sifo sharci ah loogu aqoonsado dadka da'doodu ka weyn tahay 18 jir waxay ku dhawaaqi karaan aqoonsigooda jinsiga laakiin 16- iyo 17-jirka waa inay maraan hab kale. Sharcigu ma khuseeyo carruurta da'doodu ka yar tahay 16 jir.

Qofka da'da yar si sharci ahaan loogu aqoonsado jinsigiisa, waa inuu ka codsadaa Maxkamadda Wareega Qoyska si uu u helo Shahaadada Aqoonsiga Jinsiga. Maxkamadda ayaa arrintan si qarsoodi ah u dhageysan doonta. Kani waa adeeg bilaash ah. Haddii waalidkaa ama mas'uulkaagu uu ogolaado codsiga, maxkamada way ogolaan doonta codsiga. Maxkamaddu waxay sidoo kale fulin kartaa codsiga iyada oo aan oggolaansho laga helin waalidkaa ama mas'uulkaaga haddii:

- waalidkaa ama masuulkaaga lama aqoonsan karo
- waalidkaga ama cidda kaa masuulka ah ku guul daraysto inay ka jawaabaan codsiga ogolaanshaha
- dantaadu ku jirin inaad waydiiso sababtoo ah waxay khatar gelinaysaa badbaadadaada ama daryeelkaaga.

Waxaad u baahan doontaa inaad shahaadooyin ka hesho xirfadlayaasha caafimaadka si aad u codsato.

## Halkee baan ka heli karaa caawimo, talo iyo taageero?

Haddii aad u baahan tahay talo iyo taageero, waxaad la xidhiidhi kartaa BeLonG To ee Adeega Dhalinyarada, TENI, Shabakadda Sinaanta Dadka Sinjigooda Beddela, ama LGBT Ireland eeg Cutubka 10: Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? Faahfaahin dheeraad ah.



# 1.7 Da'dee ayaan samayn karaa waxyaabo kala duwan?

| Lagu aqoonsado caruur ahaan | |
|---|---|
| Waxaa laguu aqoonsadaa inaad caruur tahay hadaad ka yar tahey 18 jir haddii aad guursatay mooyaane. | |
| **Ka qayb gal** | |
| **Ku biir Comhairle/Dail na nOg.** | Da'da 12. |
| **Ku biir shabakada xidhiidhka bulshada ama gal adeegyada kale dhanka onlaynka ah.** | • Da'da 16 iyada oo aan oggolaansho waalid la helin.<br>• Ugu yaraan da'da 13 jir iyadoo la helayo oggolaansho waalid marka la eego goobaha bulshadu ku xiriirto. |
| **Ahoow mid madax banaan** | |
| **Badal magaceyga** | • Da'da ka yar 14 waalidkaa ayaa ku metelaya.<br>• Haddii aad tahay 14-18 jir waxaad u baahan doontaa ogolaanshaha waalidka. |
| **Guriga ka tag.** | • Da'da 16 marka oggolaansho waalid la helo<br>• Da'da 18 iyada oo aan oggolaansho waalid la helin. |
| **In aan haysto baasaboor ii gaar ah.** | Ma jirto da' ugu yar laakiin ogolaanshaha waalidka ayaa loo baahan yahay ilaa da'da 18 jir. |
| **Saxiixa heshiis kiro si aad guri u kireysato.** | Da'da 18. |
| **Ka bixista daryeelka dawladda.** | Da'da 18. |
| **Aan guursado** | Da'da 18. |
| **Dardaaran samee.** | Da'da 18, illaa aad reer leedahay ama horey u soo guursatay maahane. |

| Dhameystiro dugsiga | |
|---|---|
| **Ku biir Youthreach.** | Da'da 15. |
| **Iskuulka ka tag.** | Da'da 16, ama ilaa aad dhammayso saddex sano oo dugsi sare ah - hadba kii hadhow dhaca. |
| **Si aad u hesho tababar shaqo.** | Da'da 16, haddii waalidkaagu ama mas'uulkaagu aqbalaan. |
| **Sameeyo go'aanno caafimaad** | |
| **Ka hel talo caafimaad oo gaar ah dhakhtarka.** | Da'da 16, laakiin dhakhtarku wuxuu la wadaagi karaa macluumaadka waalidkaa ama mas'uulkaaga ilaa aad ka gaarto 18. |
| **Qaado daawayn caafimaad (aan ahayn caafimaadka maskaxda) adiga oo aan ogolaansho ka haysan waalidkaa ama masuulka.** | Da'da 16. |
| **Hel daawaynta caafimaadka dhimirka adiga oo aan fasax ka haysan waalidkaa ama masuulka.** | Da'da 18. |
| **Diid daawaynta adiga oo aan ogolaansho ka haysan waalidkaa ama masuulka.** | Da'da 18. |
| **Dhiig bixi.** | Da'da 18. |
| **Noqo qof galmo ahaan firfircoon** | |
| **Oggolaanshaha galmada.** | Da'da 17. |
| **Gaadiid Wadista** | |
| **Wada mooto, mooto yar ama cagaf.** | Da'da 16. |
| **Gaari wad** | Da'da 17. |
| **Qaado shatiga duuliyaha.** | Da'da 16. |

| Dembi gelitaanka | |
|---|---|
| **laguu qabto tuhunka gelitaanka dembi oo la horgeeyo maxkamad.** | Da'da 12 (ama 10 dambiyada culus). |
| **Laguu diro dugsiga lagu hayo carruurta.** | Da'da 10 ilaa 17. |
| **Xabsi loo diro.** | Da'da 18 iyo ka weyn. |
| **Iibsashada waxyaabo gaar ah** | |
| **Yeelo eey.** | Da'da 16. |
| **Iibsashada tigidh bakhtiyaanasiib ama dhigo sharad.** | Da'da 18. |
| **Iibso sigaarka.** | Da'da 18. |
| **Iibsashada khamriga.** | Da'da 18. |
| **Tag maqaaxi.** | • Ka yar 15 - kaliya marka ay weheliyaan waalidka ama masuulka iyo inta u dhaxaysa 10.30 subaxnimo (12.30duhurnimo Axadda) iyo 9.00 fiidnimo.<br>• 15 ilaa 18 - inta u dhaxaysa 10.30 subaxnimo (12.30duhurnimo Axadaha) iyo 9.00fiidnimo. |
| **Gal diiwaankayga** | |
| **Hel xogta waxbarashada iyo caafimaadka.** | Da'da 18. Inta ay da'doodu ka yar tahay 18, waalidkaa ama masuulkaaga waxa laga yaabaa inay helaan xogtaada iyagoo ku metelaya. |
| **Codso shahaadada aqoonsiga jinsiga** | |
| Waxaad codsan kartaa shahaadada aqoonsiga jinsiga markaad 16 jir tahay. | |
| **Ku safar la'aanta kursiga gaariga ee caruurta (nidaamka xakamaynta ilmaha)** | |
| Waa inaad isticmaashaa kursi baabuur oo ku habboon dhererka iyo miisaanka ilmahaaga ilaa ay ka gaaraan dhererka 150cm ama 36kg oo miisaan ah. | |

# 1.8 Da'da ugu yar ma jirto

## Waxyaabaha qaarkood, ma jiraan xadka ugu yar ee da'da oo lagu qeexay sharciga.

Kuwaas waxaa ka mid ah:

- saxiixida codsi
- tagsi raac
- Marsashada taatuu ama daloolinta jirka (meelaha badankooda waxay dejiyaan shuruudda da'dooda)
- Joog guriga kaligaa
- xanaanayn
- lahaanshaha xayawaan aan ey ahayn (sida kalluunka, bisadaha ama doofaarka guinea).

## Waalidkey ma iiga tagi karaan guriga kaligey?

Sharcigu ma sheegayo da'da waalidkaa uu guriga kaaga tagi karo keligaa. Waxay ku xiran tahay waalidkaaga ama mas'uulkaaga inay go'aan ka gaaraan. Qaddarka kormeer ee aad u baahan karto waxay ku xidhan tahay:

- da'daada, qaan-gaarnimadaada iyo kartidaada aad ku daryeeli karto naftaada
- haddii ay jiraan dad kale oo waaweyn oo u dhow iyo in kale
- intee jeer iyo intee in le'eg ayaa lagaa tagayaa.

Sharciyada kale ama hab-dhaqanka ugu wanaagsan ayaa lagu dabaqaa kiiska carruurta yaryar iyo dadka da'da yar ee nugul. Tusaale ahaan, waalidka waxaa lagu dacwayn karaa dayaca ubadka haddii ay ilmaha guriga kaga tagaan keligii ama ubad galiyaan xaalad khatar gelinaysa caafimaadkooda ama badbaadadooda.

## Da'dee ayaan ku xanaaneyn karaa ilmo?

Taasi waxay ku xiran tahay waalidkaaga ama mas'uulka inuu go'aan ka gaaro. Waa inaad noqotaa qof qaan-gaar ah oo dabooli kara baahiyaha carruurta yaryar oo aad awood u leedahay inaad uga jawaabto sida saxda ah haddii ay dhacdo lama filaan ah guriga ka dhacday. Tusaale ahaan, haddii uu dab kaco ama qof aanu garanayn inuu albaabka uga yeedho. Gudaha Ingiriiska, Ururka Qaranka ee Ka Hortagga Arxan-darrada Carruurta (NSPCC) waxay ku talinaysaa in xannaaneeyayaasha ay ahaadaan ugu yaraan 16 sano jir.

# Xaqa aan u leeyahay waxbarashada

Cutubka 2

# 2.1 Guud

## Xaq ma u leeyahay waxbarasho?

### Haa Dhammaan carruurta iyo dhallinyarada Ireland waxay xaq u leeyihiin inay helaan waxbarashada aasaasiga ah oo bilaash ah. Xuquuqdan waxa dhowray dastuurka Ireland iyo sharciga Irishka.

Dawladda waxaa looga baahan yahay inay hubiso in qof kasta oo ku nool Ireland loo dammaanad qaado hiigsi iyo heer waxbarasho oo daboolaya baahiyahooda iyo awoodooda. Xuquuqdan waxaa guud ahaan lagu qeexaa inay daboolayso waxbarashada dugsiga hoose iyo heerka labaad.



# 2.2 Waxbarashada carruurnimada hore iyo daryeelka, iyo daryeelka ilmaha ah da'da dugsiga

## Waa maxay waxbarashada hore iyo daryeelka ilmaha ee u diyaar ah carruurta ka hor intaysan bilaabin dugsiga hoose?

Adeegyada waxbarashada iyo daryeelka carruurnimada hore ayaa ka shaqeeya waddanka oo dhan. Kuwaas waxaa ka mid ah daryeelka lagu bixiyo meel ka baxsan xaafadaha caadiga ah sida goobaha carruurta iyo dugsiyada barbaarinta; ama dadka carruurta ku xanneeneeya guryahooda.

Waxbarashada hore iyo adeegyada xanaanada carruurta waxaa laga yaabaa in si gaar ah loo maamulo iyagoo faa'iido doon ah; halka kuwa bulshada ku dhisan loo maamulo si aan faa'iido doon ahayn.

Dhammaan adeegyada waxbarashada hore iyo daryeelka ee lagu bixiyo meel ka baxsan guriga waa inay iska diiwaan geliyaan Kormeeraha Sanadaha Hore ee Tusla.

Ka eeg bogga Tusla liiska adeegyada diiwaangashan.

Noocyada ugu muhiimsan ee adeegga daryeelka ilmaha ee lagu bixiyo guriga dibaddiisa waa:

- waqti buuxa - in ka badan shan saacadood maalintii
- waqti-dhiman - in ka badan 3.5 saacadood laakiin ka yar shan saacadood maalintii
- fadhi - 3.5 saacadood maalintii ugu badnaan.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah ama caawimo si aad u hesho xarun ama ilmo-xannaaneeye kuu dhow, waxaad la xiriiri kartaa Guddiga Daryeelka Carruurta ee Magaaladaada ama Degmadaada, eeg Cutubka 10: Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? wixii faahfaahin ah.

## Waa maxay Xannaanada iyo Waxbarashada Carruurnimada Hore (ECCE) - 'Barnaamijka Xannaanada bilaashka ah'?

Barnaamijka Xannaanada iyo Waxbarashada Carruurnimada Hore (ECCE) waxaa sidoo kale loo yaqaan 'Dugsiga barbaarinta bilaashka ah'. Wuxu bixiyaa goobaha waxbarashada iskuulka ka hor ee dhammaan carruurta:

- da'doodu u dhaxayso laba sano iyo siddeed bilood iyo ilaa iyo intay ay ka bilaabaan dugsiga hoose, ama
- aan ka weyneyn shan sano iyo lix bilood.

Bilaash ayey u tahey waalidiinta.

Gelida dugsiga barbaarinta waxay ku salaysan tahay taariikhda dhalashada ilmahaaga ee la xidhiidha sannad-dugsiyeedka. Sanadku wuxu ka bilaabmaa Sebtembar wuxuna socdaa illaaa Juun. Da'da ilmahaagu jiro Sebtembar ayaa go'aamisa in uu aadi karo dugsiga barbaarinta iyo in kale. Si aad u ogaato haddii iyo marka ilmahaagu u qalmo waxaad aadi kartaa Websaydka Waaxda Carruurta, Sinnaanta, Naafada iyo dhalinyarada.

Nidaamku waxa uu u ogolaanayaa ilmahaagu in uu lacag la'aana ku dhigto dugsi-barbaarinta isagoo ka qayb qaadanaya adeega dugsiga xannaanada ee Tusla ka diwaangashan. Waxa laga yaabaa inay tagaan saddex saacadood maalintii, shan maalmood toddobaadkii, ilaa 38 toddobaad sannadkii.

Haddii ilmahaagu tago adeega daryeelka ilmaha saacado dheeraad ah, waa inaad u bixisaa kharashka saacadahan dheeraadka ah si caadi ah. Adeegbixiyayaashu waxay kale oo ay dalban karaan deebaaji la soo celin karo si loogu hayo booska Barnaamijka ECCE ee ilmaha.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo helo barnaamijka, waxaad la xiriiri kartaa degmadaada ama guddiga daryeelka carruurta ee degmadaada, eeg cutubka 10: Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? wixii faahfaahin ah.

## Waa maxay xanaanada carruurta ee loo diyaariyey carruurta ka dib marka ay bilaabaan dugsiga hoose?

Xannaanada carruurta da'da dugsiga oo la xakameeyo ayaa lagu bixiyaa goobo kala duwan:

- Xarumaha daryeelka carruurta waxaa lagu xannaaneeyaa carruurta laga bilaabo dhalashada ilaa 15 sano
- guriga ilmo-xannaaneeyaha
- qaar ka mid ah adeegyada daryeelka carruurta waxay u adeegaan carruurta da'da dugsiga oo keliya.

Adeegyada xarunta ku salaysan waxa laga yaabaa inay ku yaalaan ama ka baxsan yihiin dhismaha dugsiga. Adeegga xannaanada carruurta ee da'-dugsiyeedka ayaa la filayaa inuu daboolo baahida carruurta ee nasashada, iskalabixinta iyo madadaalada dugsiga ka dib iyo wakhtiga aan teeramka la gaadhin.

Adeegyada daryeelka carruurta ee carruurta da'da dugsiga waxa laga yaabaa in loo maamulo si gaar ah oo faa'iido-doon ah ama waa kuwo bulsheed oo aan faa'iido doon ahayn. Xarumaha qaarkood waxay soo qaadi doonaan carruurta dugsiga ka dib oo keeni doona xarunta daryeelka carruurta. Macluumaad ku saabsan adeegyada jira waa inaad ka hubisaa adeeg bixiyahaaga.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah ama caawimo si aad u hesho adeega daryeelka carruurta ee da'da dugsiga, waxaad la xiriiri kartaa Guddiga Daryeelka Carruurta ee Magaaladaada ama Degmadaada, eeg Cutubka 10: Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? wixii faahfaahin ah.

## Waa maxay taageerada maaliyadeed ee aan heli karo si ay iiga caawiso khidmadaha lagu soo dallaco waxbarashada iyo daryeelka carruurnimada hore ee ilmahayga ama adeega daryeelka ilmaha da'da dugsiga ku jira?

Nidaamka ECCE (dugsiga barbaarinta hore) waa bilaash. Waalidiinta lagama rabo inay wax ku biiriyaan kharashkan illaa iyagoo u baahan saacado dheeraad ah mooyaane.

Kaalmada daryeelka ilmaha ee qaranka ayaa diyaar u ah inay waalidiinta ka caawiyaan bixinta kharashka ilmahoodu kaga qaybqaadanayo waxbarashada iyo daryeelka carruurnimada iyo adeegyada daryeelka ilmaha da'da dugsiga.

Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg shabakada Qaranka ee Qorshaha Daryeelka Carruurta.

## Waa maxay taageerada dheeraadka ah ee la heli karo haddii ilmahaygu naafo yahay?

Qaabka Helitaanka iyo Ka mid noqoshada (AIM) waxa uu bixiyaa taageerooyin loogu talagalay inuu carruurta naafada ah u sahlo:

- helitaanka Barnaamijka Xannaanada iyo Waxbarashada Carruurnimada Hore (ECCE) ee goobaha caadiga ah ee dugsiyada barbaarinta.
- inay si buuxda oo la mid ah carruurta kale ugala qaybqaataan hawlaha.

Qaabka AIM waxuu bixiyaa taageerooyin si gaar ah loo qaabeeyay, oo la taaban karo kuwaas oo lagu saleeyay baahida ilmaha oo aan u baahnayn ogaansho naafo oo rasmi ah.

Waxaad taageerooyinka AIM ka dhex codsan kartaa adeeg bixiyahaaga dugsiga rowdada. Waxay codsan karaan, iyagoo adiga kula kaashanaya, taageerooyinka AIM ee loogu talagalay carruurta.

Macluumaad iyo hagitaan ku saabsan AIM waxa aad ka heli kartaa guddida daryeelka carruurta ee magaalada iyo degmada iyo mareegaha AIM.

## Halkee ayaan aadi karaa haddii aan qabo walaac ama cabasho ku saabsan daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore ama adeegyada daryeelka ilmaha ee da'da dugsiga ee ilmahaygu helo?

Bixiyaha adeegyada daryeelka ilmaha waa inuu maareeyo oo qiimeeyo cabashooyinka. Markasta oo ay suurtogal tahay cabashooyinkaaga waa inaad iyaga toos ugu keento.

Bixiyahaaga waxbarashada hore iyo daryeelkaaga waa inuu lahaadaa siyaasadda cabashooyinka oo dhamaystiran. Siyaasaddani waxay qeexaysaa sida walaacaaga loo maarayn doono. Haddii aad cabasho qabto, waa inaad:

- dalbato nuqulka siyaasadda cabashooyinka
- walaacaaga qoraal ahaan ugu geyso bixiyaha daryeelka ee ilmahaaga.
- dalbato in bixiyaha daryeelka ilmuhu walaacyadaada wax uga qabto sida ku qoran siyaasaddaas.

Waxaa laga yaabaa inaadan ku farxin jawaabtooda ama aad dareento in aadan si toos ah ugala hadli karayn arrinta adeeg bixiyahaaga. Haddi ay jawaabtu haa tahay, waxaad Kormeeraha Sanadaha Hore ee Tusla kula xiriiri kartaa taleefoon ahaan ama adigoo buuxinaya foomka website-ka Tusla.

Kormeeraha Sanadaha Hore ee Tusla ayaa ku ogeysiin doona inay heleen cabashadaada iyo haddii ay aqbaleen walaacaaga iyo haddii kaleba. Kormeeruhu walaacyada ama cabashooyinka midmid uma baaro markaas ma heli doontid natiijado ama go'aan si gaar ah u khuseeya arrintaada. Macluumaadka aad u dirto Kormeeraha wuxu caawin doonaa marka ay kormeerayaan adeegyada ee ay qiimeynayaan in adeegga loo maamulayo si waafaqsan shuruucda iyo in kale.

## Halkee ayaan aadi karaa haddii aan ka walaacsanahay ilaalinta iyo fayoobida ilme ku jira adeegyada waxbarashada iyo daryeelka carruurnimada hore, ama daryeelka ilmaha ku jira da'da dugsiga?

Haddii aad wax welwel ah ka qabto badbaadada ama fayoobida ubadka waa inaad la xiriirtaa xafiiska shaqada bulshada ee degmada Tusla. Eeg Cutubka 4 : Xaqa aan u leeyahay in la iga ilaaliyo waxyeellada, faahfaahin dheeraad ah.

# 2.3 Soo xaadiritaanka dugsiga

## Ma igu waajibaa inaan dugsiga tago?

Haa Waa inaad dhigataa dugsiga laga bilaabo da'da lix jir ilaa aad ka gaadhayso 16 jir, ama inta aad dhammanayso saddex sano oo dugsiga sare ah, hadba labada kii dambeeya. Marka keliya ee laga soo reebay tan waa marka aad wax ku dhex baranayso guriga. Waa inaad jirtaa ugu yaraan afar sano bilawga sanad dugsiyeedka si aad u bilowdo dugsiga.

## Xaq ma u leeyahay in guriga waxa la igu baro?

Waalidka ama cidda kaa masuulka ah ayaa dooran kara inay guriga wax kugu dhex baraan. Si ay tan u sameeyaan, waa inay kaa soo diiwaangeliyaan Adeegga Diiwaangelinta iyo Qiimaynta Waxbarashada Kaduwan ee Tusla. Adeeggu wuxuu la shaqayn doonaa waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah si loo hubiyo in waxbarashadaadu ay buuxisay heerkii loo baahnaa. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo arrintan ku saabsan ka heli kartaa websaydka Tusla.

## Ma waajibaa inaan dugsiga aado maalin kasta?

Haa Waalidka ama cidda kaa masuulka ah waa inay hubiyaan inaad aaddo dugsiga maalin kasta. Waa inay dugsiga u sheegaan oo ay sababeeyaan haddii ay og yihiin inaad maqnaanayso ama markaad ka soo noqoto maqnaanshaha.

## Maxaa dhacaya haddii aan buko ama ay jiraan sababo kale oo aanan u aadi karin dugsiga?

Haddii aadan awoodin inaad xaadirto dugsiga, waalidkaaga ama cidda kaa masuulka ah waa inay la xiriiraan dugsiga, waliba waxa roon qoraal ahaan, si ay sababta ugu sharraxaan. Dhammaan dugsiyadu waxay leeyihiin istaraatiijiyad soo xaadiritaan. Haddii dugsigaagu ka walaacsan yahay soo xaadiritaankaaga, waxay raaci doonaan tillaabooyinka lagu qeexay istaraatiijiyada. Haddii loo baahdo, waxay soo xaadiris la'aantaada u gudbin doonaa Adeegyada Daryeelka Waxbarashada Tusla.

Haddii aad gooyso 20 maalmood ama ka badan sanad dugsiyeedka ama haddii dugsigaagu ka walaacsan yahay inaad maqan tahay maalmo badan, dugsigu waa inuu u sheegaa Adeegyada daryeelka Waxbarashada ee Tusla. Haddii aan maqnaanshahaaga loo hayn wax sabab ah oo cad, wakaaladu waxay u diri kartaa qof soo booqda waalidkaa ama cidda kaa masuulk ah si ay ugala shaqeeyaan sidii aad u wanaajin lahayd imaanshahaaga dugsiga.



# 2.4 Doorashada dugsi iyo gelitaanka dugsiga

## Ma dooran karaa dugsiga aan rabo inaan dhigto?

Xaq uma lihid inaad doorato dugsiga aad dhigato. Waalidka ama cidda kaa masuulka ah ayaa sida caadiga ah go'aamin doona dugsiga aad codsanayso.

## Ma in uu dugsi i qaataa?

Xaq buuxa uma lihid inaad dhigato dugsiga ay waalidkaa doorteen, laakiin Dawladdu waa inay ku siiso dugsi u dhow gurigaaga kaas oo buuxinaya caqiidada iyo diinta waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah. Dugsiyadu khasab kuma ah inay ilmaha diiwaan geliyaan haddii aanay jirin boosas la heli karo. Dugsiyadu waa inay raacaan nidaamka diiwaan gelinta dugsiga marka boosaska la qoondeynayo.

## Xeerarkee bay tahay in dugsigu raaco marka arday la qorayo?

Dugsi kastaa waa inuu lahaadaa siyaasad arday qoritaan, taas oo ay heli karaan dadwaynaha. Guud ahaan, dugsiyadu kuguma diidi karaan inay ku aqbalaan iyadoo lagu salaynayo mid ka mid ah sababahan sinnaanta:

- jinsigooda
- xaaladda guurka ama madaniga ah ee waalidkaa
- xaaladda qoyska, tusaale ahaan haddii aad ka tirsan tahay qoys hal waalid leh
- jihayntooda galmo
- diintooda
- naafanimadooda
- midabkooda
- heerka xubinnimada bulshada Traveller.

Waxaa jira waxyaabo tan laga soo reebay. Tusaale ahaan, dugsiyada habluhu waxa xaq loogu leeyahay inay diiwaan geliyaan gabdhaha oo keliya. Taas mid la mid ah ayay xaq u leeyihiin dugsiyada wiilasha. Dugsiyadu haddda ka dib diinta uma isticmaali karaan shuruud xulasho markay ardayda ka diiwaangelinayaa dugsiga, xitaa marka ay arday xad-dhaaf ah dugsigooda qoran tahay, marka laga reebo dugsiyada bixiyo casharro diimeed oo loogu talagalay diimaha dadyoowga kooban haystaan sida Kaniisadda Ireland, Yuhuudda ama Muslimiinta maadaama ay adkaan karto in la helo dugsi bixiya casharadan oo kale.

## Sidee baan u codsadaa inaan ilmahayga dugsi qoro?

Boosaska dugsiga waxaad codsan kartaa waqti kasta inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka. Waa inaad had iyo jeer qoraal ahaan ugaga codsataa Xoghayaha Guddida Maamulka. Haddii dugsigu leeyahay foom codsi, waa inaad ku codsataa foomkan - wuxu noqon karaa foom onlayn ah. Waa inaad had iyo jeer taariikhda ku qortaa warqadda codsiga oo aad nuqul kala harto codsiga iyo dukumeenti kasta oo aad soo gudbiso.

## Xaq ma u leeyahay inaan dacwoodo haddii ilmahayga loo diido in dugsiga la qoro?

Haa Dugsiga aqbalaadda ilmaha wuxu u diidi karaa keliya si waafaqsan Siyaasadda Aqbalaadda dugsiga ee daabacan. Dugsigu kuma diidi karo in ilmo la qoro isagoo ku salaynaya sababaha sinnaanta ee kor lagu xusay.

Haddii dugsigu diido inuu ilmahaaga diwaangeliyo, waxaad u dacwoon kartaa Guddiga Maamulka Dugsiga. Haddi ay taasi guuldaraysato, waxaad racfaan u qaadan kartaa Xoghayaha Guud ee Wasaaradda Waxbarashada.

Adeegga Daryeelka Waxbarashada Qoyska iyo Ilmaha ayaa talo ula diyaar ah waalid ama masuul ilmeed oo kasta oo raba inuu racfaan qaato. Waxaad sidoo kale caawinaad weeydiisan kartaa Guddiga Xuquuqda Aadanaha iyo Sinaanta ee Ireland si aad uga cabato Guddiga Xiriirka Goobta Shaqada ama U-doodaha Caruurta . Wixii macluumaad dheeraad ah, eeg Websaydka Waaxda Waxbarashada.

# 2.5 Manhajka dugsiga iyo imtixaanadka

## Yaa go'aaminaya waxa aan dugsiga ku baranayo?

Wasiirka waxbarashada ayaa dejiya manhajka (madooyinka la baranayo). Waxay tixgalinayaan talada Golaha Qaranka ee Manhajka iyo Imtixaanaadka. Dugsigaaga iyo macalimiinta ayaa go'aaminaya qaybaha manhajkaas ee aad ku baran doonto dugsiga maalin kasta. Manhajka dugsiga dhaqankiisa iyo dabcigiisa, sida diinta, u gaarka ah waa in lagu dhigaa dugsiga muddo 30 daqiiqo maalin kasta heerka dugsiga hoose. Guddida maamulka dugsiga, oo ah hay'adda aasaastay dugsiga, ayaa go'aamisa nooca casharadani noqonayaan.



## Xaq ma u leeyahay inaan doorto maadooyinka aan dugsiga ku dhiganayo?

Sideeda sano ee ugu horeysa ee aad dugsiga dhiganayo (laga bilaabo dhallaanka yaryar ilaa fasalka lixaad), waxaad baran doontaa manhajka laguu dejiyay.

Dugsiga sare markaad gaarto maadooyin ayaad ka dhex xulan kartaa manhajka. Si kastaba ha ahaatee, waa inaad barataa Ingiriisiga, Xisaabta iyo Irishka. Xaaladaha qaarkood waa lagaa dhaafi karaa barashada Irishka. Wixii macluumaad dheeraad ah gal shabakada Curriculum Online.

## Diinta ma waxa la iga rabaa inaan ku dhigto dugsiga?

Maya, laakiin waa inaad diinta barataa illaa iyadoo waalidkaaga ama mas'uulkaagu kuu sheego ineeynan khasab ahayn maahane. Haddii aad ka weyn tahay 18 sano adiga ayaa go'aan ka gaari kara arrintaas. Haddii aadan haysan diinta dugsiga lagu barto, ama aadan diinba haysan, waajib kuguma aha inaad tagto xiisadaha diinta. Waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah ayaa dalban kara in aadan ka qayb qaadan fasalkan, dugsiguna waa inuu oggolaadaa tan.

Haddii aad haysato diin ka duwan tan dugsigaaga, dugsiga waajib kuma aha inuu casharro diintaada ah kuu siiyo.

Kuwa aan rabin barashada diinta, Dugsiyada Hoose ee Boostada Bulshada iyo Guddiga Waxbarashada iyo Tababarka (ETB) waa in ay bixiyaan maadooyin ama maadooyin kale. Dugsigu waa inuu waalidka ogeysiiyaa in xiisadaha beddelka ah la heli karo. Adiga iyo waalidkaaga waa in la idinka codsadaa inaad kala

doorataan barashada diinta iyo maadada ama maadooyinka beddelka ah ee uu bixiyo dugsigiinu.

## Ma igu waajibaa inaan qabto shaqo-guriga/ layliska?

Haa Dugsi kastaa wuxuu dejiyaa xeerar iyo siyaasado u gaar ah shaqada-guriga iyo arday ahaan waa inaad raacdaa xeerarka iyo siyaasadaha dugsigaaga.

## Ma igu waajibbaa inaan galo ama u fariisto imtixaano?

Waa inaad raacdaa xeerarka dugsiga ama siyaasadda kuwaas oo ay ku jiri karaan inaad imtixaano ama tijaabooyin gasho. Ardayda dugsiyada hoose dhexe waxay geli doonaan imtixaanada akhriska iyo xisaabta fasalada 2aad, 4aad iyo 6aad. Sharcigu ma odhanayo waa inaad u fadhiisataa imtixaanada shahaadiga ah ee Dugsiga Dhaxe iyo Imtixaanada Shahaadiga Dugsiga Sare. Si kastaba ha ahaatee, Shahaadada Ka Bixitaanka Dugsiga Sare waa habka ugu badan ee loo galo waxbarashada heerka saddexaad (jaamacaddo iyo kulliyadaha heerka saddexaad).

Waxa kale oo jira ikhtiyaaro kale oo waxbarasho sida:

- • Shahaadada Dugsiga Ka Bixista La Dabbaqay
- • Shahaadooyinka Tayada iyo Aqoonta Ireland (QQI)
- • koorsooyinka kale iyo barnaamijyo kale oo ka qaybgelineed.

Haddi aad guriga wax ku dhigato ma aha in aad gasho imtixaanada rasmiga ah sida imtixaanka shahaadiga dugsiga hoose ama ka dugsiga sare, laakin waxa aad waydiisan kartaa waalidkaaga ama masuulkaaga in uu kuu aagisimo imtixaanadaas. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa bogga internetka ee Guddiga Imtixaanaadka Gobolka.

## Rafcaan ma ka qaadan karaa natiijooyinka imtixaanadayda Dugsiga Dhexe ama imtixaanada Dugsiga Sare ee shahaadiga ah aan u maleynayo in aanay caddaalad ahayn?

Haa Si aad rafcaan uga qaadato natiijo maado Imtixaanaadka Dugsiga Hoose, la hadal dugsigaaga isagaana kaaga codsan doona Guddiga Imtixaanaadka Gobolka. Si aad rafcaan uga qaadato natiijada maado Imtixaanka Shahaadiga ee Dugsiga sare waa inaad:

- buuxiso foomka racfaanka oo aad ka heli karto dugsigaaga
- foomka u dir Guddiga Imtixaanaadka Gobolka.


Labada imtixaanba maado walba oo aad rabto in aad rafcaan ka qaadato waa lacag la'aan.

# 2.6 Golaha ardayda

Guddiyada ardayda waxay u ogolaadaan ardayda heerka labaad si ay maamulka dugsiga, shaqaalaha, iyo waalidiinta ugala shaqeeyaan wixii dugsiga iyo ardayda u dan ah.

## Ma aasaasi karaa golaha ardayda dugsigayga?

Haa Ardayda dhigata dugsiyada hoose dhexe waxay xaq u leeyihiin inay sameystaan guddi arday iyo inay gacan ka helaan dugsiga si ay taas u sameeyaan. Websaydka Waaxda Waxbarashada waxa ku jira kayd xidhmo oo khuseeya guddiyada ardayda oo laga yaabo inay ku caawiyaan.



# 2.7 Anshaxa dugsiga

## Maxaa dhacaya haddii aan dhibaato kala kulmo dugsiga?

Haddii aad dhibaato kala kulanto dugsiga dugsigaagu waa inuu lahaadaa nidaam uu raacayo. Marka ardaydu khalkhal galiyaan fasalka ama jebiyaan xeerarka, nidaamku waa inuu si cadaalad ah ula macaamilaa. Guddiga maamulka ee dugsi kasta waa inuu lahaadaa xeerka anshaxa ardayga. Xeerka dhaqanku wuxuu sharraxayaa xeerarka ay tahay inaad raacdo intaad dugsiga dhiganayso. Xeerku wuxu sidoo kale sheegi doonaa waxa dhacaya haddii aad raaci waydo shuruucda dugsiga.

Dugsigaagu wuxuu ku siin doonaa adiga iyo waalidkaaga ama mas'uulkaaga nuqul ka mid ah xeerka anshaxa marka aad is-diiwaangeliso. Dugsigu waxa laga yaabaa inuu waalidkaaga ama cidda kaa masuulka ah weydiiyo inay qoraal ku xaqiijiyaan inay oggol yihiin xeerka iyo inay sameyn doonaan wixii karaankooda ah si ay kaaga caawiyaan inaad u hoggaansanto shuruucda.

Haddii aad dhibaato ka geysato dugsiga, dugsigu waxa laga yaabaa inuu tixgeliyo dhawr waxyaabood sida:

- **haynta** – waa in dugisga lagugu hayo xilliga qadada ama dugsiga lagugu sii hayo hal saac ama wax la mid ah rawaxaadda ka dib
- **la wareegidda** – waxa laga yaabaa in dugsigu kaa qaado shay, sida telefoonka gacanta
- **si ku meel gaadh ah oo lagaaga saaro fasalka** - waxaa laguu soo diraya xafiiska maamulaha.

Haddi akhlaaqdaadu aad u liidato, dugsiga waa laga joojin karaa muddo ama xitaa lagu eryi karaa. Si kastaba ha ahaatee, dugsigu waa inuu si cadaalad ah u dhaqmaa oo ku siiyo fursad aad fikradaada ku dhiibato.

## Maxaa dhacaya haddii dugsiga layga joojiyo?

Joojinta macneheedu waa laguuma ogola inaad dugsi dhigato maalmo go'an. Dugsiga waxa lagaaga joojin karaa dhaqan-xumo daran. Go'aanka dugsigu waa inuu noqdaa mid macquul ah oo ka tarjumaya halista waxaad samaysay. Dugsiyadu waa inay lahaadaan nidaamyo muujinaya talaabooyinka ay tahay inay qaadaan ka hor intaanay dugsiga kaa joojin. Haddii dugsiga lagaa joojiyo iyada oo aan la raacin nidaamka dejisan racfaan ayaad ka qaadan kartaa go'aankooda.

# Maxaa dhacaya haddii dugsiga layga ceyriyo?

Cayrintu waxay la macno tahay inaadadan iman karin dugsiga hadda ka dib. Sharci ahaan, dugsiyadu waa inay lahaadaan nidaamyo qeexaya tillaabooyinka ay tahay inay qaadaan ka hor intaanay ardayda cayrin. Tusaale ahaan, Guddiga Maamulka Dugsigu waa inay u sheegaan Adeegga Daryeelka Waxbarashada in dugsigu uu doonayo inuu ku cayriyo.

Dugsigu waa inuu markaas sugo ugu yaraan 20 maalmood ka hor inta aanu ku cayrin. Xaaladaha qaarkood waxaa laga yaabaa in dugsiga lagaa joojiyo illaa inta cayrinta laga gaarayo.. Adeegga Daryeelka Waxbarashadu waxa uu isku dayi doonaa in uu helo hab uu kaga hortago cayrinta oo uu hubiyo in aad wali waxbarasho sii hesho, sida in dugsi kale laguu geeyo.

## Rafcaan ma ka qaadan karaa dugsiga ka joojinta ama ka cayrinta?

Haa, laakiin adigu shaqsiyan racfaanka ma qaadan kartid, waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah ayaa rafcaanka qaadan kara. Waa inay marka hore rafcaan u gudbiyaan Guddiga Maamulka Dugsiga. Haddii tan lagu guulaysan waayo, waxay racfaan u qaadan karaan Waaxda Waxbarashada.

Guddiga rafcaanka ayaa dhageysan doona rafcaanka oo talooyin u soo jeedin doonaa Xoghayaha Guud ee Waaxda tallaabada la qaadayo. Xoghayaha Guud ayaa markaa go'aanka iyo sababaha go'aanka warqad ugu soo diri doona waalidkaaga ama cidda kaa masuulka ah iyo Guddiga Maamulka Dugsiga.

Xoghayaha Guud wuxuu kaloo u sheegi karaa Guddiga Maamulka sida loo xallinayo arrinta. Haddii aad u baahan tahay macluumaad iyo taageero waxaad la xidhiidhi kartaa Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta:

- taleefan, 01-902 0494
- iimayl, help@childrensrights.ie.

# Maxaan sameeyaa haddii macalin wax igu dhufto intaan dugsiga joogo?

Qofna looma oggola inuu wax kugu dhufto ama sinnaba jidh ahaan kuugu xadgudbo. Haddii uu macalin ama qof kale kugu tacaddiyay dugsiga intaad joogto, waa inaad u sheegtaa waalidkaaga ama cidda kaa masuulka ah, ama qof weyn oo aad ku kalsoon tahay. Adiga, ama waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah oo ku metelaya, ayaa u dacwoon kara Booliska. Waalidka ama cidd kaa masuulka ah waxay sidoo kale u dacwoon karaan dugsiga iyagoo ku metelaya. Waxaad sidoo kale u dacwoon kartaa Golaha Waxbarashada ee Ireland.


# Maxaan samayn karaa haddii aan u maleeyo in macalinkaygu uu iila dhaqmayo si aan cadaalad ahayn?

Si toos ah cabasho uma samayn kartid, laakiin waalidkaaga ama qofka masuulka ka ah ayaa iyagoo ku meteleya toos ugu caban kara macalinka. Haddii aadan ku faraxsanayn jawaabta macalinka, waalidkaaga ama cidda kaa masuulka ah waxay u dacwoon karaan maamulaha dugsiga. Haddii arrinta aan la xallin, waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah waxay u dacwoon karaan Guddiga Maamulka Dugsiga.

Ugu dambeyntii, haddii aad dareento in habka cabashadaada uu u maamulay dugsigu ay ahayd mid aan cadaalad ahayn, waxaad u dacwoon kartaa Xafiiska U-doodaha Carruurta, wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg Cutubka 10: Halkee ayaan caawimo ka heli karaa?

Haddi ay cabashadu ku saabsan tahay takoorid, waalidkaaga ama cidda kaa masuulka ah waxa laga yaabaa inay u dacwoodaan Guddiga Xidhiidhka Goobta Shaqada. Wixii dheeraad ah, ka eeg Qaybta 1: Xaqa aan u leeyahay in si siman la iila dhaqmo, la iga qaybgeliyo gaarista go'aamadayda. Si tan loo sameeyo, laba bilood gudahood oo ka bilaabmaya falkii u dambeeyay ee takoorka ahaa, waa inaad marka hore ku wargeliso arrinta dugsiga aad ka samaynayso cabashada. Haddii aadan ku qanacsanayn sida dugsigu uga jawaabay kiiska, ama uu ku guuldareysto inuu ka jawaabo muddo hal bil gudaheed ah, waxaad u dacwoon kartaa Guddiga Xiriirka Goobta Shaqada. Waa inaad tan ku samaysaa muddo lix bilood gudahood ah oo ka bilaabmaysa falkii takoorka ee u dambeeyay.

Haddii cabashadu ku saabsan tahay arrin la xiriirta ilaalinta xogta, waxaad u dacwoon kartaa Wakiilka Ilaalinta Xogta (faahfaahintu waxay ku qoran tahay 'Tusmada ururada iyo hay'adaha waxtarka leh' ee ku yaal gadaasha hagahan).



# Mudaaharaad ma ku dhex qaban karaa dugsiga?

Dugsigu waa hanti gaar loo leeyahay. Haddii aad rabto inaad mudaaharaad ku dhex qabato hanti gaar loo leeyahay waa inaad fasax ka dalbataa maamulayaasha iyo mulkiilayaasha, markan ciddaasi waa maamulaha iyo Guddiga Maamulka. Waxaad xaq u leedahay inaad mudaharaad nabad ah ku qabato meel fagaare ah. Waa inaad la xiriirtaa Gardaí (Booliska Ireland) si aad u ogeysiiso inaad qorsheyneyso inaad mudaharaad qabanayso. Marka sidan aad sameyso baabuurta ayay idinka duwi karaan oo waxay hubin doonaan inaad mudaaharaadkaaga si nabad ah u qabsato.

# Sidee baan ugu dacwoon karaa dugsiga ilmahayga?

Haddii aad rabto inaad ka cabato waxbarashada ama sida ilmahaaga loola dhaqmay, waa inaad raacdaa tillaabooyinkan.

1. Si toos ah ula hadal macalinka ilmahaaga, adoo raacaya habka lagu dejiyay siyaasadaha dugsiga.
2. Haddii arrinta la xallin waayo, la hadal maamulaha dugsiga.
3. Haddii loo baahdo, iyo haddii cabashadu khusayso macallin, warqad u qor maamulaha dugsiga.
4. Haddii maamuluhu ku guul-darraysto inuu xalliyo cabashada, warqad u qor guddoomiyaha Guddiga Maamulka Dugsiga. Guddoomiyuhu wuxuu cabashada u gudbin doonaa guddi-hoosaad kuwaas oo baari doona kuuna soo jawaabi doona.
5. Haddi aanad ku raacsanayn natiijada baadhista, warqad u qor gudoomiyaha aad go'aanka racfaanka u qaadanayso.
6. Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabta guddoomiyaha, waxaad u dacwoon kartaa U-doodaha carruurta.
7. Waxa kale oo aad heli kartaa talo sharci si aad u aragto haddii ay jirto sababo sharciyeed oo aad u caban karto. Waxaad talobixin sharci oo bilaash ah ka heli kartaa Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta ama Xarumaha La-talinta Sharciga ee Bilaashka ah.

Waaxda Waxbarashada wax door ah kuma laha cabashada dugsiga. Haddii aad u baahan tahay macluumaad iyo taageero waxaad la xidhiidhi kartaa Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta:

- taleefan, 01-902 0494
- • iimayl, help@childrensrights.ie.

# 2.8 Cagajuglaynta/ cawaanadada

## Waa maxay cagajuglayntu?

Cagajuglayntu waa hab-dhaqan waxyeello leh oo ay qof ama koox u geystaan qof taas oo soo noqnoqota muddo ka dib. Cagajuglayntu waxay noqon kartaa hadal, mid nafsi ah ama waxyeelo gacan ah oo:

- si toos ah laguugu geysto
- telefoon laguu soo mariyo
- khadka laguu soo mariyo.

U xoog-sheegashadu waxay qofka ku yeelan kartaa saamayn shucuureed iyo mid nafsiyeed oo daran. Dabeecadda cagajuglaynta waxay yeelan kartaa qaabab badan oo ay ka mid yihiin:

- in si ula kac ah laagaga saaro koox ama hawl
- xan xun oo kugu saabsan.

Cagajuglayntu waxa kale oo ka mid noqon kara in farriin gardarro ah ama dhibaato leh laguu dhigo meel ay ka arki karaan ama ay ka koobiyayn karaan dadka kale, tusaale ahaan, sawir ama oraah la dhigay:

- shabakad bulsho
- meel fagaare dadwayne ah oo kale
- websayd.

Waxa kale oo lagugu cagajuglayn karaa iyadoo aqoonsigaga dartiis. Tani waa cagajuglayn ay sababtay:

- inaad khaniis tahay ama beddeshay jinsigaaga
- jinsiyad kale tahay
- Traveller tahay
- naafo tahey
- aad leedahay baahiyo waxbarasho oo gaar ah.

Haddii laguu cagajugleeyo, waxaad xaq u leedahay in lagu ilaaliyo. Qofna waa inuusan kuu xoogsheegan sabab kastaba ha ahaate.

# Maxaa la gudboon dugsiga haddii la ii cagajugleeyo ama haddii saaxiibkay loo xoogsheegto?

Marka hore, waa inaad cagajuglaynta u sheegtaa macalinkaaga, maamulaha dugsiga ama qof kale oo aad aaminsan tahay. Dugsiyadu waa inay lahaadaan siyaasad ay wax kaga qabtaan cagajuglaynta. Siyaasaddani waa inay si cad u sheegto in cagajuglaynta aan la aqbali karin.

Dugsigu waa inuu lahaadaa:

- habraacyada (tilmaamaha) baarista iyo la tacaalida cagajuglaynta
- hababka lagu caawinayo dadka ay saameeyso cagajuglayntu
- xeeladaha lagaga hortagayo in cagajuglayntu marka horeba dhacdo
- diiwaan ay ku qoran yihiin waxa ay kula tacaalaan cagajuglaynta.

# Sidee baan ku hubin karaa inaan ixtiraamo dadka kale?

Waa muhiim inaad ixtiraamto arrimaha iyo xudduudaha dadka kale, jirkooda iyo alaabtooda labadaba. Tan waxa ka mid ah qofka:

- jirkiisa
- taleefankiisa
- shandadiisa
- laabta miiskooda dugsiga saaran.

Mararka qaarkood waxaa dhici karta in hab-dhaqankaaga la fahmi waayo, oo uu qofku u maleeyo inaad u xoogsheegatay. Si aad uga fogaato in qof sidan kaaga fekero waxa jira waxyaabo aad sameyn karto.

## Xakamee dabeecadaada

Marka qof ku dhaho jooji, waa inaad maqasho oo joojisaa waxaad samaynayso.

## Ha ku biirin fal cagajuglayn ah

Ha ku lug yeelan hawlo cid lagu faquuqayo ama si ula kac ah dad kale dareenkooda loogu xumanayo.

## Baro filashooyinka goobaha kala duwan

Sharciyada goobaha kala duwan way kala duwanaan karaan sida:

- xaafadda
- dugsiga
- naadiga ciyaaraha
- dhaqamada kala duwan.

Waxa hal meel laga aqbalo waxa laga yaabaa in aan laga aqbalin meel kale. Haddii aadan hubin waxa habboon, weydii qofka kale waxa la aqbali karo.

# 2.9 Asturnaanta dugsiga

## Asturnaan xaq ma u leeyahay markaan dugsiga joogo?

Asturnaanta dugsigu waa inaad dhigato dugsiga iyadoo aanu dugsigu soo faragelinayn:

- noloshaada gaarka ah
- booskaaga gaarka ah
- jirkaaga
- alaabtaada.

Waxaa jira xaalado qaarkood uu dugsigu faragelin karo sirtaada ama asturnaantaada. Tusaale ahaan, macalinku wuxuu baari karaa boorsadaada haddii ay aamminsan yihiin inaad ku sidato walxo sharci darro ah ama khamri. Si kastaba ha ahaatee, adiga iyo waalidkaaga ama cidda kaa masuulka ah waa in aad aqbashaan tan.

Waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah waa inuu joogaa hadii macalinku rabo inuu ku baadho, tusaale ahaan, si uu u eego waxa jeebabkaaga ku jira.

Khaanadaada waxa leh dugsiga, laakiin waxaad xaq u leedahay asturnaan inaad ku hesho khaanadda laguu asteeyay inta lagu jiro sannad dugsiyeedka. Macallinku waa uu baadhi karaa khaanadaada, laakiin waa haddii ay sabab fiican u haystaan. Macallinku waa inuu kuu sheegaa sababta ay u baadhayaan khaanadaada.

## Waalidkaygu xaq ma u leeyahay inuu ogaado sida aan dugsiga ku ahay?

Haa, waalidkaa ama qofka masuulka ka ah waxay xaq u leeyihiin in lagu wargaliyo waxbarashadaada iyo dhaqankaaga dugsiga. Tan waxa badanaa la soo raaciyaa warbixinnada dugsiga, oo waalidiintu helaan hal mar sannadkii, iyo shirarka waalidka iyo macallimiinta ama nidaamyada online-ka ah halkaas oo waalidiintu ay geli karaan oo ay ku arki karaan sida ilmahoodu yahay.

## Xaq ma u leeyahay inaan arko diiwaankayga dugsiga?

Maya illaa aad ka gaarayso da'da 18. Da'dani marka dugsigu diiwaanada dugsiga ka dhigo kuwo aad heli karto haddii aad dalbato. Inta ay da'doodu ka yar tahay 18, waalidkaa ama qofka kaa masuulka ah ayaa kuu eegi karaa diiwaankaaga.

## Macallinkaygu ma eegi karaa taleefankayga?

Xeerka anshaxa dugsigaaga ayaa sheegi doona in dugsigaga laguugu oggolyahay taleefanka gacanta iyo waxa dhacaya haddii aad taleefan dugsiga la timaaddo. Haddi ay ka soo horjeedo sharciga dugsiga in talefan lagu isticmaalo dugsiga, macalimiinta inta badan waa loo ogolaan doonaa inay kaa qaadaan. Macallinkaagu waa inuusan taleefoonkaaga fiirin iyagoo aan oggolaansho adiga iyo waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah oggolaansho ka haysan.

# 2.10 Kharashka dugsiga

## Ma heli karaa kaalmo dhaqaale si aan u bixiyo kharashka ubadkaygu ku aadayo dugsiga?

Waxaa jira tiro deeqo ah oo la heli karo. Deeqahani waxa lagu saleeyay dakhligaaga oo si aad ugu qalanto waa inaad buuxisaa shuruudo dhawr ah.

Noocyada kaalmada dhaqaale waxaa ka mid ah Gunnada Dharka iyo Kabaha ee Ku-noqoshada Dugsiga

Intaa waxaa dheer, haddii aad haysato kaarka caafimaadka waxaa laga yaabaa inaadan bixin kharashka imtixaanka.

Waxaad xog dheeraad ah ka heli kartaa websaydka Waaxda Ilaalinta Bulshada.

Dugsiyada qaarkood waxay leeyihiin nidaamyo u gaar ah si ay waalidka uga caawiyaan kharashyada. Si aad u ogaato haddii dugsiga ilmahaagu leeyahay nidaam, la xidhiidh dugsiga.

# 2.11 Baahiyaha waxbarasho ee dheeraadka ah

Haddii aad leedahay baahi waxbarasho oo gaar ah, waxaad xaq u leedahay waxbarasho ku habboon baahiyahaaga.

## Xaq ma u leeyahay in la iila dhaqmo si la siman ardayda kale?

Haa, waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo si la siman ardayda kale. Waa inaan laguula dhaqmin si ka liidata ardayda kale ee aad isku xaaladda tihiin naafonimadaada darteed. Wax badan oo arrintan ku saabsan ka eeg Cutubka 1: Xaqa aan u leeyahay in si siman la iila dhaqmo, la iga qaybgeliyo gaarista go'aamadayda.

## Xagee dugsiga ka dhigan karaa haddii aan leeyahay baahiyo waxbarasho oo gaar ah?

Waxaad wax ku baran kartaa:

- fasalka caadiga ah ee dugsiga hoose dhexe ama dugsiga ka dambeeya dugsiga hoose
- fasal gaar ah oo dugsiga hoose-dhexe aha ama kadib dugsiga hoose ah oo ka arday yar fasallada kale
- dugsi gaar ah oo loogu talagalay ardayda leh baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah.

Sharcigu waxa uu dhigayaa in ubadka leh baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah, haddii ay suurtogal tahay, wax lagu baro dugsiyada caadiga ah ee ay dhigtaan ardayda aan qabin baahiyaha gaarka ah. Tan waa in la sameeyo illaa iyadoo aanay kuu roonayn ama u roonayn carruurta kale ee fasalka kula dhiganaya maahane.

# Ma heli doonaa taageerooyin dheeraad ah haddii aan aado dugsiga hoose ee caadiga ah?

Taageero waxbarasho ama macalinka waxbarashada gaarka ah ayaa laga yaabaa inay ku siiyaan taageero waxbarasho oo dheeraad ah. Waxa kale oo laga yaabaa in lagu siiyo taageerooyinka Kaaliyaha Baahiyaha Gaarka ah (SNA) haddii aad qabto baahiyo daryeel oo daran. SNA ayaa kaa caawin doona hawlaha ficil ahaan loo qabto, sida dhex socsocodka dugsiga.

Dhammaan dugsiyada hoose waxay leeyihiin tiro macalimiin waxbarashada gaarka ah ama shaqaale taageera waxbarashada. Tirada macalimiinta waxbarashada gaarka ah ee loo qoondeeyay dugsiga waxaa lagu go'aamiyaa xajmiga dugsiga iyo barofaylkiisa waxbarasho. Intaas ka dib dugsiyada ayaa go'aamiya sida macallimiintaas loo qoondeynayo iyadoo loo eegayo baahida ardayda dugsiga.

Dugsigu wuxuu bixiyaa taageero iyadoo la tixgalinayo baahidaada waxbarasho. Uma baahnid in si rasmi ah laguugu aqoonsado qof naafo khaasa ah. Waxbarashada dheeraadka ah waxaa lagu bixin karaa fasalka dhexdiisa ama iyadoo ardayda kooxo yaryar loo qaybshay.

Dugsigu waxa kale oo uu ka codsan karaa Golaha Qaranka ee Waxbarashada Gaarka ah (NCSE) taageero waxbariseed oo dheeraad ah ama inaad hesho taageerada SNA haddii aad leedahay:

- baahi caafimaad oo weyn oo gargaar daryeel u baahan
- naafonimo wayn oo dhanka jirka ama dareemada ah sida naafonimo jireed ama mid maskaxeed
- baahi keenaysa in dhaqankaagu khatar gelinayo naftaada iyo nafaha ardayda kale.

Waxaad u baahan doontaa in si rasmi ah laguu qiimeeyo si aad u hesho taageeradan iyo taageerada SNA.

# Ma dacwoon karaa haddii aan dareemo inaanan helin taageerada aan u baahanahay?

Haddii aad dareento inaan lagu siin taageerada aad u baahan tahay, waalidkaa wuxuu Qabanqaabiyaha Baahiyaha Waxbarashada Gaarka ah ee deegaanka (SENO) ka codsan karaa inuu sharraxo sababta aadan u helin taageerada.

Waxaad dugsiga ka dalban kartaa racfaan haddii aad dareento in qaar ka mid ah macluumaadka aad bixisay aan xisaabta lagu darin ama haddii aad dareentid in dugsiga saxda ah ama siyaasadda Waaxda Waxbarashada aan la tixgelin. Maadaama dhammaan agabka, sida SNA-yada ama macallimiinta taageerada waxbarashada, loo qoondeeyay dugsiga, waa in ay iyagu sii gudbiyaan wixii racfaano ah.

Haddii aad dareento in habka racfaanku aanu si sax ah u shaqayn, waxaad codsan kartaa in go'aanka loo gudbiyo Guddiga La-talinta Racfaanka. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg shabakada NCSE.

## Haddii aan taageero dheeraad ah ku heli jiray dugsiga hoose, ma ku heli doonaa heerka dugsiga hoose ka dib?

Si toos ah uma heli doontid taageerooyin dheeri ah sida taageero waxbarid oo dheeri ah ama caawinaad baahiyo gaar ah markaad aado dugsiga hoose dhexe kadib. Waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah ayaa hubin kara in dugsigaaga hoose uu soo diro dhammaan warbixinada dugsiga hoose ka hor inta aanad iman.

Haddii aad u baahan tahay taageero joogto ah, dugsigu waxa laga yaabaa inuu ku siiyo xoogaa taageero waxbarasho oo dheeraad ah oo laga helo kooxda waxbarashada taageerta. Haddii kale, waxay codsi u gudbisan karaan Golaha Qaranka ee Waxbarashada Gaarka si ay u helaan khayraad dheeraad ah. Tani waxay ka dhigan tahay in waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah ay ku qasban yihiin inay soo gudbiyaan warbixinnada caafimaadka ee ku saabsan baahiyahaaga gaarka ah si goluhu u qiimeeyo inay ku siinayaan taageerooyin dheeraad ah iyo in kale. Tan waxaa ku jira taageerada SNA haddii ay baahidaadu sii jirto. Wixii dheeraad ah ka eeg bogga Golaha.

## Sidee baan ku heli karaa shuruudaha macquulka ah ee imtixaanada?

Haddii aad ku jirto dugsiga sare oo aad leedahay baahiyo gaar ah, dugsigaagu waxa laga yaabaa inuu kuu sameeyo qabanqaabo gaar ah markaad u fadhiisanayso imtixaanada Gobolka sida Imtixaanada Shahaadiga ah ee Dugsiga Sare iyo Dugsiga Hoose. Haddii aad naafo tahay, tusaale ahaan aad indhaha ka naafo tahay, waxaad ka codsan kartaa dugsigaaga adeegyo macquul ah inta lagu jiro imtixaannada sida qof wax kuu qora ama kuu akhriya.

Haddii aadan ku qanacsanayn qabanqaabada la sameeyay, waxaad rafcaan u qaadan kartaa golaha rafcaannada ee madaxbannaan.

Wixii macluumaad dheeraad ah la hadal dugsigaaga ama eeg bogga websaydka Guddiga Imtixaanaadka Dowladda.

# Xaqa aan u leeyahay caafimaadka

Cutubka 3

# 3.1 Daryeelka Caafimaadka

## Xaq ma u leeyahay daryeel caafimaad?

Haddii ay xaalad caafimaad oo degdeg ahi jirto, qof kasta oo Ireland jooga waxay xaq u leeyihiin inay tagaan qaybta shilalka iyo xaaladaha degdega ah ee isbitaalkooda. Waxa laga yaabaa intay kharash kugu keento illaa iyadoo dhakhtarkaaga qoyska (GP) kuu gudbiyo ama kaar caafimaad haysta maahane.

Adeegyada caafimaadka qaarkood waa bilaash. Kuwaas waxaa ka mid ah:

- daryeelka hooyada iyo dhallaanka
- adeegyada caafimaadka ee carruurta aan dugsiga gaarin
- adeegyada caafimaadka dugsiga
- tallaalada
- adeegyada talaalka.



## Xaq ma u leeyahay in aan helo tallaal bilaash ah?

Haa, waxaad xaq u leedahay tallaal bilaash ah. Waxaad u baahan tahay ogolaanshaha waalidkaa haddii aad ka yar tahay 16 sano jir. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg Websaydka Xafiiska Talaalka Qaranka.

## Waa maxay daryeelka caafimaadka dhalmada ka dib ee bilaashka ah ee ilmahaygu heli doono?

Sida ku cad Barnaamijka Caafimaadka Carruurnimada Qaranka, kaas oo bilaash u ah dhammaan carruurta, Kalkaaliyeyaasha Caafimaadka Dadweynaha iyo Dhakhaatiirta Caafimaadka Bulshada waxay siiyaan 'Baaritaan Caafimaadka Carruurta iyo Koritaanka' carruurta laga bilaabo dhalashada ilaa sannadka ugu horreeya ee dugsiga heerka labaad (talaalada dugsiga).

Sida uu qabo Qorshaha Daryeelka Hooyada iyo Dhallaanka, GP-gaagu waxa uu baari doonaa ilmahaaga laba toddobaad markuu jrio adiga iyo ilmahaagana lix toddobaad ka dib marka ilmuhu dhasho.

Tallaal kala duwan ayaa la siinayaa ilmahaaga marku jiro laba bilood, afar bilood, lix bilood iyo hal sano.

Si aad wax badan uga ogaato kuwan iyo macluumaadka kale ee caafimaadka dhalmada ka dib eeg websaydka My Child.

## Waa maxay daryeelka caafimaadka bilaashka ah ee ilmahaygu ku heli doono dugsiga?

Ilmo kastaa wuxuu xaq u leeyahay adeegyada caafimaadka dugsiga. Carruurta ka yar lix sano ama dhigata dugsi qaran, waxay heli doonaan baaritaanno caafimaad oo bilaash ah. Inta badan waxaa ka mid ah:

- ka-hortagga cudurrada faafa ee gaarka ah
- qiimeynta korriinka
- booqashooyinka kalkaaliyayaasha caafimaadka dadweynaha
- rugaha daryeelka carruurta
- baaritaanada caafimaadka dugsiga.

Dugsiyada hoose ee gaarka loo leeyahay adeega way dalban karaa oo Fuliyaha Adeegga Caafimaadka ayaa go'aamin in adeega loo sii fidyo dugsiyadaas iyo in kale.

Haddii wax dhibaato ah laga helo ilkaha, aragga ama maqalka ilmahaaga inta lagu jiro baaritaanka caafimaadka dugsiga, waxaa lagu daweyn doonaa lacag la'aan. Ilmahaagu waxa kale oo uu xaq u leeyahay adeegyo ilkeed oo bilaash ah ilaa da'da 15 sano, haddii ay dhigtaan dugsiga.

## Ilmahaygu xaq ma u leeyahay kaarka caafimaadka?

Ilmuhu waxa uu xaq u yeelan karaa kaarka caafimaadka iyago lagu salaynayo akhliga waalidkood ama cidda ka masuulka ah. Haddii ilmahaagu ku jiro daryeelka Gobolka ama Bixinta Tooska ah, waxay heli doonaan kaarka caafimaadka. Kaarka caafimaadku wuxuu xaq u siinayaa:

- daryeelka isbitaalka oo bilaash ah
- booqashooyinka dhakhtarka
- qalabka caafimaadka oo bilaash ah
- adeegyada ilkaha, aragga iyo maqalka oo bilaash ah.

Waxaa laga yaabaa inaad weli bixiso kharashka daawada xitaa haddii ilmahaagu haysto kaarka caafimaadka.

## Ilmahaygu xaq ma u leeyahay kaarka booqashada dhakhtar guud (GP) ee bilaashka ah?

Dhammaan carruurta da'doodu ka yar tahay lix jir ee ku nool Ireland waxay xaq u leeyihiin inay helaan kaadhka Booqashada GP-ga ee bilaashka ah. Tan waa la fidin doonaa oo waxa la gaarsiin doonaa dhammaan carruurta ka yar da'da sideed bisha Sibteembar 2020.

Kaarka Booqashada Dhakhtarka Guud (GP) ee bilaashka ah ilmahaagu wuxuu xaq u leeyahay:

- booqashooyinka dhakhtarka guud (GP) oo bilaash ah
- qiimaynaha da'da laba iyo da'da shan sano
- Booqashooyinka guriga ee dhakhtar (GP)
- Daryeelka degdega ah ee GP-ga ee saacadaha shaqada ka baxsan
- daryeelka neefta/xiiqda.

Kaarku ma daboolayo kharashka isbitaalka ama kharashka daawada. Kaarka waxaad ka codsan kartaa khadka ama boostada. Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg websaydka HSE.

Carruurta da'doodu ka weyn tahay lix jir, haddii waalidkood ama qofka ilmaha masuulka ka ah aanu u qalmin kaarka caafimaadka, waxa laga yaabaa inay helaan kaadhka dhakhtarka guud (GP) iyadoo ku xidhan xaaladahooda. Tani waxay dabooli doontaa kharashka ku baxa ilmaha waxayna u ogolaan doontaa inay dhakhtarka ku booqdaan bilaash. Haddii ilmuhu ka weyn yahay 16, waxa laga yaabaa inay magacooda ugu qalmaan Kaarka Booqashada Dhakhtarka Guud (GP).

# 3.2 Oggolaanshaha

## Da'dee ayaan ku bixin karaa oggolaanshahayga daawaynta?

Oggolaanshaha daawaynta macnihiisu waa ogolaanshaha qaliinka, caafimaadka ama daaweynta ilkaha. Haddii aad ka yar tahay 16 sano, waalidkaa ama qof kaa masuul ah ayaa la rabaa inay oggolaadaan wixii qalliin, daawayn caafimaad ama mid ilkood ee aad helayso. Si kastaba ha ahaatee, waa in laguu sheegaa daawaynta waana in aragtidaada ama waxa aad ka walaacsan tahay la dhagaysto lana tixgeliyo.

Haddii aad ka weyn tahay 16, waad ogolaan kartaa qaliinka, caafimaadka ama daawaynta ilkaha, oo ay ku jiraan daawayn kasta ama baadhitaano kasta oo loogu baahan yahay si loo ogaado waxa ku dareensiinaya caafimaad darro. Si kastaba ha ahaatee, dhakhaatiirta iyo isbitaallada waxa sidoo kale laga rabaa inay raadiyaan ogolaanshaha waalidkaaga ama qofka kaa masuul ah ka hor inta aysan sameynin wax baaritaan ama daaweyn ah.


Waa inaad 18 jir tahay si aad u bixiso oggolaanshaha daawaynta caafimaadka dhimirka.

## Ma diidi karaa ogolaanshaha daawaynta?

Sharcigu ma caddeynayo in aad diidi karto daawaynta marka aad ka yar tahay 18 jir. Haddii aad ka yar tahay da'da 18, badanaa laguuma oggolaan doono inaad diido daawaynta haddii dhakhtarkaagu aaminsan yahay inay kuu fiican tahay oo waalidkaa ama mas'uulkaaguna ku raaco. Dhakhtarku waa inuu kaa caawiyaa inaad fahanto muhiimada ay leedahay daawaynta.

## Xaq ma u leeyahay inaan arko diiwaankayga caafimaad?

Waxaad arki kartaa diiwaanadaada caafimaadka markaad 18 jir tahay. Haddii aad ka yar tahay 18, waalidkaaga ama qofka kaa masuulka ah ayaa kuu eegi kara. Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa in adiga ama waalidkaaga ama qofka kaa masuulka ah aanay heli karin diiwaannadaada caafimaad haddii takhtar ama isbitaal ay u maleynayaan inaysan kuu roonayn ama ay dhibaato kuu keenayso.



# 3.3 Qarsoodi

## Ma u tagi karaa dhakhtarka keligay waalidkeyga ama qofka iga masuulka ah la'aantood?

Haa Laakin inta aad ka yar tahay 18 sano dhakhtarku kuuma ballanqaadi karo in aanay daaweyntaada u sheegayn waalidkaa ama qofka kaa masuulka ah.

## Xaq ma u leeyahay in xogtayda lay qariyo markaan dhakhtarkayga la kulmo?

Maya. Haddii aad ka yar tahay 16, dhakhtarkaagu waa inuu ku wargeliyaa waalidkaaga ama qofka kaa masuulka ah booqashadaada marka laga reebo xaalado dhif ah. Xitaa haddii aad ka weyn tahay da'da 16, dhakhtarku kuuma dammaanad qaadi karo xog-qarin maadaama waalidkaa ama mas'uulkaagu ay xaq u leeyihiin inay ka codsadaan helitaanka xogtaada caafimaad ilaa aad ka gaadhayso 18 jir. Laakin haddii takhtarkaagu u maleeyo inay adiga kuu fiican tahay haddii waalidkaa aanu ka warqabin booqashadaada, waxay go'aansan karaan inay xogta ka qariyaan.

Haddii dhakhtarka ama kalkaalisada uu ka walaacsan yahay in adiga ama ilmo kale si uun loo waxyeeleynayo ama aad halis ugu jirto in waxyeello ku soo gaadho, sharcigu wuxu ku waajibinayaa inay walaacooda u soo gudbiyaan Tusla.

# 3.4 Carruurta naafada ah

## Macluumaad ku saabsan xuquuqda waxbarasho ee carruurta naafada ah ka eeg Cutubka 2: Xaqayga waxbarashada.

# Ilmahaygu xaq ma u leeyahay in baahidooda la qiimeeyo?

Ilmo kasta oo dhasha ka dib 1 Juun 2002 wuxuu xaq u leeyahay qiimayn bilaash ah oo dhanka caafimaadkooda iyo baahidooda waxbarasho ah oo uu fulinayo sarkaal qiimayneed oo ka socda Adeegyada Naafada ee HSE. Waxaad ku codsan kartaa qiimaynta baahida adoo isticmaalaya foomka codsiga onlaynka ah ee ku jira websaydka HSE. Iyadoo ay jiraan xaalado gaar ah maahane, HSE waa inay:

- ku qirto helista codsigaaga muddo 14 beri gudahood ah
- qiimeynta ku bilaabaan saddex bilood gudahood
- qiimeynta ku dhammeystiraan saddex bilood gudahood.

Haddii ay jiraan dib u dhac ku yimaadda dhammaystirka qiimaynta, waa in laguu sheegaa sababaha oo lagu siiyo wakhti cayiman oo lagu dhammeystirayo.

Qiimaynta ka dib, ayaad heli doontaa warbixinta qiimaynta. Tani waxay muujin doontaa:

- haddii ilmahaagu naafo yahay
- nooca naafada iyo sida ay u daran tahay
- baahiyaha caafimaad iyo waxbarasho ee ka dhalanaya naafonimadaas
- adeegyada loo arko inay ugu fiican yihiin inay daboolaan baahiyahaas iyo goorta ilmahaagu heli doono
- marka ay tahay in HSE dib u eegaan qiimaynta.

Waxa kale oo aad heli doontaa dukumeenti loo yaqaan 'bayaanka adeegga'. Wuxu sharraxayaa adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada ee ilmahaagu u baahan yahay. Tani waxay xisaabta ku darsanaysaa:


- warbixinta qiimaynta
- haddii ilmahaagu u qalmo adeegyada iyo haddii kale
- shuruucda khuseeyea iyo xeerarka hab-dhaqanka
- wax ku oolnimada bixinta adeegga
- ilaha dhaqaale ee jira.

Si aad qiimeyn ilmahaaga ugu codsato, la xiriir sarkaalka qiimeynta ee jooga Xafiiska Caafimaadka ee Aagaaga. Waxaad u dacwoon kartaa HSE haddii:

- aadan ku qanacsanayn qiimaynta
- aadan ku qanacsanayn sida qiimaynta loo sameeyay
- qiimaynta aan lagu samayn muddada lixda bilood ah.

Natiijooyinka HSE racfaan ayaad uga qaadan kartaa Sarkaalka madaxa bannaan ee Xafiiska Racfaanada Naafonimo ee Cutubka 10: Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? hagahan dhexdiisa).

# 3.5 Caafimaadka maskaxda



## Waa maxay sababta daryeelka caafimaadka dhimirka ay muhiim u tahay?

Daryeelka caafimaadkaaga dhimirku wuxu ka mid yahay daryeelka caafimaadkaaga jireed.

Waqtiyo kala duwan oo noloshaada ah waxaa laga yaabaa in caafimaadka maskaxdaada ay saameeyaan waxa hareerahaaga ka socda. Waxyaabo badan oo maalinle ah ayaa saameyn kara caafimaadka maskaxdaada ama mararka qaarkood dhacdo weyn ayaa saameyn karta, sida dhimashada qof aad jeceshahay ama ku noolaanshaha nolol faqri ah, ayaa saameyn kugu yeelan kara.

Waxa kale oo aad yeelan kartaa xaalad caafimaad maskaxeed oo joogto ah, caafimaadkaaga dhimirkuna dhibaato ayaa soo gaari karta iyadoo qaybaha kale ee noloshu caadi u socdaan.

## Xagee baad caawimaad ka heli karaa?

Haddii aad dareento inaad u baahan tahay caawimo, xusuusnow inaadan keligaa ahayn, xataa haddii ay sidaas u muuqato. Waa muhiim inaad uga warranto waxaad dareemayso qof aad ku kalsoon tahay. Waxaa jira taageerooyin badan oo onlayn ah iyo khadadka caawinta taleefanka oo aad isticmaali karto.

Haddii aad ka welwelsan tahay naftaada ama saaxiib, la hadal qoyskaaga ama ka raadso caawimo ururada iyo kooxaha caafimaadka dhimirka ee dhalinyarada.

Waxaa jira dhowr ilood oo dhanka khadka ah iyo taleefoono loogu talagalay dhalinyarada kuwaas oo bixiya macluumaadka qaybaha kala duwan ee caafimaadka dhimirka. Kuwaas waxaa ka mid ah:

- yourmentalhealth.ie
- Jigsaw
- Pieta House.

Waxaad faahfaahinta dheeraadka ah ee kuwan ka heli kartaa Cutubka 10: Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? hagahan dhexdiisa.

Waxaad sidoo kale la hadli kartaa saaxiib, ama waxaad taageero weydiisan taageero dugsigaaga.

Talaabada ugu horeysa waxay noqon kartaa inaad kala hadasho dhakhtarkaaga wixii caawimaad ah ee aad u baahan karto. Dhakhtarkaaga ayaa si toos ah wax uga qaban kara inta badan arrimaha caafimaadka dhimirka ama inaad kaalmo ka raadsato daawayn maskaxeed lagu bixiyo bulshadaada dhexdeeda. Mararka qaarkood, sida qayb ka mid ah daaweynta, waxaad u baahan kartaa:

- daawooyin
- inaad aragto lataliye
- si aad u aragto dhakhtar ku takhasusay caafimaadka dhimirka
- ama aad joogto cisbitaal.

Dhakhtarku waxa uu awood u yeelan doonaa in uu kaala hadlo nooca daawaynta uu kugula talin lahaa.

## Da'dee ayaan ku bixin karaa ogolaansho si aan u helo daawaynta caafimaadka dhimirka?

Go'aan kasta oo ku saabsan caafimaadkaaga dhimirka ama daawaynta dhibaato aad la kulmayso waa inuu tixgeliyaa danahaaga. Ilaa aad ka gaarto da'da 18, waalidkaa ayaa bixinaya ama diidaya ogolaanshaha aad daawayn ku helayso. Markaad gaadho 18 sano waxaad bixin kartaa ama diidi kartaa ogolaanshaha helista daawaynta caafimaadka dhimirka. Tan waxaa ka mid ah ogolaanshaha in isbitaalka lagu dhigo iyadoo lagu siinaayo daawayn iyo daryeel dhanka caafimaadka dhimirka ah.

## Haddii isbitaal la i dhigo, illaa intee ayaan joogi doonaa?

Muddada isbitaalka la jiifayo dadku way ku kala duwan yihiin. Inta badan dhalinyarada si ikhtiyaari ah ayaa isbitaalka loo dhigaa. Tani waxay ka dhigan tahay in adiga, waalidkaaga ama qofka kaa masuulka ah iyo takhaatiirta aad si wadajir ah u go'aansateen inaad isbitaalka aaddo.


Ujeedka dhakhaatiirtu wuxu noqon doonaa inay kugu hayaan isbitaalka ilaa aad ka fiicnaato. Waalidkaagu wuxuu xaq u leeyahay inuu guriga ku geeyo wakhti kasta, marka aad isbitaalka ugu jirto si ikhtiyaari ah. Haddii waalidkaa uu aaminsan yahay inay ku roon tahay inaad ku jirto isbitaalka oo adna aadan rabin inaad halkaas sii joogto, waxaad kooxdaada daaweynta ka dalban kartaa inay dib u eegaan go'aanka.

## Waa maxay 'haynta aan ikhtiyaariga ahayn'?

'Haynta aan ikhtiyaariga ahayn' waa marka dhakhaatiirta masuulka ka ah daryeelkaaga ay maxkamada degmada ka codsadaan ogolaansho fasaxaya in lagugu seexiyo ama lagugu hayo cusbitaalka marka waalidkaa ama qofka kaa masuulka ahi aanay rabin in sidaas la sameeyo. Tani waxay dhici kartaa haddii dhakhtarku dareemo inaad khatar ku tahay naftaada ama nafaha dadka kale. Waxay sidoo kale dhici kartaa haddii waalidkaa ama mas'uulkaagu ay go'aansadaan inay kaa saaraan isbitaalka oo ay dhakhaatiirtu u maleeyaan in aadan diyaar u ahayn ama aanu caafimaadkaagu gaarsiisnayn heer aad ku bixi karto.

Maxkamaddu waxay amri kartaa in isbitaalka lagugu hayo ilaa 21 maalmood. Dalabkan waxa la cusboonaysiin karaa muddo saddex ama lix bilood ah. Dhakhaatiirtaadu waxay si joogto ah u eegi doonaan caafimaadkaaga dhimirka. Adiga iyo waalidkaa ama qofka kaa masuulka ah waxa laga yaabaa in aragtidooda la waydiiyo. Marka dhakhaatiirtaadu dareemaan inaad caafimaad qabto, waxay ka codsan doonaan maxkamada inay ka noqoto amarka haynta aan ikhtiyaariga ahayn.

## Yaa xaq u leh inuu helo macluumaadka ku saabsan daawayntayda caafimaadka dhimirka?



Dadka ku lugta leh daryeelkaaga iyo daawayntaada caafimaadka dhimirka way heli doonaan macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga dhimirka. Caadiyan macluumaadkaaga waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah ayaa sidoo kale lala wadaagi doona. Macluumaadkaaga lalama wadaagi doono cid kale illaa:

- adigoo raba in lala wadaago maahane
- aad halis ugu jirto dhibaato
- loo isticmaali karo caddayn dambi mooyee.

## Muxuu qabtaa Guddiga Caafimaadka Dhimirka?

Guddiga Caafimaadka Dhimirka waa urur madax-banaan oo la aasaasay 2002. Wuxu fuliyaa hawlo badan oo ay ka mid yihiin diwaangelinta xarumaha caafimaadka dhimirka ee bukaan-jiifka, diyaarinta xeerar-shaqo iyo hab-raacyo loogu talagalay dadka ka shaqeeya adeegyada caafimaadka dhimirka. Waxay kaloo magacaabaan Kormeeraha Adeegyada Caafimaadka Dhimirka kaasoo sannad walba kormeera adeegyada caafimaadka dhimirka, oo ay ku jiraan xarumaha lagu daweynayo dhallinyarada. Ma baaraan kiisaska gaarka ah laakiin haddii aad la xiriirto oo gudbiso walaac khuseeya adeeg khaas ah waxay kuu gudbin karaan Kormeeraha Adeegyada Caafimaadka Dhimirka. Kormeeruhu wuxuu diiwaangeliyaa dhammaan walaacyada la xiriira adeegyada caafimaadka dhimirka kuwaas oo la adeegsado marka la qiimeynayo adeegyada.

# 3.6 Caafimaadka galmada

## Maxay muhiim u tahay in aan ogaado xuquuqdayda oo aan daryeelo caafimaadkayga galmada?

Go'aansashada inaad galmo sameeyso waa go'aan shakhsi ah waana in marka hore go'aan laga gaaro waxa aad aaminsantahay ee ku saabsan cilaaqaadka iyo galmada iyo sidoo kale sida aad degenaansho ugu ag dareemayso qofka kale. Markaad go'aan ka gaareyso inaad diyaar u tahay inaad galmo sameyso si dhab ah uga fikir maadaama ay tahay arrin weyn. Waa inaad dareentaa inaad diyaar u tahay inaad galmo samayso oo aanad dareemin cadaadis saaxiibo ama lammaane kugu riixeen.  Waa inaad had iyo jeer raaxo iyo kalsooni ku dareentaa ikhtiyaaradaada oo marna ha u ogolaan qof inuu kugu cadaadiyo ama kugu cabsi geliyo xaalad aan raaxo-darro ama kalsooni darro. Ku kalsoonow dareenkaaga iyo garab-daarkaaga dabiiciga oo haddii aadan hubin waxaad samaynayso la hadal saaxiib ama qof aad ku kalsoon tahay.

Foróige waxa ay wadaa barnaamij lagu magacaabo REAL U oo loogu talagalay dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 12-18 jir. REAL U waxay kaa caawin kartaa inaad muujiso oo aad sahamiso oo baarto fikradaheena, kuwa dadka kale, ee ku aaddan arrimaha dhammaanteen ina saameeya ee ku lugta leh Xiriirada iyo Galmada.

Waa inaad awood u yeelatid inaad ku raaxaysato xiriir galmo oo farxad oo caafimaad qaba oo ammaan ah oo ka madax bannaan xadgudub iyo waxyeelo. Waa muhiim inaad ogaato xuquuqdaada ku saabsan galmada iyo sida loo sameeyo galmo badbaado leh.



Waxa kale oo muhiim ah inaad ogaato sida aad u ilaalinayso caafimaadkaaga galmada. Haddii aad go'aansato inaad galmo samayso, waa muhiim inaad ogaato sidaad iskaga ilaalin lahayd:

- cudurada galmada lagu kala qaado (STIs)
- uur aan la qorshayn.

## Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadka galmada iyo STIs?

Ireland waxa ku yaal dhawr xarumood oo caafimaadka galmada loogu talagalay. Waxa kale oo loo yaqaan xarumaha STI (infekshannada lagu kala qaado galmada) rugaha caafimaadka ama rugaha caafimaadka Xubnaha Taranka iyo

Kaadimareenka (GUM). Waxay ku siin doonaan taageero da'daada, jinsigaaga ama nooca galmada iyadoo aan loo eegayn.

Waxaad ka heli kartaa xog dhab ah oo dhexdhexaad ah oo ku saabsan cilaaqaadka iyo jinsiga:

- B4UDecide
- SpunOut.ie
- BeLonGTo Koorsadan Hada

# Waa maxay ogolaanshaha galmadu?

Oggolaanshaha waa marka dadku ku heshiiyaan inay si dhab ah u rabaan inay galmo sameeyaan, ama sameeyaan fal galmo la xiriira. Tan waxaa ka mid ah dhunkashada iyo taabasho kasta oo galmo ku tacaluqda. Xeerarka ku xeeran oggolaanshaha waxay dhaqangelayaa iyadoo aan loo eegayn nooca galmada ama jinsiga qofka ama qofafka galmada kula sameynaya ay yihiin.

## Maya ayaad odhan kartaa wakhti kasta

Waxa oggolaansho bixisay keliya haddii aad si xor ah u bixiso oo aan lagugu cadaadin inaad tidhaahdo haa. Runtii aad bay muhiim u tahay in la ogaado in xitaa haddii aad markii hore ogolaatay in aad galmo samaysato ama aad samayso fal galmo la xiriira, aad xor u tahay in aad beddesho maskaxdaada ka hor inta aanad bilaabin ama wakhti kasta ka hor inta aanay dhammaan. Haddii qof aanu odhan 'maya' ama aanu iska caabin fal galmo ah, macnaheedu maaha inay bixiyeen ogolaansho.

Waxaa jira xaalado qaarkood oo aanu qofku ku bixin karin ogolaansho si xor ah oo ikhtiyaari ah. Kuwaas waxaa ka mid ah:

### a) Marka xoog la isticmaalo

Qofku ma bixin karo ogolaansho haddii:

- lagu qasbo inay ka qayb qaataan hawlaha galmada
- loogu hanjabo in la khasbi doono iyaga ama qof kale haddii aanay oggolaan galmada
- ay jirto sabab macquul ah oo uu uga cabsanayo in xoog loo isticmaalo nafsadooda ama qof kale haddii aysan oggolaan galmada.

### b) Uu hurdo ama miyir la' yahay

Qofku ma bixin karo wax ogolaansho galmo ah haddii uu hurdo ama suuxsan yahay.

### c) uu cabsan yahay khamro ama maandooriye ku sarkhaamay

Waxaa laga yaabaa in qofku aanu awoodin inuu bixiyo oggolaanshaha ficil galmo sababtoo ah wuu cabsan yahay khamro ama maandooriye ayuu qaatay.

### d) Aanay awoodin inay oggolaansho bixiyan

Waxaa laga yaabaa in qofku aanu awoodin inuu oggolaado falka galmada iyadoo ay sababtu tahay naafo jidheed oo ka hor istaageysa inay sheegaan inay oggol yihiin iyo in kale.

### e) Aan fahmi karin

Qof si xor iyo ikhtiyaari ah uma oggolaan karo ficil galmo haddii aanay fahamsaneen dabciga iyo ujeedada ficilka.

### f) Aqoonsi khaldan

Qofku muu bixin ogolaansho galmo haddii ay khaldaan aqoonsiga qof kale ee falka ku lugta leh (taasi waa haddii ay aaminsan yihiin in qofka kale ee ka qayb qaadanayaa falka uu yahay qof kale).

### g) Qof kale ayaa sidaas dhahay

Qofku oggolaansho ficil galmo oo ikhtiyaari ama xor ah ma bixin karo haddii oggolaanshaha qudha ee la hayo laga helay qof kale (qof baa yidhi qofkaasi wuu oggol yahay).

### h) Aanu bixin karin

Qofku ma bixin karo ogolaansho fal galmo oo xor ah oo ikhtiyaari ah haddii loo diido inay baxaan iyadoo aanay jirin sabab macquul ah oo keensatay.

### Sababo kale

Waxaa laga yaabaa inay jiraan xaalado kale oo ogolaansho galmo oo xor iyo ikhtiyaari ah aan la bixin karin laakiin kuwani waa qaar ka mid ah kuwa ugu caansan.

## Da'dee ayaan ogolaan karaa inaan galmo sameeyo?

Sharci ahaan, waxaad ogolaan kartaa inaad galmo sameyso markaad 17 jir tahay. Tani waa isku mid oo looma eegi doono nooca galmada ama jinsiga lamaanaha ama lamanaayaasha galmada sameynaya.




Sharcigu waxa kale oo uu aqoonsan yahay in dadka da'da yar ay isku samayn karaan fal galmo ah. Waxaa jira doodda 'u dhawaanshaha da'da'. Tani waxay ka dhigan tahay in haddii qof lagu soo oogay dembi ah inuu fal galmo ah la sameeyay qof da'doodu u dhaxayso 15 iyo 17 sano, waxay soo bandhigi karaan difaaca 'u dhawaanshaha da'da'. Si kastaba ha ahaatee, dhammaan shuruudaha soo socda waa in la dabaqaa:

- farqiga da'da ee u dhexeeya labada qof waa inuu noqdaa laba sano ama ka yar
- dadka ay khusayso waa in ay si xor ah oo ikhtiyaari ah u ogolaadeen hawsha galmada

- labada qofna midkoodna aanu dareemin in laga faa'ideystey ama la cabsi geliyay
- labada qof midna aanu hayn wax xil ah.

## Da'dee ayaan oggolaan karaa daaweynta caafimaadka galmada?

Waxaad ogolaan kartaa daawaynta caafimaadka haddii aad ka weyn tahay 16, tan waxaa ku jira baaritaan kasta ama daawaynta kasta oo aad uga baahan karto caafimaadkaaga galmada. Haddii aad ku hawlan tahay hawl galmo adoo ka yar da'da 16 waxaad weli heli kartaa baaritaan kasta ama daawayn kasta oo aad uga baahan karto dhanka caafimaadkaaga galmo ee xarumaha STI ama GUM.

## Da'dee ayaan ku iibsan karaa kondhomyada?

Da' kasta. Ma jirto xayiraad saaran da'da iibsashada cinjirka galmada.

## Da'dee ayaan heli karaa noocyada kale ee ka hortagga uurka?

Haddii aad ka yar tahay 17, sharciga kuma cadda xaqa aad u leedahay in laguu qoro ka hortagga uurka. Dhakhaatiirta qaarkood ayaa u qori doona ka-hortagga uur-qaadidda dhalinyarada ka yar 17, laakiin qaar kale ayaa diidi doona.

Waxaad heli kartaa dhammaan noocyada ka hortagga uurka markaad 17 jir tahay, taasoo ah da'da sharciga ah ee oggolaanshaha galmada. Qaar ka mid ah noocyada ka hortagga uurka, sida kaniiniga ka hortagga uurka, waxaad u baahan doontaa warqad dhakhtar oo aad lacag ku bixin doonto.

Haddii aad ka weyn tahay 16 jir, waxaad farmashiistaha ka heli kartaa ka hortagga uur-qaadka degdegga ah (oo loo yaqaan 'kiniinka subaxdii') adiga oo aan ogolaansho ka haysan waalidkaa ama qofka kaa masuulka ah. Haddii aad ka yar tahay 16, farmashiistaha badanaa wuxuu kaa rabaa ogolaanshaha waalidkaaga ama qofka kaa masuulka ah.

## Dhakhtar ma waxa laga rabaa inuu waalidkay ama qofka iga masuulka ah u sheego inaan ka dalbaday daawaynta ka hortagga uurka?

Haddii aad 16 jir tahay ama ka weyn tahay, waxaad kala hadli kartaa ka hortagga uurka dhakhtarkaaga adiga oo aan ogolaansho ka helin waalidkaaga ama masuulkaaga ama aan la waregelin. Haddii aad ka yar tahay 16 jir, iyadoo dhakhtarkaagu laga yaabo inuu la xidhiidho ama aanu la xiriirin waalidkaaga ama masuulkaaga, waxay xaq u leeyihiin inay ogaadaan haddii lagu siiyay daaweyn, oo ay ku jirto kiniin dhakhtar qoray ama qaab kale oo uurka lagaga hortago.

Haddii aad ka welwelsan tahay inaad macluumaadka siiso dhakhtarka, waa inaad tan u caddaysaa dhakhtarka ka hor inta aadan la tashan.

## Miyaa la igu dacweeyn doonaa adeegyada bulshada ama Booliska haddii aan galmo sameeyo ama uurqaado anigoo ka yar 17?

Sharcigu wuxuu dhigayaa in 17 sano ay tahay da'da ogolaanshaha galmo si kasta oo ay tahay jinsigaaga ama nooca galmo. Guud ahaan, waa dembi in lala galmoodo qof kasta oo ka yar da'da 17 sano. Ka eeg qaybta ogolaanshaha ee sare wixii macluumaad dheeraad ah. Macluumaad ku saabsan fal galmo oo onlayn ah ka eeg qaybta xuquqdayda onlaynka ah ee hoose.



Waxaad faahfaahinta xiriirka ee ururada bixiya macluumaadka iyo agabka caafimaadka galmada ka heli kartaa Cutubka 10: Halkee ayaan caawimo ka heli karaa?

## Halkee baan aadi karaa haddii la ii geystay xadgudub galmo?

Xarunta Xaaladaha Kufsiga ee Dublin waxay ku shaqeysaa khad caawinaad 24-saac ah oo heer qaran ah 1800 77 8888. Khadkani wuxu dhegaysi iyo taageero qarsoodi ah siiyaan dumarka iyo ragga la kufsaday, tacaddi galmo loo geystay ama galmo ahaan loo dhibaateeyay.

CARI waxay bixisaa adeegyo taageero oo khaas ah oo ay ka mid yihiin:

- la talin
- u raacista Booliska ama maxkamadda
- taageero guud oo ay siiyaan carruurta ka yar 18 ee ah dhibanayaasha xadgudubka galmada.

Xarumaha Dhibaatooyinka Kufsiga ee dalka oo dhan waxay arki doonaan qof kasta oo ka weyn da'da 14, oo hal xarun (Dhibaatooyinka Kufsiga Waqooyi Bari) ayaa arki doonta qof kasta oo ka weyn 12.

# 3.7 Uurka

## Halkeen ka heli karaa talo iyo taageero haddii aan u maleeyo inaan uur leeyahay?

Waxaad booqan kartaa GP-gaaga (dhakhtarka qoyska) ama xarunta caafimaadka deegaanka wixii talo iyo taageero ah.

Guud ahaan Ireland, waxa ka jira adeegyo la talineed oo loogu talagalay dhibaatooyinka uurka oo bilaa canaan ah. Liisaska adeegyadan si aad u hesho, booqo websaydka MyOptions.ie ama qoraal ahaan ugu dir si bilaash ah kelmadda 'LIST' ugu dir 50444.

Waxa kale oo aad macluumaad ka heli kartaa websaydyada sexualwellbeing.ie iyo mychild.ie

## Ma tegi karaa kulan la talineed ku saabsan dhibaatooyinka uurka iyadoo aanay ogayn waaliday ama cidda iga masuulka ah?

Waxaad kala xidhiidhi kartaa HSE My Options service 1800 82 8010 ama eeg www.myoptions.ie, sexualwellbeing.ie.

Haddii aad wacdo adeegga la-talinta, taleefanka ayaad ka dhex waydiin kartaa wixii ku saabsan siyaasaddooda ku aaddan inay arkaan qof ka yar 18 jir iyada oo aan oggolaansho laga helin waalid ama mas'uul. Adeegyada qaarkood ayaa kaala hadli doona sidii aad ugu sheegi lahayd waalidkaa ama masuulkaaga, wayna kugu taageeri doonaan inaad taas samayso.

Adeegyada kale waxay ku arki doonaan kaliya haddii waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah kula socoto.

## Ma jiraa adeeg taageero gaar ah oo loogu talagalay da' yarta ama waalidiinta da'da yar?

Qaybo ka mid ah dalka waxay leeyihiin Barnaamijka Taageerada Uurka Dhallin-yarada (TPSP) oo loogu talagalay waalidiinta da'da yar ee da'doodu ka yar tahay 19 sano ilaa uu ilmahoodu ka gaarayo laba sano. TPSP waa adeeg bulsheed siiya macluumaad bilaasha, sir ah iyo talo waalidiinta da'da yar iyo xubnaha kale ee qoyska sida awoowayaasha.

TPSP waxay kuu sheegi doonta xuquuqdaada, waxa aad xaq u leedahay iyo masuuliyadahaaga waalid da'yar ahaan. Waxay sidoo kale ku siin karaan macluumaadka ku saabsan adeegyada aad heli karto oo ay ka mid yihiin:

- daryeelka
- hoyga
- waxbarasho
- tababarka
- xanaanada caruurta.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeeggan, ka eeg www.tpsp.ie.

## Ma heli karaa daryeel caafimaad oo bilaash ah inta aan uurka leeyahay?

Haa, waxaad xaq u leedahay daryeel uur bilaash ah oo hoos yimaada Qorshaha Daryeelka Hooyada iyo Dhallaanka illaa ilmahaagu ka gaarayo lix toddobaad. Kani wuxu daboolaa kharashka:

- booqashooyinka dhakhtarka
- rugaha hooyada iyo dhallaanka
- isbitaalka hooyada markuu dhasho ilmahaagu
- laba baaritaan oo dhalmada ka dib ah.

La xidhiidh GP-gaaga (dhakhtarkaaga) ama xarunta caafimaadka deegaankaaga wixii macluumaad dheeraad ah. Waxaad sidoo kale macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka ka heli kartaa websadykaMyChild.ie.

## Weli ma aadi karaa dugsiga haddii aan uur leeyahay?

Haa, waxaad xaq u leedahay inaad sii wadato waxbarashadaada haddii aad uur leedahay.

Waxa laga yaabaa in aad xaq u yeelato kaalmada dhaqaale ee dugsiga guriga sida ku cad Qorshaha Deeqaha Guriga. Nidaamkani waxa uu bixinayaa sagaal saacadood oo waxbarasho ah toddobaadkii muddo 10 toddobaad ah. Badanaa waxaa la siiyaa ardayda u baahan inay ka maqnaadaan dugsiga marka la gaaro marxaladaha dambe ee uurka ama isla markiiba ka dib dhalashada ilmaha. Si aad u hesho nidaamkan, la xidhiidh Baahida Gaarka ah iyo Deeqaha Waxbarashada ee qaybta shabakada Waaxda Waxbarashada.

# Ilmaha ma iska soo xaaqi karaa?

Uurka aan la qorshayn wuxuu kaa dhigi karaa qof walwalsan oo jahawareersan. Go'aaminta in uur ku sii socdo iyo in kale waa go'aan shakhsi ah. Waa inaadan dareemin inuu qofna kugu qasbay inaad ilmaha iska soo riddo.

Waad iska soo ridi kartaa haddii uunan uurku ka badnayn 12 toddobaad taasoo la macno ah inay 84 maalmood ka soo wareegtay maalintii ugu horreysay ee caadadii kuugu dambaysay. 12 usbuuc kadib, waxaad iska soo ridi kartaa oo kaliya xaalado gaar ah. Waxaad booqan kartaa GP-gaaga (dhakhtarka qoyska) ama xarunta caafimaadka deegaanka wixii talo iyo taageero ah.

Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa My Options oo ah khadka telefoonka bilaashka ah ee HSE kaas oo siiya macluumaad bilaash ah oo qarsoodi ah iyo la-talin dadka qaada uur aan qorsheysnayn. Haddii aad doorato inaad sii wadato uurkaaga, waxay kugu taageeri karaan ikhtiyaarkan. Haddii aad go'aansato inaad rabto inaad ilmo iska soo riddid, waxay sidoo kale ku siin karaan macluumaadka adeegyada ilmo soo rididda iyo sidoo kale taageerada ilmo soo rididda ka dib. Waxay kaloo kuu sharxi karaan ogolaanshaha, ka qarinta iyo ku lug lahaanshaha waalidkaaga, masuulkaaga ama qof kale oo weyn oo taageera.

Waxaad la xiriiri kartaa 9 subaxnimo ilaa 9 galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha iyo 10 subaxnimo ilaa 2 galabnimo Sabtida adigoo ka wacaya taleefanka 1800 828 010 ama eeg shabakadooda, My Options.ie.

Cutubka 4

# Xaqa aan u leeyahay in la iga ilaaliyo waxyeellada



# 4.1 Daryeelka ku filan iyo ilaalinta

## Waxaad kaloo xaq u leedahay in lagaa ilaaliyo dhibaataynta?

Haa Iyadoo aan loo eegayn da'da aad jirto, waxaad xaq u leedahay in laga ilaaliyo dhammaan noocyada xadgudubyada, rabshadaha iyo dhiig-miirashada. Way adkaan kartaa in la aqoonsado noocyada xadgudubka qaarkood. Way adkaan kartaa laakiin in qof lagala hadlo waxa socda waa tallaabo hore oo wanaagsan.

Gobolka waxa waajib sharci ah ka saaran yahay inuu ilaaliyo badbaadadaada iyo fayoobidaada. Waxa Ireland ka jira sharciyo iyo ururo ka shaqeeya inay carruurta ka ilaaliyaan xadgudubka, ka-faa'iideysiga iyo inay baaraan oo ciqaabaan xad-gudbayaasha. Booliska iyo agaasimaha dacwad oogista dadwaynaha ayaa laga yaabaa inay door ka ciyaaraan dacwad oogista dadka dhibaatada u geysta carruurta iyo dhalinyarada.

## Waa maxay xadgudub?

Waxaa jira afar nooc oo xadgudubka carruurta ah:

- dayac
- dayac shucuureed
- jir ahaan
- galmada.

Waxa laga yaabaa inaad la kulanto hal ama dhawr nooc oo xadgudub ah wakhti kasta.

Dayacaaddu waa marka qof wayn uu ku guul daraystay inuu ku daryeelo, taas oo keenaysa waxyeello wayn ama kaa joojisa inaad si fiican u korto oo u horumarto. Tan waxaa ka mid noqon kara:

- in aan si habboon laguu quudin, diirimaad iyo hoy lagu siin
- in aan amnigaaga la ilaalin
- n aadan dareen iyo kalgacal fiican ka helin dadka waaweyn
- in aan lagu keenin dugsiga
- in aan daryeel caafimaad lagu siin, haddii aad u baahato.

Dayacaaddu waa wax muddo ku dhaca ee aan hal waqti oo cayiman ku dhicin.

### Xadgudub niyadeed

Xadgudubka shucuureed wuxuu badanaa dhacaa marka qof weyn:

- jacayl kuu muujin ama aanu ku taageerin
- uu kuula dhaqmo qaab ku xakamaynaysa
- had iyo jeer uu kuula hadlo qaab ixtiraam leh
- ku carqaladeeyo
- uu marar badan ku dareensiiyo ammaan-darro.

Noocan xadgudubka ahi waxa uu ku saabsan yahay nooca xidhiidhka aad la leedahay qof weyn halkii ay ka ahaan lahayd shilal gaar ah oo dhacay. Waxay kuu horseedi kartaa inaad dareento kalsooni la'aan, faraxsanaan la'aan, kalsooni darro iyo guuldarro la'aanta dugsiga ama qaybaha kale ee noloshaada.

### Xadgudub jireed

Xadgudubka jireed wuxuu dhacaa marka qof weyni uu waxyeelo kuu geysto sida ciqaab jireed ama uu ku guuldareysto inuu qaado talaabo uu kaaga joojinayo dhaawac jireed marka ay suurtagal tahay inaad sidaas sameyso.

Xadgudubka noocaan ah waxaa ka mid ah ciqaab jireed oo daran ama si ula kac ah laguugu dhaawacayo. Waxa ku jiri kara, inkastoo aanay ku koobnayn:

- dharbaaxo
- garaacid
- qanjaruufo
- in lagugu daawado qof kale oo ku waxyeelaynaya oo lagaa celin waayo
- in lagugu argagax geliyo hanjabaad.

### Xadgudub galmo

Xadgudub galmo ama ka faa'iidaysi waxay dhacdaa marka qof weyn kuu isticmaalo ujeeddooyin galmo. Tan waxaa ka mid noqon kara:

- in laguu taabto si qaldan
- in qof wayni kuu galmoodo
- in qof wayni kugu khasbo daawashada qof kale oo ficil galmo sameynaya
- in qof wayni ku tusiyo muuqaalo galmo ah
- xiriir galmo oo qaldan adiga iyo qof weyn idin dhexmara
- in lagaa ganacsado oo lagaaga faa'iidaysto dhillaysi.

## Maxaan sameeyaa haddii aan dareemo in si xun la iila dhaqmayo, aanan dareemeynin ammaan ama la igu xadgudbay?

Waxaad xaq u leedahay in lagaa ilaaliyo dhammaan noocyada xadgudubyada. Waxa ugu muhiimsan, haddii aad wax xadgudub ah kula kulant guriga, dugsiga ama meel kale, waa inaad u sheegto qof weyn oo aad ku kalsoon tahay si ay ku caawiyaan oo ay ku taageeraan.

Markaa adiga ama qof weyn oo aad ku kalsoon tahay waa inay la xiriiraan shaqaalaha bulshada ee xaafadda Tusla. Si aad u ogaato faahfaahinta xiriirka ka eeg bogga Tusla.

Haddii aad u baahan tahay caawimo xaalad degdeg ah ama saacadaha shaqada ee ka baxsan (9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha), adiga, ama qof weyn oo aad ku kalsoon tahay waxaad la xidhiidhi kartaa saldhigga Garda ee kuugu dhow ama wac khadka taleefanka degdegga ah, midkood 999 ama 112.

Haddii aad ka welwelsan tahay naftaada, qof aad taqaan ama saaxiib, waxaad la hadli kartaa Khadka carruurta. Waxaad kula hadli kartaa Childline lacag la'aan adiga oo wacaya 1800 66 66 66, fariin qoraal ah u diryaa 50101 ama kula sheekeysiga onlaynka ah www.childline.ie. Waxaad sidoo kale wici kartaa Khadka Caawinta Dhibaatada Kufsiga 1800 77 8888. Arag Cutubka 10 : Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? ee hagahan loogu talagalay ururada kale ee taageerada.

## Qofka aan u sheego ma awoodi doonaa inuu xafido sirta?



Xirfadlayaasha qaarkood sida la-taliyayaasha, macalimiinta iyo dhakhaatiirta sharcigu waa inay u sheegaan Tusla haddii aad u sheegto in lagu dhaawacay ama aad halis ugu jirto in lagu waxyeelleeyay. Haddii aad rabto inaad wax badan arrinta ku saabsan ka hadasho, waxaad kula hadli kartaa Childline lacag la'aan:

- wac 1800 66 66 66
- qoraal u dir 50101
- kula sheekeeyso habka onlaynka www.childline.ie

## Waa maxay Tusla?

Wakaaladda Carruurta iyo Qoyska, oo sidoo kale loo yaqaan Tusla, waa hay'adda qaran ee ka mas'uulka ah  badbaadada iyo daryeelka carruurta Ireland. Haddii aadan la noolaan karin qoyskaaga, Tusla ayaa mas'uul ka ah inay hubiso inaad haysato meel aad degto iyo dad waaweyn oo ku daryeela.

## Waa maxay doorka adeegaha bulshadu?

Shaqaalaha bulshadu waa qayb ka mid ah adeega ay bixiso Tusla. Waxay caawiyaan oo taageeraan carruurta laga yaabo inay halis ugu jiraan waxyeello ama aan badbaado haysan. Waa shaqada shaqaalaha bulshada inay ku ilaaliyaan oo ku taageeraan haddii aad ku dareemayso ammaan darro guriga ama noloshaada.

## Sidee baan ula xiriiri karaa shaqaale bulsho?

Shaqaalaha bulshadu waxay diyaar yihiin 9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha. Guud ahaan Irelanda shaqaalaha bulshadu way ka jiraan. Si aad ula xidhiidho shaqaalaha bulshada ee kuu dhow, waxaad u baahan doontaa inaad la xidhiidho adeega shaqada bulshada ee Tusla ee deegaankaaga. Waxaad tan ku samayn kartaa telefoon, iimayl ama adigoo soo wacaya xafiiska.

Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta xiriirka shaqaalaha bulshada adiga oo wacaya xafiiska shaqada bulshada ee deegaankaaga (lambarku wuxuu ku yaal websaydka Tusla).

## Waa maxay doorka Booliska Qaranku (An Garda Síochána)?

An Garda Síochána waa adeegga booliiska qaranka ee Ireland. Waa shaqadooda inay hubiyaan inaad badbaado hesho oo aan wax dhibaato ah lagu geysan. Saldhigyo xaafadeed ayuu Boolisku ku leeyahay guud ahaan Ireland. Nambarada Booliska ee bilaashka ah iyo degdega ah ee Garda waa 999 ama 112. Booliska waxa la heli karaa 24 saac maalintii.

## Waa maxay nooca taageerada qoyska la heli karo si aniga iyo qoyskayga loo caawiyo?

Adeegyada taageerada qoyska ayaa diyaar u ah inay idinka caawiyaan adiga iyo qoyskaaga wax ka qabashada xaaladaha adag sida:

- khilaafka gudaha qoyska
- helitaan waxbarasho
- kala-tegista
- dhimashada qof kuu dhow
- balwadaha.

Taageeradaas waxaa ku jiri kara la-talin, taageero kooxeed, booqashooyin adeeg bulsho ama la shaqaynta shaqaalaha taageerada qoyska. Adeegyada taageerada waxay sameyn doonaan wax kasta oo ay awoodaan si ay u hubiyaan inaad la joogi karto qoyskaaga, haddii ay u maleynayaan inay taasi adiga kuu roon tahay. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan taageeradan ka heli kartaa Tusla: www.tusla.ie.

## Maxaan sameeyaa haddii aan ka shakiyo in aanu ilmuhu helayn daryeel ku filan, ilaalin ama lagu tacaddiyayo?

La xiriir shaqaalaha bulshada ee Tusla uga masuulka ah aagga ilmuhu joogo (sida aad ula xiriirayso shaqaalaha bulshada bogaga hore ka eeg). Haddii ay ka baxsan tahay saacadaha shaqada, oo aad dareento in ilmuhu ku jiro khatar degdeg ah, waa inaad Booliska kala xiriirtaa 999 ama 112.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xadgudubka ilmaha iyo sida looga jawaabo adiga oo akhrinaya Tilmaamaha Qaranka ee Koowaad ee Ilaalinta iyo Daryeelka Carruurta, oo laga heli karo websaydka Tusla.

## Maxaan samayn karaa si aan ilmahayga uga ilaaliyo waxyeellada guriga dhexdiisa?

Waxaad maxkamadda ka dalban kartaa amar adiga iyo ilmahaagaba lagaga ilaalinayo rabshadaha qoyska. Maxkamaddu waxay samayn kartaa Amarka Ilaalinta, kaas oo ka hortagaya qof inuu kuugu hanjabo inuu isticmaalo rabshad ama cabsi adiga iyo qoyskaaga.

Haddii qofku idinla nool yahay, Amarka Ilaalinta wuxu ka hor istaagayaa:

- Isticmaalka xoog-muquunis, ama hanjabaad loo adeegsado gacan-ka-hadal ka dhan ah codsadaha/ku-tiirsanaha, ama
- faraxumaynta ama cabsida gelinta codsadaha/ku-tiirsanaha.

Haddii qofku aanu idinla noolayn, Amarka Ilaalinta wuxu ka hor istaagayaa:

- inuu idinku dul warwarego
- la socoshada ama korjoogtaynta gurigaaga,
- dabagalka ama la xidhiidhista (oo ay ku jiraan qaab elektaroonig ah) adiga iyo qoyskaaga.

Amarka Ilaalintu waxa uu soconayaa ilaa aad ka hesho dhegaysi buuxa oo maxkamadeed. Marxaladdan maxkamaddu waxay go'aansan kartaa inay bixiso:

- Amarka Badbaadada - kani waa amar waqti dheer oo sameeya waxyaabo la mid ah sida Amarka Ilaalinta, ama
- Amarka Xayiraadda - kani waa amar lagaga hortagayo qofka rabshada wada inuu guriga joogo.

Xaaladaha qaarkood, Tusla ayaa amarka kuu codsan karta iyagoo adiga ku metelaya.

Waxaa jira adeegyo badan oo siiya gabaad gaaban iyo mid dheerba kuwa doonaya inay ka baxsadaan rabshadaha qoyska. Waxaa jira tiro ururo ah oo ku caawin kara haddii adiga ama qof gurigaaga jooga uu hadda la kulmaayo rabshad qoys. Ururadan ayaa kaa caawin kara inaad hesho:

- magangalyo
- talo sharci
- taageero niyadeed
- talo ku saabsan adeegyada la heli karo.

Fadlan u gudub cutubka 10: Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? wixii faahfaahin ah.

Waxaad sidoo kale wici kartaa Khadka Caawinta Taleefoonka Bilaashka ah ee Qaranka 1800 341 900 wixii talo iyo caawin ah.



# 4.2 Carruurta uu Qaranku Koriyo

## Maxaa loola jeedaa carruurta uu Qaranku daryeelo?

Tusla (Hay'adda Carruurta iyo Qoyska) ayaa ku lug yeelanaysa daryeelkaaga haddii ay go'aansato inaan si habboon lagugu daryeelin guriga - tan waxaa loo yaqaannaa daryeelka dowladda. Haddii lagu geliyo daryeel korineed, waxaad la noolaan doontaa qoys ku korin doona (kaaso la joogi kara qaraabadaada) ama waxaad ku noolaan doontaa guri daryeelka carruurta loo asteeyay.

## Sidee la ii daryeeli karaa?

Waxaa jira habab kala duwan oo carruurta iyo dhalinyarada daryeelka loo gelin karo.

Haddii waalidkaa iyo Tusla ay labaduba ku heshiiyaan inay kuu roonaan tahay inaadan guriga ku noolaan, waalidkaa wuxuu aqbali karaa in laguu wareejiyo goobaha xannanaynta (tani waxaa lagu magacaabaa xannaano-geynta ikhtiyaariga ah).

Haddii waalidkaa aanu aqbalin in aad gasho daryeelka dowladda, laakiin Tusla ay u malaynayso in ay jirto sabab maangal ah oo ay tahay in guriga lagaaga wareejiyo, waa in ay aadaa maxkamada oo ay weydiisataa garsooraha inuu amro in daryeelka dowladda lagugu wareejiyo (amar daryeel gelineed). Haddii garsooruhu ogolaado, waxay bixin doonaan amar daryeel muddo gaaban ah.

Shaqaalaha bulshadu waa in ay qiimeeyaan xaaladaada ka hor inta aan la isku afgaran qorshaha mustaqbalka fog ee daryeelkaaga. Waxaa lagu waydiin doonaa aragtida aad ka qabto arrintan.

Haddi ay maxakamadu samayso amar xanaano oo la go'aamiyo in daryeel dowladeed la geliyo ee ka soo horjeeda rabitaanka waalidkaa, waxa laga yaabaa inay racfaan u qaataan maxkamada.

**Amarka kor joogtaynta:** kan wuxu u ogolaanayaa Tusla inay la socoto ilmaha ay u aragto inuu halis ku jiro. Gurigaaga lagaama saarin. Amarka kormeerku wuxuu socon karaa illaa 12 bilood. Marka amarka asalka ahi dhamaado, Tusla waxa ay codsan kartaa mar kale inay kordhiso dalabka.

**Daryeelka ikhtiyaari ah:** waalidkaa ayaa kula heshiin kara shaqaalaha bulshada in daryeel dawladeed lagu geliyo adoon aadin maxkamad.

**Amarka daryeelka ku meel gaadhka ah:** amarkan waxa la samayn karaa inta la sugayo go'aanka amarka daryeelka buuxa. Waxaa lagugu hayn doonaa daryeelka Tusla ilaa 29 maalmood inkastoo maxkamada degmadu ay kordhin karto wakhtigan.

**Amarka daryeelka:** amarkan wuxu kuu ogolaanaya in laga saaro daryeelka waalidka oo laguu dhiibo Tusla si ay kuu daryeelaan. Amarka daryeelka wuxuu socon karaa ilaa aad ka gaarayso 18 sano.

**Amarka daryeelka degdega ah:** amarkani waxa uu ku gelinayaa daryeelka Tusla illaa siddeed maalmood marka xaalad degdeg ahi jirto.

## Waa maxay xuquuqdeydu haddii goob xannaano la i geeyo?

Waxaad leedahay dhowr xuquuq haddii nidaam xannaano lagu geliyo. Tusla waa inay hubisaa in go'aamo kasta oo ku saabsan daryeelkaaga loo sameeyo si waxtar kuu leh. Shaqaalaha bulshadu waa inuu kuu sheegaa waxa dhacaya laakiin waxa laguu sheego waxay ku xidhnaan doontaa da'daada iyo qaangaadhkaaga. Waxaad xaq u leedahay in ra'yigaaga la maqlo marka go'aannada daryeelkaaga la samaynayo. Rabitaankaaga waa in lagu xisaabtamaa, inta suurtogalka ah.

Haddii amarka daryeelka laga raadiyo maxkamadda, xaakimku waa inuu ku xisaabtamaa rabitaankaaga haddii ay dareemaan inaad u bislaatay inaad fahamto waxa dhacaya.

## Maxaa taageerooyin ah oo aan heli karaa haddii aan daryeel ku jiro?

Awoodsiinta Dadka ku jira Daryeelka (EPIC) waxay siisaa taageero u doodid madaxbannaan carruurta:

- la geliyay nidaam daryeel
- horey ugu jiray daryeel
- ku jira dacwadaha go'aaminta daryeelka iyo xannaanaynta.

EPIC waxay gacan ka geysan kartaa taageeridda qofka da'da yar si uu ra'yigiisa u dhiibto. Macluumaad intaas ka badan, eeg websaydka EPIC.

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa khadka caawinta Isbaheysiga Xuquuqda Carruurta haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada:

- ka wac taleefanka, 01-902 0494
- Iimayl, help@childrensrights.ie.

## Yaa iga masuul ah inta aan ku jiro daryeelka?

Caadiyan, Tusla (iyada oo loo sii marayo adeegahaaga bulshada) ayaa samayn doona dhammaan go'aamada muhiimka ah ee ku saabsan daryeelkaaga sida nooca daryeelka aad u baahan tahay iyo meesha aad ku nooshahay.

Haddii uu qoysku ku korinayo ama lagu geeyay guryaha xannaanaynta carruurta, daryeelayaasha korintaada lagu wareejiyey ama daryeelayaasha xarunta la dego ayaa mas'uul ka noqon doona go'aamada maalinlaha ah ee saameeya noloshaada.

Haddii waalidkaa uu oggolaaday inaad gasho daryeelka (daryeel ikhtiyaari ah), waxay weli xaq u leeyihiin inay ka qayb qaataan dhammaan go'aamada saameeya noloshaada.

Haddii amarka daryeelka ku meel gaadhka ah la bixiyo, waalidkaa waa in lagala tashadaa inta badan waxyaabaha noloshaada la xiriira.

## Ma dooran karaa meesha aan ku noolaanayo markaan ku jiro daryeelka?

Inta suurtogalka ah, waxaad ku sii jiri doontaa bulshadaada. Adigu ma go'aamin kartid meesha aad ku noolaan doonto. Adeegahaaga bulshada iyo Tusla ayaa kuu go'aamin doona laakiin adeegahaaga bulshadu waa inuu dhegeysto oo tixgeliyo aragtidaada.

Inta badan, carruurtu waxay la noolaan doonaan qoys korinaya ama qaraabo ah (kuwaas waxaa loo yaqaanaa daryeelayaasha korinta qaraabada) gaar ahaan haddii aad ka yar tahay da'da 12.

Carruurta qaar ayaa laga yaabaa inay ku noolaadaan xarun carruurta lagu hayo.

## Xaq ma u leeyahay in aan helo shaqaale bulsho?

Haa, ilmo kasta oo ku jira nidaamka xannaanaynta dowladda wuxuu xaq u leeyahay shaqaale bulsho. Adeegaha bulshada waxa uu u shaqeeyaa Tusla. Way kula kulmi doonaan si ay ku taageeraan oo ay ku siiyaan wixii macluumaad ama talo ah ee aad u baahan tahay. Waa in lagu siiyo lambarka taleefoonka shaqaalahaaga bulshada si aad ula xiriirto haddii aad u baahato.

Waa shaqada shaqaalahaaga bulshada inuu kuu dejiyo qorshe daryeel oo dabadeedna dhaqangeliyo.

## Haddii aanan lahayn shaqaale bulsho yaan la xiriirayaa?



Haddii aadan lahayn shaqaale bulsho, waa inaad la xiriirtaa xafiiska shaqada bulshada ee xaafaddaada oo aad mid codsato. Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa EPIC oo bixisa taageero u doodid madax-banaan oo loogu talagalay carruurta daryeelka la geliyay, daryeelka ku jiray, ama kuwa dacwadda daryeelkooda lagu go'aaminayo socoto. EPIC waxay kaa caawin kartaa inay kugu taageerto inaad sheegto fikirkaaga. Macluumaad dheeraad ah, eeg websaydka EPIC.

Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta xiriirka xafiiska shaqada bulshada ee deegaankaaga websaydka Tusla.

## Waa maxay qorshe daryeelku?

Ka hor inta aan laguu gelin daryeel (ama daryeelka korinta ama daryeelka guryaha xannaaneynta), shaqaale bulsho waa inuu kuu diyaariyaa qorshe daryeel. Qorshahaaga daryeel waa inay ku qoran yihiin kuwan soo socda.

1. Ujeedooyinka meelaynta daryeelkaaga.
2. Taageerada Tusla ay siin doonto:
   - adiga
   - daryeelahaaga korinta
   - xarunta carruurta la daryeelayo lagu hayo
   - xaaladaha qaarkood, waalidkaa.
3. Nidaamka kulanka ee adiga iyo waalidkaa idinka dhaxaysa, qaraabada ama cid kasta oo xaq u leh inay kula xiriiraan.
4. Marka qorshaha daryeelkaaga dib loo eegi doono.

Waxaad waydiisan kartaa inaad fikradaada ka dhiibto qorshahaaga daryeelka. Haddii lagugu meeleeyay daryeelka xaalad degdeg ah, Tusla waa inay u diyaarisaa qorshahaaga daryeelka sida ugu dhakhsaha badan ka dib meelaynta degdegga ah.

## Goorma ayaa dib u eegis lagu sameyn doonaa qabanqaabada daryeelkayga?

Kulanka loogu yeero 'dib u eegista daryeelka ilmaha' waa inuu dhacaa laba bilood ka dib marka ugu horeysa ee aad gasho daryeelka. Tani waa inay dib u eegtaa sida hawluhu kuugu socdaan. Dib u eegista waa in lagu celiyaa lixdii biloodba mar labada sano ee ugu horreysa ee meelayntaada daryeelka. Taas ka dib, qorshahaaga daryeelka waa in dib loo eego ugu yaraan hal mar sannadkii.

## Ma tagi karaa kulamada dib u eegista 'ilmaha ku jira daryeelka'?

Haa, adeegahaaga bulshadu waa inuu kuu sheegaa marka ay dhacayaan shirarka dib u eegista. Waxaad xaq u leedahay inaad ka soo qaybgasho shirarkan oo aad fikradaada dhiibto. Waxa kale oo aad keeni kartaa qof ku taageera oo ku weheliya sida u doodaha EPIC .

Dadka kale sida waalidkaa, macallimiinta, la-taliyayaasha, daryeelayaasha korinta ama dadka kale ee kula shaqeeya ayaa sidoo kale laga yaabaa inay joogaan shirarkan.

Waxaad xaq u leedahay in laguu sheego xogta go'aamo kasta oo la gaaro oo ka dhashay dib u eegistaas qorshaha daryeelka.

## Xaq ma u leeyahay inaan ogaado waxa ku jira qorshahayga daryeelka?

Haa, waa inaad ogaataa oo aad fahantaa qodobada muhiimka ah ee qorshaha daryeelkaaga. Waqti kasta, waxaad shaqaalahaaga bulshada ama xubin ka tirsan shaqaalaha daryeelka deegaanka ka codsan kartaa inay kuu sharaxaan waxa ku jira qorshahaaga daryeelka. Waa inaad sidoo kale ka heshaa nuqulka qorshahaaga daryeelka shaqaalahaaga bulshada.

## Xaq ma u leeyahay in ra'yigayga lagu dhagaysto maxkamada marka go'aan laga gaadho daryeelkayga?

Haa, laakiin maxkamadu waxay leedahay habab kala duwan oo fikradaha lagu dhiibto. Tani waxay ku xiran tahay da'daada iyo heerka qaan-gaarnimadaada, iyo rabitaanka garsoorka. Adeegahaaga bulshada ayaa joogi doona maxkamada wuxuuna u sheegi doonaa garsoorka baahiyahaaga.

Xaaladaha qaarkood, garsooraha ayaa laga yaabaa inuu kuu magacaabo ilaaliye *ad Litem*. Kani waa qof:

- hubinaya in garsooruhu uu maqlo aragtidaada
- wuxuu kala taliyaa garsooraha waxa adiga kuu fiican.

Garsooraha waxaa laga yaabaa inuu rabo inuu si toos ah kula hadlo ama uu ku diyaariyo khabiir kula hadla. Waxaad codsan kartaa inaad tagto maxkamadda, ama waxaad u qori kartaa warqad garsooraha. Iyadoo laga yaabo inuu garsooruhu dhageysto waxaad rabto, waxay ugu dambeyntii gaari karaan go'aan aan waafaqsanayn fikradahaaga. Sidoo kale waxa dhici karta in Ilaaliyaha *ad litem* qabo fikrado ay isleeyihiin way kuu fiican yihiin oo ka duwan kuwaaga.

Waxa kale oo aad codsan kartaa in lagaa dhigo dhinac kiiska taas oo macnaheedu yahay in maxkamadda uu kugu meteli doono qareenkaagu. Tan waxa lagu sameeyaa waxa loo yaqaan codsiga qaybta 25. Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo arrintan ku saabsan waxaad la xiriiri kartaa khadka caawinta Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta.

EPIC way ku taageeri kartaa oo kuu raaci kartaa maxkamada ama shirarka, wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg shabakadooda.

## Xaq ma u leeyahay in aan joogo maxkamada marka dacwadayda la dhageysanayo?

Ma lihid xuquuq toos ah oo aad ku imanayso maxkamadda marka kiiskaaga la dhagaysanayo. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad codsato inaad goobjoog ka ahaato dhageysiga ama qayb gaar ah oo ka mid ah dhageysiga garsooraha waa inuu aqbalaa codsigaaga illaa iyagoo u maleynaya inay ku roon tahay inaad ka maqnaato maahane.

## Xaq ma u leeyahay in sirta xogta lagu ilaaliyo maxkamada dhexdeeda?

Haa Marka kiiskaaga lagu dhageysto maxkamadda, kaliya dad gaar ah ayaa loo ogolaan doonaa inay joogaan oo ay ka warbixiyaan kiiska. Looma ogola inay ku wadaagaan macluumaad kasta oo lagugu aqoonsan karo baraha dadweynaha - sida wargeysyada ama internetka. Magacaaga, cinwaankaaga iyo sawirkaaga lama shaacin karo. Tan waxaa lagu magacaabaa *xeerka kamarada*.

## Xaq ma u leeyahay inaan ka tago daryeelka oo aan aado guriga?

Maya, ma go'aansan kartid inaad ka tagto daryeelka ilaa aad ka gaarto 18 jir.

Haddii aad ku jirto daryeel lagugu geliyay qaab ikhtiyaari ah, waalidkaa waxa laga yaabaa in uu ka noqdo oggolaanshahaaga in lagu xannaaneeyo oo uu guriga kuu qaado. Haddi ay taasi dhacdo oo aanu shaqaalaha bulshadu ku faraxsanayn in baahiyahaaga lagu daboolayo guriga lagugu celiyay, shaqaalaha bulshadu waxa uu maxkamadda ka codsan karaa amar daryeel si uu kuugu hayo daryeelka.

Haddii aad ku jirto xanaaneyn hoos timaada amarka daryeelka, maxkamad ayaa laga yaabaa inay go'aamiso in sababaha laguu qaaday markii hore ay isbedeleen oo aysan wax welwel ah ka qabin badbaadadaada ama daryeelkaaga. Haddii tani dhacdo, waxaad aadi kartaa guriga. Waxaad xaq u leedahay in go'aankan lagu maqlo aragtidaada.

## Xaq ma u leeyahay in aan la xiriiro qoyskayga inta aan ku jiro daryeelka?

Haa Inta aad ku jirto daryeelka korinta ama daryeelka guryaha xannaanada, Tusla waa inay hubisaa inaad xiriir macquul ah la leedahay, oo aad marin u hesho, waalidkaa ama mas'uulkaaga iyo qaraabadaada kale illaa iyadoo garsooruhu aamino in aanay sidaas aamin kugu ahayn maahane. Xidhiidhkani waxa uu qaadan karaa qaab booqasho, telefoon ama waraaqo ama iimayllo. Tusla sidoo kale waa inay hubisaa inaad xiriir la leedahay qof kasta oo kale oo danaynaya daryeelkaaga sida awoowe, eedo, adeer ama saaxiib qoyska. Waxaad waydiin

kartaa adeegahaaga bulshada haddii aad jeclaan lahayd inaad la kulanto qoyskaaga marar badan ama muddo kooban.

## Xaq ma u leeyahay inaan ku dhaqmo diintayda (haddii aan diin leeyahay) anigoo daryeel ku jira?

Haa Waxaad xaq u leedahay inaad ku dhaqanto diintaada, haddii aad mid leedahay, adigoo daryeel ku jira. Tusla waa in ay sameyso waxa ay awoodo si ay kuugu suurtagasho in aad ku dhaqanto diintaada. Tusla sidoo kale waa in ay tixgelisaa diintaada iyo rabitaanka waalidkaa marka ay kugu wareejinayaan qoyska korinta.

## Ma u sheegi karaa dadka in aan daryeel ku jiro?

Dadka noloshaada ku jira waad u sheegi kartaa in cid kale ku daryeesho. Si kastaba ha ahaatee, waa inaad ka taxadirtaa marka aad xogta in aad daryeel ka hesho cidaan qoyskaaga ahayn soo dhigayso onlaynka ama daabacayso. Ma jiro qof kale oo loo oggol yahay inuu xog lagugu aqoonsan karo dadwaynaha ugu gudbiyo saaxaffada ama warbixnaha daabacan kuna sheego inaad tahay ilmo cid kale koriso ama xannaaneyso.

## Waa maxay xuquuqdeydu haddaanan ku faraxsanayn daryeelka?

Waxaad xaq u leedahay inaad dalbato inaad la kulanto shaqaalahaaga bulshada wakhti kasta oo aad ku jirto daryeelka. Qof ka socda Tusla waa inuu ku soo booqdaa bisha ugu horreysa ee daryeelkaaga, ka dibna saddexdii biloodba mar labada sano ee ugu horreysa ee aad ku jirto daryeelka iyo lixdii biloodba mar wixii ka dambeeya. Haddii ay dhibaato ka jirto daryeelkaaga, Tusla waa inay hubisaa in daryeelkaaga la ilaaliyo. Haddii aadan ku faraxsanayn daryeelkaaga, waxaad xaq u leedahay:

- inaad u dacwooto Tusla
- inaad ogaato oo aad fahamto nidaamka cabashada (qof waa inuu kuu sharxaa)
- in lagaa taageero gudbinta cabashadaada, tusaale ahaan, waalid ama u doode madax bannaan (qof ku metelaya)
- inaad ogaato natiijada (maxsuulka) cabashadaada
- inaad nuqul qoraal ah ka hesho go’aan kasta oo adiga kugu saabsan.

Haddii aadan ku faraxsanayn habka cabashada, waxaad xaq u leedahay inaad u dacwootid Wakiilka Carruurta. Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa EPIC, oo bixisa adeegyo kala duwan oo loogu talagalay carruurta ku jirta daryeelka iyo kuwa daryeelka ka baxaya. Arag Cutubka 10 : Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? ee hagahan si aad u hesho faahfaahinta xiriirka ururadan.

**Loogu talagalay waalidiinta iyo mas'uuliyiinta**

## Ma waydiisan karaa Tusla inay dib u eegto meelaynta ilmaha lagu hayo?

Haa Haddii aad xiriir la leedahay fayoobida ilmo lagu hayo goobaha daryeelka, waxaad warqad u qortaa Tusla si aad uga codsato inay dib u eegis gaar ah ku sameeyaan meelaynta ilmaha. Haddii Tusla ay go'aansato ineeynan sidaas yeelin, waa inay qoraal kuugu sheegaan oo ay kugu siiyaan sababaha go'aankooda.



## Maxaa dhacaya markaan 18 jirsado?

Kahor intaadan ka tagin daryeelka, Tusla waa in ay sameyso qiimeynta waxa aad u baahan karto marka aad 18 jir gaarto oo aad ka baxdo nidaamka daryeelka - tan waxaa loo yaqaan 'daryeelka ka dib'. Qiimayntan baahiyahaaga waa in lagu qoraa qoraal.

Haddii aad ku jirtay daryeelka 12 bilood ama ka badan inta u dhaxaysa da'da 13 iyo 18 waxaad xaq u leedahay qorshe daryeel oo qeexaya sida baahiyahaaga loo dabooli karo.

Inta aad xaq u leedahay qorshaha daryeelka dambe, ma lihid xuquuq toos ah oo aad ku gasho adeegyada qorshaha ku jira. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daryeelka dambe, la xiriir EPIC.

Taageerada daryeelka ka dib waxay la macno noqon kartaa in lagaa caawiyo:

- bixinta kharashka dugsiga
- heerka saddexaad ama khidmadaha iyo kharashyada kale
- helida waxbarasho
- helida meel lagu noolaado.

Tusla waxa ay ku taageeri kartaa ilaa aad ka gaadho 21 jir adigoo weli waxbarasho ku jira mooyaane, markaasay ku taageeri karaan in aad dhamayso waxbarashadaada ilaa aad ka gaadhayso 23 jir.

# Waa maxay Qaybta Daryeelka Gaarka ah oo ma la ii diri karaa mid?

Dhaqamada carruurta iyo dhallinyarada waxay fayoobidooda, caafimaadkooda, badbaadadooda ama korriinkooda gelin kartaa khatar. Xaaladahan dhifka ah, shaqaale bulsho ayaa laga yaabaa inuu weydiisto maxkamadda in ilmo ama qof dhalinyaro ah lagu hayo daryeelkooda ama ilaalintooda qaybta daryeelka gaarka ah ee Ireland ama dibadda.

Qeybta Daryeelka Gaarka ah waa hoy ammaan ah oo leh albaabo iyo daaqado xiran halkaasoo Maxkamadda Sare ay ku riddo carruurta ama dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 11 ilaa 17 sano marka loo arko inay khatar ku yihiin caafimaadkooda ama badbaadadooda. Marka lala barbardhigo goobaha kale ee daryeelka, Unugyada Daryeelka Khaaska ah waxay leeyihiin shaqaale badan. Waxa kale oo ay haystaan taageerooyin waxbarasho, daawayn iyo taageero gaar ah si looga caawiyo ilmaha ama qofka dhalinyarada ah ka gudbitaanka dhaqamada adadag iyo dhibaatooyinka kale. Ujeeddadu waa in la bixiyo daryeel xoog leh, oo muddo gaaban si looga caawiyo qofka dhallinyarada ah inuu noqdo mid xasilloon si ay ugu soo laabtaan daryeelka caadiga ah sida ugu dhakhsaha badan.

# Waa maxay taageerada aan ka heli karo Daryeelka Khaaska ah?

EPIC waxay taageero u doodid madax bannaan siisaa carruurta:

- la geliyay nidaam daryeel
- ku jirta daryeelka
- ku jira dacwadaha go'aaminta daryeelka iyo xannaanaynta.

Waxay qofka dhalinyarada ah ka caawin karaan sheegista waxay rabaan. Macluumaad intaas ka badan, eeg **websaydka EPIC**. EPIC waxay siisaa adeega u doodista booqashada Unugyada Daryeelka Khaaska ah ee Ireland.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada, waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa khadka caawinta Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta adigoo wacaya 01-902 0494 ama iimaylka help@childrensrights.ie.

# Maxay yihiin xuquuqdeyda haddii la igu meeleeyo Unugga Daryeelka Khaaska ah?

Garsooraha Maxkamadda Sare Keliya ayaa amri kara in lagugu meeleeyo Unugga Daryeelka Khaaska ah. Shaqaaleeyahaaga bulshada iyo sidoo kale Ilaaliyaha *ad Litem* ayaa garsooraha u gudbin doona aragtidaada iyo qiimayntooda xirfadeed ee danahaaga ugu fiican, laakiin xaq uma lihid inaad looyar qabsato. Meelayntu waxay noqon kartaa saddex ilaa lix bilood. Wakhtigan ka dib, maxkamaddu waa inay dib u eegtaa meelaynta. Maxkamadda lafteedu waxay go'aansan kartaa inay beddesho amarka lagugu dhigayo Qaybta Daryeelka Khaaska ah ama Tusla waxay waydiisan kartaa inay sidaas samayso.

# Xuquuqda aan ku dhex leeyahay qoyska





## Cutubka 5

# 5.1 Qodobo Guud

## Xaq ma u leeyahay inaan la noolaado qoyskayga?

Haa, waxaad xaq u leedahay inaad la noolaato qoyskaaga haddii ay tani adiga kuu fiican tahay.

## Waa maxay mas'uul ka noqoshadu?

Masuul ka noqoshadu waa ereyga la siiyay xuquuqda iyo waajibaadka waalidka ee la xidhiidha korinta ubadkooda. Dadka kaa masuulka ah waxay xaq u leeyihiin inay noloshaada ka gaaraan dhammaan go'aanada waawayn. Tan waxaa ka mid ah go'aamada sida:

- dugsiga aad dhiganayso
- daaweyn kasta oo aad hesho
- meesha aad ku noolaanayso
- codsashada baasaboorka
- doorashada diinta (haddii aad diin aad qabto)
- go'aannada ku saabsan ka bixista dalka.

Cidda kaa masuulka ah waa qofka leh 'xuquuqda ilaalinta' - Mas'uuliyadaada sharciyed. Qofkani badanaa waa hooyadaa iyo aabbahaa laakiin sidoo kale wuxu noqon karaa qaraabo ama qof kale.

## Waa kuma cidda iga masuulka ah?

Haddii waalidkaa ay is guursadeen markii aad dhalatay, si otomaatig ah ayay u noqonayaan cidda kaa masuulka ah.

Haddii hooyadaa aan la qabin markii aad dhalatay, si otomaatig ah ayay u noqonaysaa qofka kaa masuulka ah, laakiin aabbahaaga aan qabin hooyadaa si toos ah looguma tixgelinayo inuu masuul ka yahay xitaa haddii magaciisa uu ku qoran yahay warqaddaada dhalashada. Waxuu ku noqon karaa masuulkaaga dhawr siyaabood:

- isagoo guursada hooyadaa
- inuu heshiis wadajir ah la galay hooyadaa
- haddii waalidkaa ay wada noolaayeen 12 bilood oo isku xigta ka dib 18 Janaayo 2016 muddadaas oo ay ku jirto ugu yaraan saddex bilood oo uu idinla noolaa adiga iyo hooyadaa ka dib dhalashadaada
- isagoo ka codsanaya maxkamad.

Haddii waalidkaa ay yihiin lamaane dumar ah oo isku jinsi ah, hooyada ku dhashay ayaa noqon doonta mas'uulkaaga tooska ah. Haddii waalidkaa ay yihiin lamaane rag ah oo isku jinsi ah, aabbahaaga dhabta ayaa noqon doonaa masuulkaaga. Labada xaaladoodba, waalidka aan run ahaan kuu dhalin wuxu masuuliyadda ka codsan karaa maxkamadda haddii:

- ay is qabeen ama la noolaayeen waalidkaaga ku dhalay in ka badan saddex sano
- ku daryeelayeen wax ka badan muddo laba sannadood ah.

Haddii aad leedahay waalid ay waalidka wada isqabaan waxay ka codsan karaan maxkamadda inay masuul ka noqdaan haddii:

- ay is qabeen ama la noolaayeen waalidkaaga ku dhalay in ka badan saddex sano
- ku daryeelayeen wax ka badan muddo laba sannadood ah.

Haddii aanad lahayn waalid ama masuul ama waalidkaa ama masuulkaaga aanu gudan karin doorkooda, qof kale oo weyn oo noloshaada ku lug leh oo ka masuul ahaa xanaanadaada maalin laha ah in ka badan 12 bilood ayaa sidoo kale codsan kara inuu noqdo masuulkaaga.

## Haddii mid ka mid ah waalidkay uu galo xiriir, lammaanahooda cusub ma si toos ah ayuu masuul iiga noqonayaa?

Maya. Haddii hooyadaa ama lammaanahaa aabbaha aanu ahayn waalidka ku dhalay markaas si toos ah uma noqonayaan masuulkaaga. Si kastaba ha ahaatee, waxay noqon karaan masuulkaaga markay ka codsadaan maxkamada haddii:

- ay is guursadeen waalidkaaga
- la noolaayeen waalidkaa in ka badan saddex sano, oo
- ay ku daryeelayeen wax ka badan muddo laba sannadood ah.

Haddii mid ka mid ah waalidiintaada uu guursado lamaane cusub, lammaanaha cusub wuxuu si rasmi ah kuu korsan karaa ka dib marka uu helo ogolaanshaha waalidkaaga kale ee ku dhalay (waalidka aan qayb ka ahayn guurka).

# Qaraabadaydu xaq ma u leeyihiin inay go'aan iga gaadhaan?

Caadiyan maya. Si kastaba ha ahaatee, haddii waalidkaaga ay awoodi waayeen in ay ku xanaaneeyaan jirro darteed ama haddii, tusaale ahaan, ay dhinteen, qof kula qaraabo ah ayaa ka codsan kara maxkamadda inay masuul kaa noqdaan. Waxay markaas xaq u yeelan doonaan inay qaataan go'aano sharci ah oo adiga kugu saabsan iyo inay xuquuqdaada kuu raadiyaan iyagoo ku metelaya. Tani waxay badanaa dhacdaa marka waalidkaa aysan ku daryeeli karin oo aad ku jirto daryeelka qaraabadaada ama awoowahaa/ayeeyadaa. Waalidiintaada ayaa sidoo kale sii dardaarmi kara oo sii magacaabi kara qofkan intaanay dhiman ka hor haddii ay dhintaan.

# Waa maxay taageerada ay heli karaan qoysasku?

Adeegyada taageerada qoyska ayaa diyaar u ah qoysaska iyo shakhsiyaadka u baahan caawimada. Dhacdooyinka nolosha sida dhalashada, dhimashada, niyad-jabka, kala-tagga, jirrada, xadgudubka ama dhibaatooyinka dhaqaale waxay culeys iyo cadaadis saari karaan nolosha qoyska iyo xiriirka. Waxaa jira xarumo kheyraad qoys oo dalka oo dhan ka jira iyo adeegyo kale oo taageero qoys oo laga heli karo Tusla. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo arrintan ku saabsan ka helaysaa websaydka Tusla.

# Miyaan arki karaa labadayda waalid haddii aysan wada noolayn?

Haddii waalidkaa aysan wada noolayn (tani waxay noqon kartaa haddii ay kala tageen ama aysan waligood wada jooginba) waxay dhexdooda go'aan ka gaari doonaan inta jeer ee aad arki karto waalid kasta iyo muddada markii kastaba. Tan waxa loo yaqaan 'helitaanka'.

Haddii ay go'aan iskood u wada gaari waayaan, waxay caawinaad ka heli karaan garsooraha maxkamadda.

Awoowyaashaa, eedooyinkaa, abtiyaashaa, iyo walaahaa rag iyo dumarba (haddii ay ka weyn yihiin 18) waxay sidoo kale ka codsan karaan maxkamada inay kula xiriiri karaan, taas oo ka dhigan xaq ay waqti kugula qaadan karaan.

# Sidee ayuu xaakimku go'aanka ugu dhex gaarayaa maxkamadda?

Marka la samaynayo go'aan ku saabsan helitaanka, waxa ugu muhiimsan ee uu garsooruhu tixgeliyo waa wixii adiga kuu roon.

Markey timaado go'aaminta waxa adiga kuu fiican, waxaa jira dhowr waxyaalood oo ay garsoorku tixgeliyaan oo ay ka mid yihiin:

- taariikhda daryeelkaaga
- faa'iidada kuugu jirta inaad xiriir la yeelato labadaada waalidba
- dhibaato kasta oo laga yaabo inay ku soo gaadhay
- fikradahaaga.

Xaakimku waxa kale oo uu amri karaa in warbixinno la soo buuxiyo si ay u kaaliyaan go'aan gaadhista. Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa inuu garsooruhu magacaabo Ilaaliyaha *ad Litem* kaasoo u sheegi kara maxkamadda waxa adiga kuu wanaagsan iyo waxa ay aragtidaadu tahey.

# Xaq ma u leeyahay in aragtidayda la maqlo?

Haa Waxaad xaq u leedahay in ra'yigaaga laguu dhagaysto marka xaakimku go'aan gaadhayo:

- ilaalinta
- cida aad la nooshahay
- helitaanka.

Mararka qaarkood garsooraha ayaa laga yaabaa inuu go'aansado inuu si toos ah kuula hadlo. Haddii kale waxa dhici karta in xaakimku go'aansado in uu kula hadlo khabiir kaas oo intaas ka dib u qori doona warbixin maxkamadda oo ay ku jirto ra'yigaaga ku saabsan waxa dhici doona. Waalidkaagu waa inay bixiyaan kharashka khabiirka si uu u qabto shaqadan.

Waxaa muhiim ah in la xasuusnaado in iyadoo garsooraha ama khabiirku ay dhageysteen fikradahaaga, ay haddan ugu dambeyntii gaari karaan go'aan aan waafaqsanayn aragtidaada. Sababtu waa in aragtidaaduq ayb keli ah ka tahay waxa garsooruhu ay tahay inuu eego marka uu go'aaminayo waxa adiga kuu wanaagsan guud ahaan.

Haddii garsooruhu uu maqli waayo ra'yigaaga waxaad heli kartaa talo sharci. Waxaad talo sharci oo bilaash ah ka heli kartaa Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta ama Xarunta La-talinta Sharciga ee Bilaashka ah.

# Goobjoog ma ka noqon karaa maxkamadda marka garsooruhu uu go'aan ka gaarayo daryeelkayga?

Haddii aad rabto inaad goobjoog ka noqoto kiiskaaga maxkamadda dhexdeeda, waxaad waydiisan kartaa xaakinka haddii aad goobjoog u noqon karto dhammaan ama qayb ka mid ah kiiska. Garsooruhu waa inuu kuu oggolaadaa inaad joogtid maxkamadda ilaa ay u malaynayaan inaanay ku habboonayn ama ku anfici doonin maahane. Si ay u go'aamiyaan haddii ay dantaada ku jirto inaad halkaas joogto iyo haddii kale, garsoorayaashu waxay inta badan eegi doonaan da'daada, qaan-gaarnimadaada iyo fahamkaaga waxa dhacaya.

# Maxaa igu dhacaya haddii mid ama labadayda waalidba ay dhintaan?

In mid ama labadaa waalidba dhintaan waa waqti adag noloshaada ku soo maray. Haddii aad u baahan tahay inaad cid la hadasho ama aad hesho taageero, waxaa jira meelo badan oo ku caawin kara. Waxaad la hadli kartaa Khadka caruurta, adeeg sir ah oo bilaash ah oo loogu talagalay carruurta. Waxaad khadka telefoon caruurta kala xidhiidhi kartaa 1800 66 66 66. Waxaad sidoo kale qoraal ahaan ugu qori kartaa 'Hadal' 50101 ama waxaad qof kala hadli kartaa internetka  websaydka Childline.

Barnardos waxay bixiyaan adeega khadka kaalinta murugada tacsida carruurta ee loogu talagalay dadka raadinaya macluumaadka iyo taageerada wax ka qabashada murugada tacsida ubadka. Waxaad hay'adda kala xiriiri kartaa 01-473 2110 laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 12 galabnimo Isniinta ilaa Khamiista.

Haddii mid ka mid ah waalidkaa dhinto, waalidka kalena uu yahay mas'uulkaaga, waxay awoodaan inay go'aan ka gaaraan noloshaada, tusaale ahaan meesha aad ku nooshahay iyo meesha aad wax ka baranayso.

Waalidkaagu waxay magacaabi karaan qof kale oo weyn ama xubin qoyskaaga ka tirsan si uu kuugu koriyo qaab waafasqsan dardaarankooda haddii, Alle kama dhigee, ay iyana dhintaan. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto tan, waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa Khadka Macluumaadka Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta 01-902 0494.

# Da'dee ayaan guriga isaga guuri karaa?

Waxaad ka bixi kartaa guriga markaad 16 jir tahay haddii waalidkaa ama qofka kaa masuulka ahi ogolaadaan. Waxaad guuri kartaa ogolaansho la'aan markaad gaarto 18 sano jir.

# 5.2 Isbeddellada xaaladda qoyskayga

## Maxaa igu dhacaya haddii waalidkay ay kala tagaan?

Waalidiintaada ayaa go'aamin doona:

- sida ay u wadaagi doonaan mas'uuliyadaha maalinlaha ah ee daryeelkaaga
- meesha aad ku noolaan doonto
- haddii aad midkood la noolaan doonto ama haddii aad waqtigaaga labadooda la wadaagi doonto
- inta jeer ee aad arki doonto waalid kasta iyo illaa muddada aad la joogayso
- inta mid kasta oo iyaga ka mid ahi ay ku bixin doonaan kharashka kala wadista guriga.

Haddii waalidkaa ay ku heshiin waayaan arrimahan, qof kale ayaa ku qasbanaan doona inuu ka qayb qaato si uu waalidkaaga uga caawiyo inay go'aan ka gaaraan. Qofkani wuxu noqon karaa dhexdhexaadiye, qareen ama garsoore.

## Maxaa dhacaya haddii waalidkay ay ku heshiin waayaan?

Haddii waalidkaa ay ku heshiin waayaan waxa kugu dhacaya haddii ay kala tagaan, waxa laga yaabaa in ay tagaan maxkamadda si uu garsoore go'aan uga gaaro.

Haddii garsoore uu go'aan ka gaarayo waxa kugu dhacaya haddii waalidkaa ay kala tagaan, waxa ugu muhiimsan ee ay tahay inay ka fiirsadaan waa dantaada.

Marka la go'aaminayo waxa adiga kuu fiican guud ahaan waxaa jira dhowr waxyaalood oo ay tahay in garsooruhu tixgeliyo, oo ay ku jiraan:

- taariikhda daryeelkaaga
- faa'iidada kuugu jirta inaad xiriir la yeelato labadaada waalidba
- dhibaato kasta oo laga yaabo inay ku soo gaadhay
- fikradahaaga.

## Wax ma ka dhihi karaa go'aannada ku saabsan daryeelkayga?

Xaq uma lihid inaad wax ka sheegto go'aanada waalidkaa ay ka sameynayaan daryeelkaaga, si kastaba ha ahaatee, waxay ku weydiin karaan ra'yigaaga haddii ay doonaan.

Haddii waalidkaa ay caawimaad ka helayaan Adeegga Dhexdhexaadinta Qoyska, waxa laga yaabaa in lagugu martiqaado inaad ka soo qaybgasho kulanka waalidkaa si aad ra'yigaaga uga dhiibto qorsheha ay kuu dejiyeen.

Haddii garsooruhu uu go'aan ka gaarayo cidda masuuliyadada qaadaysa, qofka aad la nooshahay iyo sida laguula xiriirayo, waxaad xaq u leedahay in la dhageysto ra'yigaaga. Waxaa jira siyaabo badan oo uu garsooruhu u maqli karo ra'yigaaga. Mararka qaarkood garsooraha ayaa laga yaabaa inuu go'aansado inuu si toos ah kuula hadlo. Haddii kale waxa dhici karta in garsooruhu go'aansado in uu kula hadlo khabiir kaas oo intaas ka dib u qori doona warbixin maxkamadda oo ay ku jirto ra'yigaaga ku saabsan waxa dhici doona.

Waxaa iyana muhiim ah in la xasuusnaad in iyadoo garsooraha ama khabiirku ay dhageysteen fikradahaaga, ay haddan ugu dambeyntii gaari karaan go'aan aan waafaqsanayn aragtidaada. Sababtu waa in aragtidaaduq qayb keli ah ka tahay waxa garsooruhu ay tahay inuu eego marka uu go'aaminayo waxa adiga kuu wanaagsan guud ahaan.

## Xaq ma u leeyahay inaan arko qaraabadayda haddi waalidkay kala tagaan?

Haa, inta badan xaaladaha. Inta badan qorsheyaasha waa laguu dejin doonaa laakiin lamaaanaha waalidkaa, awoowayaasha, eedoyinka, abtiyaasha, walaalaha iyo walaalaha ayaa sidoo kale maxkamadda ka codsan kara xaq ay kugu arki karaan. Maxkamaddu way ogolaan doontaa tan haddii ay adiga guud ahaan kuu fiican tahay.

## Ma jiraan wax aan samayn karo haddii aanan ku faraxsanayn wakhtiga aan la qaadanayo waalidkayga?

Haddii aanad ku faraxsanayn wakhtiga aad la joogto labada waalid, isku day inaad iyaga u sharraxdo fikirka aad qabto. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad caawimo ka hesho ururada la shaqeeya carruurta iyo dhalinyarada sida Teen Between. Arag Cutubka 10 : Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? ee hagahan si aan u helo faahfaahinta xiriirka ururadan.


# Xaq ma u leeyahay in aan taageero dhaqaale ka helo waalidkay?

Waalidkaa waxa ku waajib ah inuu ku taageero dhaqaale ahaan ilaa aad ka gaadhayso 18 jir. Haddii waalidkaa kala tagaan ama isfuraan, waa inay labadooduba ku masruufaan. Haddii ay ku heshiin waayaan, maxkamadda ayaa go'aan ka gaari doonta, iyadoo ku saleynaysa dakhliga waalidkaa iyo mas'uuliyadaha kale ee qoyska. Waalidka ay waalidkaaga wada joogaan ee aan ahayn mas'uulkaaga sharci maaha inuu ku taageero dhaqaale ahaan.

# 5.3 Waalidiinta da'da yar (kayar 18)

## Halkee baan ka heli karaa macluumaadka iyo taageerada?

Waxaa jira ururo badan oo ku siin kara macluumaad iyo taageero. Haddii aad ka yar tahay 18 oo aad ilmo dhasho, waxaad la xiriiri kartaa ururada hoose.



- Barnaamijka Taageerada Waalidka ee Da' Yarta
- Treoir
- One Family

## Iskuul ma aadi karaa ka dib dhalashada ilmahayga?

Haa, sharci ahaan, waa inaad ku jirtaa dugsiga illaa aad ka gaadhayso 16 jir. Waxaa laga yaabaa inaad wakhti kugu dhaafo dugsiga inta aad uurka leedahay ama ka dib marka ilmahaagu dhasho sidaa darteed waa fikrad wanaagsan inaad kala hadasho macalinka ama maamulaha dugsiga sidii aad u soo buuxin lahayd waqtigii ku seegay. Haddii kale waxaad ku biiri kartaa Qorshaha Waxbarashada Guriga kaas oo kuu ogolaanaya inaad wax ku barato guriga.

Haddii la filayo inaad ilmaha dhasho wakhtiga imtixaanadaada shahaadiga ah ee hoose ama dugsiga sare, waa inaad waydiiso dugsigaaga inuu kuu sameeyo qabanqaabo si aad imtixaanadaada ugu gasho si gaar ah oo aad raaxo ku dareemayso.

## Miyaan leeyahay xuquuq mas'uulnimo ka hooyo aan la qabin ahaan?

Haa Adiga ayaa si otomaatig ah u noqonaya masuulka sharciga ah laga bilaabo marka ilmuhu dhasho oo adiga ayaa toos uga masuul ah ilmahaaga.

## Miyay tahay inaan diiwaan geliyo magaca aabbaha ilmahayga markaan dhalanayo?

Waa inaad ku diiwaan gelisaa dhalashada ilmahaaga saddex bilood ka dib dhalashadiisa gudaheed. Hadda uma baahnid inaad diiwaan geliso faahfaahinta aabbaha ilmaha haddii aad keligaa tahay.

Dad badan ayaa u haysta in magaca aabbaha ee ku qoran shahaadada dhalashada ilmaha ay siinayso aabbaha xuquuq ilaalin sharci ah - laakiin tani sax maaha. Haddii uusan ku qorneeyn warqadda dhalashada magaca aabaha, ma saameynayso hooyada kelida ah xaq u yeelashada Lacag-bixinta Qoyska Hal-Waalid ah.

Waxaad wax badan oo ku saabsan diiwaangelinta dhalashada ilmaha ka heli kartaa Xafiiska Diiwaangelinta Guud lambarka 1890 25 20 76. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa websaydka Macluumaadka Muwaadinka.

## Xaq ma u leeyahay ka aabbe keligiis ah?

Ma lihid xuquuq toos ah haddii aad tahay aabe aan wax qabin. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad la nooshahay hooyada ilmaha 12 bilood ka dib 18 Janaayo 2016 oo ay ku jiraan ugu yaraan saddex bilood ka dib dhalashada ilmahaaga, waxaad xaq u leedahay mas'uulnimo toos ah.

Haddii aadan u qalmin masuuliyad otomaatig ah, waad codsan kartaa mas'uulnimo haddii hooyadu ogolaato. Tan waxaad sameynaysaa adigoo foomka mas'uuliyadda ilmaha ku hor saxeexaya guddida nabadda ama guddidada dhaarta. Haddii hooyadu aanay kugu raacin, waxaad mas'uulnimo codsan kartaa adigoo u maraya maxkamadaha degmada. Maxkamaddu way diidi kartaa inay aabbaha ku magacawdo mas'uul ilmeed haddii ay aaminsan tahay in aanay taasi ilmaha u roonayn. Haddii aabaha iyo hooyada ilmaha dhalay ay is guursadaan, aabuhu wuxuu si toos ah u noqonayaa mas'uulka ilmaha.

Waxaad ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan sida loo codsado mas'uulnimada ilmaha, raadso haynta ilmahaaga ama lagu helo xuquuqaha la xiriirista ilmaha barta Treoir Waxa kale oo laga yaabaa inaad u baahato inaad hesho talo sharci. Waxaad ku ogaan kartaa sida loo helo gargaarka sharciga madaniga ah adigoo booqanaya websaydka internetka ee Guddiga Kaalmada Sharciga.

Haddii aad tahay aabbe da'yar ama wiil yar oo dhowaan aabbe noqonaya, waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Barnaamijka Taageerada Waalidka Dhallinyarada. Ka eeg websaydka Barnaamijka Taageerada Waalidka Da' Yarta ah si aad u ogaato taageerada waalidnimo ee aad heli karto.

# 5.4 Taranka aadanaha ee la kaabay

## Xaq ma u leeyahay in aan ogaado cidda ay yihiin waalidkeyga dhabta ah ee i dhalay haddii aan ku dhashay nidaam taran aadame oo la kaabay?

Mararka qaarkood dadka kuu waalidka ah iyo kuwa ka mas'uulka ah xannaaneyntaada maalinlaha ah lama mid ah waalidkaaga tooska kuu dhalay. Tani waxay noqon kartaa dhowr sababood oo ay ku jiraan haddii aad ku dhalatay iyadoo la isticmaalayo shahwo ama ukun ka timid deeq-bixiye.

Hadda, xaaladdan marka lagu jiro, xaq uma lihid inaad ogaato cidda waalidkaaga ku dhaley yihiin. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira sharciyo la rabo inay dhaqan galaan oo kuu ogolaanaya inaad ogaato cidda ay yihiin waalidiintaada ku dhalay ka dib markaad 18 jirsato.

# 5.5 Carruurta la korsaday

## Waa maxay korsigu?

Korsigu waa hab sharci ah kaas oo ilmuhu kaga mid noqonayo qoys cusub. Waxay abuurtaa xidhiidh sharci oo joogto ah oo ka dhexeeya waalidka ilmaha korsanaya iyo ilmaha.

Korsiga, xidhiidhka sharciga ah ee u dhexeeya ilmaha iyo waalidka dhalay wuu baaba'aa, waalidkii korsadayna waxay leeyihiin xuquuq iyo waajibaad la mid ah sidii inuu ilmuhu ka dhashay qoyskooda oo kale.

**Loogu talagalay waalidiinta iyo mas'uuliyiinta**

## Sidee baan ilmahayga u siin karaa cid korsata?

Dhammaan carruurta waxa lagu wareejin karaa cid korsata gudaha Ireland, oo ay ku jiraan carruur hore loo korsaday.

Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

- kooxda shaqada bulshada ee isbitaalka hooyada iyo dhallaanka
- Kooxda korsashada ee Hay'adda Ilmaha iyo Qoyska ee deegaankaaga
- hay'adda ilmo korsashada
- Maamulka Ilmo korsashada
- adeega la talinta uurka sida My Options.

Waxaad la xiriiri kartaa wakaaladahan marxalad kasta ee uurka ee aad ku jirto ama ka dib dhalashada ilmahaaga. Waad bedeli kartaa maskaxdaada ku saabsan korsashada ilmaha wakhti kasta illaaa inta Xukunka Korsashada Ilmaha la ridayo.

Treoir oo uu weheliyo Barnaamijka Dhibaatada Uurka ayaa soo saartay buug-yaraha macluumaadka ee habka korsashada ee waalidiinta ku fekeraya inay ubadkooda ku wareejiyaan cid kale oo korsata. Ka eeg bogga Treoir wixii macluumaad ama faahfaahinta xiriirka ah si aad qof oogala hadasho xaaladaada.

# Waa maxay noocyada kala duwan ee korsashada?

### Korsashada ilmaha ee qof ay waalidka isqabaan:

Tani waa marka qofka ay waalidka isqabaan uu codsado inuu ku korsado. Intaas ka dib wuxu qofkaasi noqon doonaa sharciyan qof waalidkaa ah isagoo la jira waalidkaaga kale. Waa inaad wada noolateen waalidkaaga iyo qofka ay waalidka wada joogaan ugu yaraan laba sano si ay tani u dhacdo.

### Korsashada ilmaha ee xubnaha kale ee qoyska:

Tani waa marka xubin qoyskaaga ah ama qaraabo ah ay ku korsadaan ka dib markii ay Tusla ama hooyadaa kugu wareejiyeen.

### Korsiga maxalliga ah ee cunugyada yaryar:

Korsiga maxalliga ah ee cunugyada yaryar waa marka ilmaha yar loo dhiibay waalidiin cusub. Ilmaha waxa labada lammaane ku wareejin kara keliya adeega ilmo korsashada ee Tusla ama hay'ad ilmo korsasho oo la aqoonsan yahay. Maamulka Korsashada Ilmaha ee Ireland waa in ay ansixiyaan meelaynta ka hor inta aysan dhicin.

### Ilmo Korsashada Wadammada Kale:

Ilmo Korsashada Wadammada Kale waa marka dad deggan Ireland ay korsanayaan ilmo deggan waddan aan ahayn Ireland.

### Korsashada dadka ilmaha xanaaneynayay muddo dheer:

Korsashada dadka ilmaha xanaaneynayay muddo dheer waa marka ilmaha ay korsadaan ciddii horay u hayn jirtay.

**Loogu talagalay waalidiinta iyo mas'uuliyiinta**

## Aabaha ubadka ahaan, xaq miyaan u leeyahay in la igala tashado ka hor intaan ilmahayga lagu wareejin cid korsata?

Haa Ka aabaha ilmaha ahaan, waxaad xaq u leedahay in lagala tashado ka hor inta aanay hooyadu ilmahaaga ku wareejin cid korsata, xitaa haddii aanay mas'uuliyadda ilmuhu idinka dhaxayn. Haddii mas'uuliyada cunuggu idinka dhaxayso, ogolaanshahaaga ayaa loo baahan yahay ka hor intaysan korsiga sii socon. Haddii aan lagula soo xiriiri karin, amar ka soo baxa Maxkamadda Sare ayaa loo baahan yahay ka hor intaanay korsashadu horay u sii socon.

# Goorma ayaa ilmaha la korsan karaa?

Waxa lagu korsan karaa marka aad ka yar tahay da'da 18, laakiin habka korsashada waxa ay qaadan kartaa wakhti dheer markaa codsiga waa in la sameeyaa ka hor inta aanad gaadhin 17 jir ugu dambayn. Markaad go'aan ka gaareyso korsashada, Maamulka korsashada tixgelinta ugu weyn waxay siin doonaan dantaada iyo waxa kuu roon. Maamulka korsashadu waa inay dhegaystaan aragtidaada ku saabsan in lagu korsado ka hor intaysan samayn Amarka korsashada.


# Haddii la i korsado, ma helayaa shahaado dhalasho oo cusub?

Haddii lagu korsado, xafiiska diiwaangelinta guud wuxuu ku siin doonaa shahaado ilmo korsasho oo magaca waalidka ku korsaday ku qoran yahay magacaagana waxaa la gelin doonaa Diiwaanka Carruurta La Korsado. Tani waxay dhacdaa ka dib waxa loo yaqaan dhageysiga korsashada ee Maamulka Ilmo Korsashada ee Ireland.

Wixi macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan waxa ka dhacaya dhageysiga, ka eeg hagayaasha Maamulka Ilmo Korsashada ee dhalinyarada halkan.

# Xaq ma u leeyahay in aan arko shahaadada dhalashada ee asalka ah?

Maya. Ma jirto xuquuq toos ah oo aad ku arki karto ama ku heli karto nuqul ka mid ah shahaadada dhalashadaadii asalka ahayd, laakiin waxaad ka dalban kartaa Maamulka Ilmo Korsashada iyaga oo dalbanaya inaad arki karto. Faahfaahin ku saabsan sida loo codsado waxaad ka heli kartaa websaydka Maamulka korsashada.



Haddii aad hore u taqaanay magacaaga dhalashada oo buuxa iyo taariikhda dhalashada waxaad si toos ah uga codsan kartaa Xafiiska Diiwaangelinta Guud.

# Xaq ma u leeyahay inaan arko diiwaanka korsashadayda?

Maya, inta aad Ireland joogto xaq uma lihid inaad hesho diiwaanada korsashadaada. Waxaad ka dalban kartaa Maamulka Ilmo Korsashada ee Ireland faahfaahinta waalidka ku dhaley. Si kastaba ha ahaatee, Maamulka Ilmo Korsashada waxa ku waajib ah inay ilaaliyaan sirta hooyadaa ku dhashay ilaa ay go'aansato inay siiso ogolaansho siidaynta diiwaanka. Haddii hooyada ku dhashay ay bixin weydo ogolaanshaheeda, Maamulka Ilmo Korsashada ayaa qiimeyn isku miisaaman ku sameynaya arrinta oo go'aan ka gaaraya. Haddii Maamulka Ilmo Korsashadu diido codsigaaga, waxaad maxkamadda sare ka dalban kartaa inay dib u eegto go'aanka.

# Xaq ma u leeyahay inaan xidhiidh la yeesho waalidkii i dhalay?

Maya. Si kastaba ha ahaatee, Maamulka Ilmo Korsashada waxay leeyihiin Diiwaanka Xidhiidhka Korsiga ee Qaranka si ay ugu fududeeyaan in dadka cid kale korsatay iyo qoysaskii dhalay u wada xiriiraan haddii ay labaduba sidaas damcaan. Adiga ayay kugu xiran tahay inaad go'aansato haddii aad rabto inaad magacaaga geliso Diiwaanka, laakiin waa inaad ka weyn tahay 18 si aad sidaas u samayso. Adiga iyo qoyska ku dhalay waxa midkeenba midka kale lala xiriiri doona kaliya haddii aad labadiinuba is diiwaan geliseen.

Diiwaanku wuxuu kuu ogolaanayaa inaad doorato heerka xiriirka aad rabto inaad la yeelato. Tani waxay u dhaxayn kartaa inaad la kulanto qoyska aad ka dhalatay illaa wicitaan taleefan, iimayl, waraaqo ama in aad wax xiriir ahba la yeelan.

Haddii aad ka yar tahay 18 oo aad jeclaan lahayd inaad eegto bal in aad la xiriiri karto waalidka ku dhalay, walaalahaa ama awoowahaa waa inaad la xiriirtaa Tusla maadaama ay inta badan awoodaan inay dadka ka caawiyaan inay dadkooda la xiriiri karaan.

Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg websaydka Maamulka Ilmo Korsashada ee Ireland.



# Yaan kala hadli karaa hawlaha korsashada?

Haddii aad rabto in aad qof kala hadasho korsashadaada, Barnandos waxa ay leeyihiin khad caawinaad taleefoon oo qarsoodi ah 01- 454 6388. Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa Maamulka Ilmo Korsashada ee Ireland, Tusla ama Khadka Carruurta haddii aad wax walaac ah ka qabto - eeg Cutubka 10: Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? ee hagahan si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan xiriirka.

# Xuquuqdayda soo-galootinimo ama qaxoontinimo

Cutubka 6



# 6.1 Guud

## Carruurta soogalootiga ahi ma leeyihiin xuquuq la mid ah tan carruurta kale ee Ireland?

Haddii adiga ama waalidkaa aad Ireland ka soo gasheen waddan kale, waxaa laga yaabaa in la idinku aqoonsado soo-galooti. Carruurta soogalootiga ah ama carruurta waalidiinta soogalootiga ah waxay leeyihiin xaq iyo xuquuq kala duwan taasoo ku xidhan:

- dhalashadooda, ama
- dhalashada waalidkood, ama
- xaaladooda socdaalka.

Dawladda Ireland waxay dejisay xeerar ku saabsan cidda halkan iman karta si ay:

- ugu noolaato
- uga shaqeyso
- wax ugu barato
- usoo booqato dalxiise ahaan
- uga codsato nabadgeliyo
- uga biloowdo ganacsi.

Kuwaas waxaa loo yaqaan sharciyada socdaalka.

Haddii aad ku dhalatay Ireland laakiin waalidkaa aanay ahayn muwaadiniin Irish ah ama aanay xaq u lahayn inay ku noolaadaan Ireland, sharciyo socdaal oo kala duwan ayaa kugu dabbaqmi kara.

## Waa maxay ‘xaaladda socdaalka’?

Xaaladda socdaalka waxaa loola jeedaa sharciyada khuseeya qofka ku nool Ireland ee aan ahayn muwaadin Irish ah. Tusaalooyinka xaaladda waxaa ka mid ah:

- muwaadin Midowga Yurub ka soo jeeda
- magangalyo-doon
- qof haysta rukhsad socdaal oo ay ugu taallo ciqaamadda degenaanshaha Ireland.

Muwaadinka Midowga Yurub wuxuu si xor ah ugu wareegi karaa guud ahaan Midowga Yurub.

# Maxay muhiim u tahay in la ogaado xaaladdayda socdaal?

Waa muhiim inaad ogaato xaaladaada maadaama ay tani kuu sheegayso xuquuqda aad leedahay markaad ku nooshahay Ireland. Xaaladaha socdaal ee kala duwan waxay leeyihiin xuquuqo iyo shuruudo kala duwan. Tusaale ahaan, xaaladdaadu waxay saamayn kartaa:

- inta aad dalka joogi karto
- xuquuqdaada daryeelka bulshada
- helitaanka waxbarashada heerka saddexaad
- helitaanka guri bulsho
- helitaanka daryeel caafimaad
- xaqa aad u leedahay inaad shaqeyso.

# Goorma ayay tahay inaan iska diiwaan geliyo maamulka socdaalka?

## Haddii aad 15 jir tahay ama ka yar tahay uma baahnid inaad isdiiwaangeliso

Carruurta da'doodu tahay 15 sano ama ka yar uma baahna inay isdiiwaangeliyaan laakiin waa inay sidaas sameeyaan isla marka ay 16 jirsadaan. Ilaa aad ka gaadhayso 16 jir dawladdu waxay u aaminsan tahay in sharcigaagu la mid yahay ka waalidkaa. Waxaa jira qorshayaal wax looga bedelayo in dhammaan carruurta da'doodu ka yar tahay 16 sano ay iska diiwaan geliyaan maamulka, laakiin tan weli lama soo bandhigin.

## Haddii aad 16 jir tahay ama ka weyn tahay, waa inaad is diiwaan gelisaa

Haddii aad tahay 16 jir ama ka wayn tahay oo aanad ahayn muwaadin Midowga Yurub ama muwaadin Iceland, Liechtenstein, Norway ama Switzerland, waa inaad ku sugnaanshahaaga Ireland ka diiwaangeliso Maamulka Socdaalka.

Haddii aad ku nooshahay meel ka baxsan Dublin, waa inaad la xiriirtaa Sargaalka Socdaalka ee Booliska ee kuugu dhow oo caadiyan waa inaad tagtaa xafiiska diiwaangelinta degaanka. Waxaad liiskan xafiisyadan ka heli kartaa bogga INIS.

Haddii aad ku nooshahay Dublin, waa in aad ballan ka samaysataa onlayn ahaan mareegaha INIS si aad isu diiwaan geliso. Waxay ku siin doonaan ballan aaad ku imanayso Burgh Quay ee Dublin. Waxay ku siin doonaan shahaado diiwaangelineed loo yaqaanno ogolaanshaha degenaanshaha Irishka. Waa inaad tan sidataa mar kasta. Rukhsadaada degenaanshaha ayaa kuu sheegi doonta nooca sharciga aad haysato.

Haddii aad ka yar tahay 18 jir wakhtiga diiwaangelinta, lagaama rabo inaad bixiso kharashka diiwaangelinta. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka diiwaangelinta ka heli kartaa Hagaha Golaha Socdaalka ee Ireland halkan ama websaydka Waaxda Caddaaladda.

Haddii aad ka weyn tahay da'da 16 oo aad ku noolayd Ireland adigoon isdiiwaangelin waxaad ka raadsan kartaa macluumaad iyo talo ku saabsan sida ugu wanaagsan ee aad isku diiwaan gelin karto Golaha Socdaalka ee Ireland, eeg Cutubka 10: Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? Faahfaahinta xiriirka.

Haddii waalidkaa aanay fasax u haysan inay ku noolaadaan Ireland, waa inaad talo ka raadsato qareen ku takhasusa socdaalka, ama Golaha socdaalka ee Ireland, ka hor dhalashadiisa 16aad. Waxay kaala talin doonaan codsiyada suurtogalka ah ee lagu hagaajinayo xaaladdaada socdaalka.

## Maxaan sameeyaa haddii aanan hubin xaaladayda sharci, ama aanan sharci lahayn?

Haddii aadan hubin xaaladdaada sharci ama haddii aanad lahayn sharci aad bay muhiim u tahay inaad xirfadle sharci ka hesho talo iyo macluumaad ku saabsan waxaad sameyn lahayd. Waxaad kala xidhiidhi kartaa Golaha Socdaalka ee Ireland khadka macluumaadka 01-674 0200 ama wac khadka macluumaadka Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta 01-902 0494.

## Maxaan sameeyaa haddii aan bilaa waraaqo sharciyeed ahay?

Haddii aad tahay qof aan waraaqo wadan (bilaa sharci ah) aad bay muhiim u tahay inaad xirfadle sharci ka hesho talo iyo macluumaad ku saabsan waxaad sameyn lahayd. Waxaad la xiriiri kartaa Xarunta Xuquuqda Soogalootiga Ireland ama Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta.

## Waa maxay xuquuqda ay muwaadiniintu leeyihiin?

Haddii aad haysato dhalasho Irish ah, waxaad ku raaxaysan kartaa xuquuqahaaga, waxyaabaha xaqa aad u leedahay iyo taageerooyinka si la mid ah dhammaan dadka Irishka kale. Muwaadin Irish ahaan waxaad awoodaa:

- inaad codsato baasaboor Irish ah
- inaad codayso dhammaan doorashooyinka haddii aad ka weyn tahay 18 jir
- inaad hesho dhammaan adeegyada dawladda.

## Si toos ah muwaadin ma u noqon karaa haddii aan ku dhasho waddanka Ireland?

Maya. Haddii aad ku dhalatay Ireland wixii ka dambeeyay 1-dii Janaayo 2005, waxaad muwaadin Irish ah tahay keliya haddii:

- mid ama labadaada waalid yihiin Irish ama Ingiriis, ama
- mid ka mid ah waalidiintaadu -
  - uu sifo sharci ah ugu noolaa Ireland ama Waqooyiga Ireland
  - uu xidhiidh dhab ah la lahaa Ireland, iyo
  - ay waalidiintaa Ireland ku noolaayeen ugu yaraan saddex ka mid ah afartii sano ee toos uga horraysay intaadan dhalan.

Dhalashada Irishka uguma qalmi doontid inaad ku dhalatay Ireland hadi waalidkaa:

- ku noolaayeen Ireland iyagoo ku jooga fiise arday, ama
- sugaya go'aanka codsigoda magangalyada ama 'ogolaansho joogitaan' ama
- xaq u leeyihiin xasaanad dublamaasiyadeed (tani waxay la xidhiidhi kartaa midkastoo waalidkaa ka mid ah).

## Sidee baan ku noqon karaa muwaadin Irish ah haddii aanan dhalasho ahaan ahayn muwaadin Irish ah?

Haddii aanad muwaadinimada Irishka xaq ugu yeelan inaad ku dhalatay, waxa laga yaabaa inaad weli awood u leedahay inaad codsato dhalashada Irishka iyada oo loo marayo habka loo yaqaan jinsiyad-siinta. Ma jirto xuquuq toos ah oo muwaadinimo, go'aamadana waxaa iska leh Wasiirka Cadaalada Iyo Sinaanta.

Waa inaad tahay 18 jir ka hor inta aadan adigu iskaa u codsanin jinsiyadda. Haddii aad ka yar tahay 18 jir waxaad u baahan doontaa waalidkaaga ama masuulkaaga inay jinsiyadda kuu codsadaan iyagoo ku metelaya. Waxay sidan u sameyn karaan:

- ka dib markay noqdaan muwaadiniin Irish ah, ama
- haddii aad cid Irish xiriir la leedahay (macnaha xiriir dhiig idinka dhexeeyo, qaraabada ama korsashada qofka haysta dhalashada Irishka) ama
- haddii aad ku dhalatay Ireland, ama
- haddii aad ku dhalatay Ireland oo aad si sharci ah u deggan tahay adigoo qoys ka qayb ah muddo shan sannadood ah.

Intaa waxaa dheer, haddii aad ku dhalatay Ireland ka dib 1 Janaayo 2005, ama mid ka mid ah waalidkaa uu noqday muwaadin Irish ah, waalidkaa ama mas'uulkaaga ayaa ku codsan kara dhalashada iyagoo ku metelaya ka hor inta aadan gaarin 18 jir. Waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso shuruudaha qaarkood si aad ugu qalanto jinsiyadda.

Waxaa jira dhowr siyaabood oo kale oo aad ugu qalmi karto inaad noqoto muwaadin Irish ah ilmo ahaan ama qof weynba. Waxaad ku heli kartaa:

- **abtirsiimo**- haddii aad ku dhalatay meel ka baxsan Ireland, laakiin aad tahay ilmo ama ilmo awoow uu u yahey muwaadin Irish ah, waxaad xaq u leedahay dhalashada Irishka waa haddii dhalashadaadu ka diiwaangashan tahay Diiwaanka Dhalashooyinka Shisheeyaha

- **korsashada** - haddii uu ku korsado muwaadin ama lammaane Irish ah oo midkood uu yahay muwaadin Irish ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan noqoshada muwaadin Irish, booqo shabakada Macluumaadka Muwaadiniinta ama shabakada INIS.

## Miyaan u dacwoon karaa Wakiilka Xuquuqaha carruurta soogalooti ahaan ama qaxoonti ahaan?

Soogalooti ahaan, magangalyodoon ama qaxooti ahaan waad ugaga dacwoon kartaa Wakiilka Xuquuqda Carruurta (OCO) sida ay hay'adaha dawliga ah ama wakiiladooda Ireland kula dhaqmaan. Tan waxaa ka mid ah:

- dugsiyada
- isbitaallada
- dhammaan waaxyaha dowladda
- qaar ka mid ah adeegyada ay dawladdu maalgeliso sida hoyga Bixinta Tooska ah.

Si kastaba ha ahaatee, OCO ugagama dacwoon kartida sida hawlahaaga sharci looga hawlgalayo.

## Miyaan xaq u leeyahay in aan helo waxbarashada aasaasiga ah ama dugsiga sare ka muwaadin Irish ah ahaan?

Ku dhowaad dhammaan carruurta soogalootiga ah iyo qaxootiga waxay xaq u leeyihiin inay helaan waxbarashada aasaasiga ah iyo kuwa sare si la mid ah carruurta Irishka ah.

Waxa kaliya ee ka reeban waa carruurta ardayda ajanabiga ah ee ka baxsan Midowga Yurub. Haddii waalidkaa ay Ireland u joogaan inay wax bartaan, waxaa laga yaabaa inay caddeeyaan inay haystaan lacag ku filan oo ay ku siiyaan. Waa inay fasax ka helaan Waaxda Waxbarashada ka hor intaadan tegin dugsi aan lacag ahayn. Waxa kale oo laga yaabaa inay bixiyaan cashuurta socdaalka (canshuur khaas ah) si aad u dhigato dugsi aan lacag ahayn.

Waaxda waxbarashadu ma dhamaystirin shuruucda canshuurtan ku saabsan ama go'aan kama gaadhin cadadka cashuurta.

## Ma heli karaa Qorshaha khidmadaha bilaashka ah ee waxbarashada heerka saddexaad si la mid ah muwaadiniinta Irish ah?

Si aad ugu qalanto Qorshaha khidmadaha Bilaashka ah ama si aad u codsatid deeqaha Taageerada Caalamiga ah ee Ardayga ee Ireland, waa inaad ku qaadatay saddex ka mid ah shantii sano ee la soo dhaafay:

- Midowga Yurub
- Iceland
- Liechtenstein
- Norway ama
- Switzerland.

Waa inaad sidoo kale tahay muwaadin Midowga Yurub ama muwaadin:

- Iceland, Liechtenstein, Norway ama Switzerland
- haysta sharci qaxootinimo
- tahay xubin qoys oo qaxooti la aqoonsan yahay ah
- lagu siiyay oggolaansho aad waddanka ku joogto

Haddii aad noqoto muwaadin Midowga Yurubmuddada aad wax baranayso, ma bixin doontid kharashka heerka saddexaad inta kaaga hartay waxbarashada.

Haddii aadan ahayn muwaadin Midowga Yurub, waxaa laga yaabaa inaad bixiso qiimaha ardayda caalamiga ah bixiyaan si aad u hesho waxbarashada heerka saddexaad. Qiimayaashan aad bay uga sarreeyaan kuwa muwaadiniinta Midowga Yurub. Tani waxay ku xirnaan doontaa nooca sharciga socdaalka ee aad haysato. Haddii aad ku jirto nidaamka magangalyada waa inaad bixisaa qiimaha fiiga ardayda caalamiga ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira tiro qorshayaal ah oo kaa caawin kara inaad daboosho kharashka helitaanka waxbarashada heerka saddexaad sida Jaamacadaha Sanctuary.

Macluumaad dheeraad ah iyo talo ku saabsan sida loo galo nidaamyadan la xiriir Golaha Qaxootiga Ireland.

Waxaad ka hubin kartaa machadyada aad rabto inaad wax ka barato si aad u ogaato inaad xaq u leedahay Qorshaha khidmadaha bilaashka ah. Macluumaadka waxa kale oo laga heli karaa mareegaha dhaqaalaha ardayda.

## Miyaan leeyahay xaq la mid ah dadka kale si aan u helo adeegyada daryeelka caafimaadka?

Ilmo kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo daryeel caafimaad. Si kastaba ha noqotee, haddii aad ka weyn tahay da'da lix xaqa aad u leedahay kaarka caafimaadka ee daryeelka caafimaadka bilaashka ah wuxu ku xirnaan doonaa xaaladda socdaalka ee waalidkaaga ama waalidiintada. Haddii aad ka yar tahay lix jir waxaad u qalmi doontaa kaadhka dhakhtarka qoyska (GP). Tani waxay kuu ogolaanaysaa inaad u booqato GP-ga (dhakhtarka qoyska) si bilaash ah. Si aad u hesho kaarka GP-ga waxaad u baahan doontaa inaad haysato lambarka PPS. Wixii macluumaad dheeraad ah oo arrintan ku saabsan ka eeg Qaybta 3: Xuquuqdayda caafimaadka.

Waalidiintaadu waa inay ahaadaan muwaadiniin Midowga Yurub si aad u hesho kaarka caafimaadka. Waxa laga yaabaa inay u baahdaan caymis caafimaad oo gaar ah. Si kastaba ha ahaatee, waalidiintaada waxa laga yaabaa inay kuu helaan kaadhka caafimaadka haddii adiga ama waalidkaa aad codsateen magangelyo ama magangelyo lagu siiyo:

- heerka qaxootinimo
- ilaalin hoosaad
- ogolaanshaha joogitaanka Ireland.

Tani waxay leedahay sharciyo iyo xad dakhli oo u khaas ah. Wixii macluumaad dheeraad ah la xidhiidh Xarunta Macluumaadka Muwaadiniinta ee degaankaaga.

## Sidee loo helaa Lambarka PPS?

Lambarkaaga Adeegga Dadweynaha ee Shakhsi ahaaneed (PPS) waa lambar tixraac oo gaar ah oo kaa caawinaya inaad hesho faa'iidooyinka daryeelka bulshada, adeegyada dadweynaha iyo macluumaadka Ireland. Haddii aad ka yar tahay da'da 16 waxaa laguu tixgelinayaa inaad tahay ilmo markeey timaado helitaanka lambarka PPS.

Haddii aad ka yar tahay 16, waalidkaa, waalidka ku korsanaya ama qofka kaa masuulka ah waa inay kuu raacaan Xarunta Qoondaynta Lambarka PPS. Haddii aad ka weyn tahay 16 sano, waad tagi kartaa keligaa. Si aad u ogaato sida aad ballan u samaysan lahayd iyo waxa aad u baahan tahay inaad la timaado eeg bogga internetka ee Waaxda Ilaalinta Bulshada.

## Xaq ma u leeyahay in la iga ilaaliyo dayaca, waxyeelada iyo xadgudubka?

Haa Meel kasta oo aad ka timid, dhammaan carruurta iyo dhalinyarada Ireland waxay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo dhammaan noocyada xadgudubka, dayaca iyo waxyeelada.

Haddii aad dareento in lagu dayacay, lagu dhaawacay ama lagugu xad-gudbay, adiga ama qof weyn oo aad ku kalsoon tahay waa in ay la xidhiidhaan adeegaha bulshada ee Tusla ee xaafadaada. Si aad u ogaato faahfaahinta xiriirka ka eeg bogga Tusla.

Haddii aad u baahan tahay caawimo xaalad degdeg ah ama saacadaha shaqada ka baxsan, la xidhiidh xarunta Booliska ee kuugu dhow ama wac khadka telefoonka degdegga ah, labadan lambar midkood 999 ama 112.

Haddii aad ka welwelsan tahay naftaada ama saaxiib, waxaad la hadli kartaa Khadka carruurta. Kani waa adeeg sir ah oo bilaash ah oo loogu talagalay carruurta. Waxaad la xiriiri kartaa khadka Childline:

- ka wac 1800 66 66 66
- adigoo fariin ahaan ugu diraya 'Talk' 50101.


Eeg Cutubka 10 : Halkee ayaan caawimo karaa? ee hagahan loogu talagalay ururada kale ee taageerada.

# 6.2 Ilmo waalidkood ka maqan

## Maxaa igu dhici doona haddii aan keligay imaado Ireland?

Haddii aad keligaa timaadid Ireland, ama adiga oo aanu qof wayn oo ka mas'uul ah daryeelkaaga kula socon, waxaa laguula dhaqmayaa sidii 'yaraan aan lala socon'. Waxa kale oo laga yaabaa in lagugu tilmaamo inaad tahay 'ilmo waalidkii aanu la socon'.

Tusla, Hay'adda Carruurta iyo Qoyska, ayaa eegi doonta xaaladdaada waxayna go'aamin doontaa waxa adiga kuu fiican. Haddii ay u maleynayaan inay guud ahaan kuu roon yihiin, Tusla waxaa laga yaabaa inay go'aansato inay kuu codsato Ilaalinta Caalamiga ah.



Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida Geedi-socodka Ilaalinta Caalamiga ah ugu shaqeeyo ilmo aan lala socon, waxaad ka arki kartaa hagaha macluumaadka bogga internetka ee Wasaaradda Cadaaladda.

## Yaa i ilaalin doona haddii aan ahay ilmo kala maqan?

Kooxda Carruurta Aan Waalidkood La Socon ee Tusla ayaa mas'uul ka ah daryeelka iyo xanaaneyta carruurta aan waalidkood la socon. Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg bogga Tusla.

Shaqaale bulsho ayaa kaala hadli doona baahiyahaaga ka dibna kuu samayn doona qorshe daryeel. Waxa laga yaabaa in shaqaaluhu kugu wareejiyo qoys ku xannaaneeya ama goob carruurta lagu hayo. Haddii kale, waxa laga yaabaa inay ku geeyaan 'hoy la taageeray' oo kuu diyaarin doona nolol madax-bannaan markaad 18 jir tahay.

## Halkee baan ka heli karaa macluumaad iyo taageero dheeraad ah?

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah iyo taageero ku saabsan xuquuqdaada sida ilmo aan lala socon ama ilmo bilaa waalid ah, waxaad la xiriiri kartaa khadka macluumaadka ee Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta 01-902 0494 ama help@childrensrights.ie.

# 6.3 Ilaalinta Caalamiga ah

## Waa maxay Ilaalinta Caalamiga ah?

Erayga Ilaalinta Caalamiga ah waxa loola jeedaa ilaalinta ay dawladi siiso qof ka soo cararay wadan kale si uu uga baxsado in la dhibaateeyo. Ilaalinta caalamiga ah waxa ka mid ah laba nooc oo laga codsan karo Ireland:

- heerka qaxootinimo
- ilaalin hoosaad .

**Xaalad Qaxooti** waa nooc ka mid ah ilaalinta sharciga ah oo ay Dawladdu siiso dadka ka baxsanaya cadaadis iyadoo lagu salaynayo:

- midabkooda
- diintooda
- dhalashada
- xubinnimada koox bulsho oo gaar ah
- aragtida siyaasadeed ee dalkooda. .

**Ilaalin hoosaad** waa nooc ka mid ah ilaalinta la siiyo dadka ka cararaya:

- jirdil
- xukun dil ah
- khatar weyn oo rabshado ah xilliyada dagaalka.

Haddii qof loo aqoonsado inuu yahay qaxooti ama uu xaq ugu leeyahay xaalad ilaalin hoosaad ah Ireland, waxay ku noolaan karaan Ireland waxayna ku raaxaysan karaan xuquuqo badan.

Magangalyo-doonku waa qof codsaday Ilaalinta Caalamiga ah.

Markaad codsanayso magangalyada caalamiga ah, waxaad waydiisanaysaa Wasiirka Cadaalada Iyo Sinaanta inuu eego inaad u qalanto iyo in kale:

- qaxoontinimo, ama
- xaalad ilaalin hoosaad.

Labadanba si isku mid ah ayaad u dalbanaysaa, laakiin haddii lagu siiyo sharci wuxu noqonayaa labada midkood.

# Sidee baan u codsadaa Ilaalinta Caalamiga ah?

Waxaa lagugu dari doonaa codsiga Magangalyada Caalamiga ah ee waalidkaa haddi:

- aad ka yar tahay da'da 18 oo aad la nooshahay waalidkaa, iyo
- aadan ahayn muwaadin Irish ah.

Waalidiintaadu waa inay u codsadaan magangalyada caalamiga ah sida ugu dhakhsaha badan. Waxay samayn karaan labadna midkood:

- inay ka codsadaan garoonka diyaaradaha ama dekedda aad Ireland ka soo gashay, ama
- ka dib markaad soo gasho Waddanka oo aad ka codsanayso Xafiiska Ilaalinta Caalamiga ah ee Dublin.

Waalidkaagu waa inuu ku soo kaxeeyaa marka ay codsanayaan Magangalyada Caalamiga ah.

Waxaad wax badan oo ku saabsan habka codsiga magangalyada ka heli kartaa bogga internetka ee Xafiiska Ilaalinta Caalamiga ah.

# Waa maxay xuquuqdeydu haddaan codsado magangalyada Caalami ah?

Haddii aad la joogto qoyskaaga, waxaad ku heli doontaa hoy iyo cunto hab loo yaqaan Bixinta Tooska ah. Qoyskaagu sidoo kale waxay heli doonaan kaarka caafimaadka si aad awood ugu yeelatid inaad hesho daryeel caafimaad oo bilaash ah. Hay'adda Soo dhawaynta iyo Isdhexgalka (RIA) ayaa maamusha nidaamka hoyga bixinta tooska ah iyadaana go'aan ka gaareysa meesha aad ku noolaan doonto. RIA waxa kale oo laga yaabaa inay adiga iyo qoyskaaga idiin wareejiso xarun kale oo hoy ah inta aad ku jirto nidaamka Bixinta Tooska ah.

Inta lagu jiro Bixinta Tooska ah, waalidkaa ama waalidiintaadu waxa ay heli doonaan lacag-bixin todobaadle ah oo ah €38.80 midkiiba iyo €29.80 midkiiba oo ay ku heli doonaan adiga iyo wixii walaalo ah ee aad leedahay. Waxa kale oo aad heli kartaa lacag loogu talgalay dhar, badana laba jeer sannadkii, laakiin xaq toos ah uma lihid tan. Waalidkaagu ma heli karaan Lacagta Dheefta ilmaha ama lacagaha kale ee daryeelka bulshada. Waxa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan qaar ka mid ah lacag-bixinnada haddii ay shaqaynayaan oo ay buuxiyaan shuruudaha.

Waxaad aadi kartaa dugsiga hoose iyo dugsiga hoose ka dib si la mid ah sida ilmo muwaadin Irishka ah.

Waxa aad xaq u leedahay in aad wakiil sharci ka hesho Adeegga Sharciga ee Qaxootiga (RLS), qayb ka mid ah Guddida Kaalmada Sharciga. Adeegyadani waxay ku salaysan yihiin Dublin, Cork iyo Galway.

Golaha Qaxootiga ee Irishka sidoo kale waxay bixiyaan adeegyo sharci ka eeg shabakadooda.

## Xaq ma u leeyahay inaan shaqeeyo haddii aan raadinayo magangelyo caalami ah?

Haddii aad sugayso go'aanka codsigaga ugu horreeya ee magangalyada caalamiga ah in ka badan sagaal bilood, waxaad codsan kartaa ogolaansho si aad u gasho suuqa shaqada.

Adigoo ka yar da'da 18 ayaad sidoo kale codsan kartaa ogolaansho shaqo. Haddii ogolaanshahaaga lagu siiyo waxaad yeelan doontaa xaddidaad la mid ah saacadaha iyo xuquuqda mushaharka ugu yar ee ay leeyihiin dhalinyarada kale.

Waxaad macluumaad dheeraad ah oo arrintan ku saabsan ka heli kartaa websaydka INIS.

## Maxaa dhacaya haddii codsigayga magangalyada caalamiga ah la diido?

Haddii codsigaga Magangalyada Caalamiga ah la diido, adiga, ama waalidkaa oo adiga ku matalaya, waxa aad racfaan ka qaadan kartaan diidmada heerka qaxoontinimo ama ilaalinta kabista Maxkamada Rafcaanka Caalamiga ah. Marka laguu soo diro go'aanka Codsigaaga Magangalyada Caalamiga ah, waxaa lagu siin doonaa koobiga foomka racfaanka ee aad u baahan tahay inaad buuxiso.

Haddii qoyskaagu uusan lahayn wakiil sharci waxaad la xiriiri kartaa Guddiga Kaalmada Sharciga.

## Ma codsan karaa ogolaansho kale haddii codsigayga magangalyada caalamiga ah la diido?

Haddii aadan xaq u lahayn qaxootinimo ama ilaalin hoosaad, Wasiirka Caddaaladda iyo Sinnaanta ayaa tixgelin doona haddii ay jiraan sababo ay tahay in lagu siiyo oggolaansho aad ku joogto Waddanka ('ka tag inaad joogtid').

## Rafcaan ma ka qaadan karaa haddii la ii diido in aan sii joogo?

Haddii codsigaaga joogitaanka la diido, rafcaan kama qaadan kartid waxaana lagugu samayn doonaa amar masaafurin ah. Tani waxay kaaga baahan doontaa inaad ka baxdo Dalka, haddii aadan yeelin, Dowladdu waxat isku dayi kartaa inuu ku saaro ama ku masaafuriyo. Haddii adiga ama waalidkaa ama qofka kaa masuulka ah la idinkula taliyo in khalad sharci ah lagu sameeyay gaarista go'aankan, waxaad weli waydiisan kartaa Maxkamadda Sare inay ka hortagto tani inay dhacdo, iyo inay ku amarto inay markale baaraan go'aanka.


## Haddii aan haysto Ilaalinta Caalamiga ah qoyskayga oo ku nool meel ka baxsan Ireland halkan ma iigu iman karaan?

Tani waxay ku xirantahay sababta aad ugu nooshahay Ireland iyo inaad wax xuquuq ah ku leedahay ama aadan ku lahayn shuruucda Midowga Yurub ama Ayrishka.

Haddii aad tahay muwaadin Irish ah ama muwaadin Midowga Yurub, xubnaha qoyskaagu waxay xaq u yeelan karaan inay kugula noolaadaan Ireland.

Waxaad leedahay xoogaa xuquuq ah haddii aad ka yar tahay 18 sano oo lagu siiyay Ilaalinta Caalamiga ah. Ilaalinta Caalamiga ah xaaladahan, waxay ka dhigan tahay inaad codsan karto waxa loo yaqaan isukeenida qoyska - ogolaanshaha xubnaha qoyskaaga inay kugu soo biiraan Ireland. Xubnaha qoyska markan waxa looga jeedaa, waalidkaaga, wiilasha iyo gabdhaha walaalahaa ah kuwaas oo ka yar da'da 18.

Waxaad haysataa 12 bilood oo aad ku codsato Midaynta Qoyska. Wakhtigani waxa uu bilaabmayaa marka aad hesho warqadaada xaqiijinaysa in aad leedahay Ilaalinta Caalamiga ah. Haddii aad tahay qaxooti dib loo dejiyay, waxaad haysataa 12 bilood laga bilaabo taariikhda aad Ireland timid si aad u codsato Dibu-midaynta Qoyska.



# 6.4 Qaxootiga ama sharciga ilaalinta hoosaadka

Haddii adiga ama qoyskaaga codsigooda magangalyada caalamiga ah uu guuleysto, waxaa lagu siin doonaa sharci qaxootinimo ama sharci ilaalin hoosaad. Tani waxay ka dhigan tahay inaad joogi karto Ireland oo aad leedahay xuquuq dheeraad ah. Labada nooc ee sharciyada way isku xuquuqo dhow yihiin oo kala duwanaansho yar baa u dhexeeya.

## Waa maxay xuquuqdayda ka qaxooti ahaan?

Qaxooti ahaan, waxaad Ireland ku yeelan doontaa xuquuq la mid ah tan muwaadin Irishka ah. Tani waxay ka dhigan tahay inaad xaq u leedahay inaad:

- shaqo raadsato
- shaqo aad hesho
- waxbarasho hesho
- tababar hesho
- daryeel caafimaad hesho
- ilaalinta bulshada iyo adeegyo aad hesho

Qaxooti ahaan, waxaad xaq u leedahay in lagu siiyo dukumeenti socdaal oo Irish ah, inaad ka baxdo Ireland oo aad dib u soo gasho dalka. Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inaad waayi karto sharcigaga qaxootinimo haddii aad ku laabato waddankii aad ka soo carartay, waxaana laga yaabaa inaad u baahato fiisooyin aad ku gasho dalalka kale. Waxaad ku codsan kartaa jinsiyadda dhalashada seddex sano ka dib. Wakhtiga aad ku bixisay sugitaanka go'aanka laguma darayo wakhtigan.

## Waa maxay xuquuqdeydu haddii aan haysto sharciga ilaalin hoosaadka?

Haddii adiga ama qoyskaaga codsigii ilaalin hoosaadka ku guulaysataan, waxaad yeelan doontaa xaq iyo xuquuq la mid ah kan qaxootiga laakiin waxaa jira farqi yaryar oo uu kaga duwan yihiin. Gaar ahaan, waxaa laga yaabaa inay kugu adkaato inaad hesho dukumeenti socdaal waana inaad sugtaa shan sano halkii aad ka ahaan lahayd saddex ka hor intaadan codsan jinsiyadda.

# Xuquuqdayda la macaamilka sharciga dambiyada iyo Gardaí (Booliiska Ireland)





## Cutubka 7



# 7.1 Dhibbanaha fal-dambiyeed

## Waa kuma dhibane?

Dhibbanaha dembigu waa qof uu soo gaadhay dhaawac jidheed, maskaxeed ama shucuureed ama khasaarey dhaqaale oo si toos ah ugu dhashay fal-dambiyeed. Xubnaha qoyska sidoo kale waxay noqonayaan dhibanayaal haddii qof qoyskooda dhow ah ay dhimashadiisa fal-dambiyeed darteed uu u dhintay.

## Yaan la xiriiri karaa si aan u helo taageero?

Haddii laguu geystay dembi waxaad la xidhiidhi kartaa Khadka Caawinta Dhibanayaasha Dembiyada:

- digo wacaya 116006
- qoraal u qor 085 133 7711.

Waxay ku siin karaan macluumaad iyo taageero.

## Waa maxay xuquuqda aan leeyahay haddii la ii geystay dembi?

Haddii aad tahay dhibane dembi waxaad xaq u leedahay inaad hesho macluumaad aad fahmi karto. Haddii aad u baahan tahay caawimo, sida turjumaan oo kale, waa in lagu siiyo tan.

Waa inaad sidoo kale dembigaas ugu gudbisaa Gardaí (Booliiska Irishka) 999 ama 112. Markaad dembiga u sheegto Booliska waxaad xaq u leedahay inaad hesho qoraal si rasmi ah u qiraya waxaad soo gudbisay. Badanaa waxaad xaq u leedahay koobiga hadal kasta oo aad u jeediso Booliska.

Waxa aad xaq u leedahay in Garda Síochána (ciidamada booliiska) kuu sheegaan wixii ku saabsan adeegyada taageerada dhibbanaha, oo ay ku jiraan adeegyada takhasuska leh, kuwaas oo laga yaabo in ay ku caawiyaan. Haddii aad rabto, Boolisku sidoo kale wuu kuu sii gudbin karaa adeegyadan.

Caadiyan, waxa kale oo aad xaq u leedahay in ay ku weheliyaan qof aad doorатay iyo qareenkaaga, haddii aad rabto, mar kasta oo aad:

- u tagaysid Booliska markii ugu horeysay si aad ugu sheegto dembiga
- Booliska uga dacwoonayso in dembi lagaa galay.

Haddii sabab kasta ha ahaatee waalidkaa ama qofka kaa masuulka ahi aanu kuu raaci karin, 'qof ku habboon' sida qof kale oo weeyn oo ku habboon, ayaa laga dalban karaa inuu yimaado beddelkooda.

Qof da'diisu ka yar tahay 18 jir ahaan, waxaa si otomaatig ah laguu aqoonsan yahay inaad tahay qof u baahan ilaalin khaas ah maadaama aad tahay dhibane dambi. Tan waxa ka mid ah in waraysi kasta uu qaado qof leh tababar khaas ah.

Wareysigaaga waxaa laga yaabaa in lagu duubo DVD, duubistaasna waxaa laga yaabaa in laga daaro maxkamadda.

Boolisku waa inuu tixgeliyaa danahaaga ugu fiican iyo aragtidaada marka ay fulinayaan qiimeynta tallaabooyinka ilaalinta gaarka ah ee aad u baahan tahay.

Waxay ku xiran tahay Booliska iyo Agaasimaha Xeer Ilaalinta (DPP) inay go'aan ka gaaraan in dembi la baaro iyo in kale oo la keeno maxkamadda. Haddii go'aan laga gaaro inaan dacwad lagu oogin, waxaad xaq u leedahay inaad dalbato in laguu soo koobo sababah go'aankan.

## Ma inaan maxkamadda ka sheegaa waxa igu dhacay?

Ka dhibbanaha dembiga ahaan, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad maxkamadda hortimaado si aad markhaati uga noqoto dembiga haddii eedaysanuhu aanu qiran dembiga.

Haddii aad ka yar tahay da'da 18 waxaa si toos ah loo tixgelinaayaa inaad u baahan tahay ilaalin gaar ah. Ilaaladan gaarka ah waxaa ka mid ah xaqa aad u leedahay inaad iska ilaaliso la xidhiidhka dembiilaha. Tani waxay noqon kartaa inaad ka soo markhaati furto:

- adoo qol kale jooga, iyadoo la adeegsanayo isku xirka muuqaal
- muraayad gadaasheed.

Waxa kale oo ay la macno noqon kartaa in aanu wax ku waydiin eedaysanaha laftiisu. Sidoo kale qareenka eedaysanaha wax su'aalo ah kaama waydiin karo noloshaada khaaska ah ee aan la xiriirin dambiga.

Ugu dambeyntii, waxay macnaheedu noqon kartaa in maxkamaddu ay ka xiran tahay dadweynaha. Taas macneheedu waxa weeye wariyayaasha warbaahinta waa in aanay soo gudbin wax kasta oo keeni kara in ilmaha la aqoonsado.

Dhibbanuhu wuxuu kaloo diyaarin karaa Bayaanka Saamaynta Dhibanaha. Haddii eedaysanaha lagu helo dembiga, marka la gaaro xilliga xukunka la ridayo caddayntan garsooraha ama dhibbanaha laftiisa ayaa maxkamadda ka hor akhrin kara.

# 7.2 Ka faa'iidaysiga

## Waa maxay ka ganacsiga?

Ka-ganacsiga bini'aadamku waa ka kaxeeynta dadka ee meel iyado la geeynayo meel kale si loo isticmaalo oo looga faa'iidaysto. Dhibbanayaasha waxaa lagu tahriibiyaa noocyo kala duwan oo shaqo ah, oo ay ku jiraan shaqada beeraha ama shaqada guriga ama waxaa laga yaabaa in lagu qasbo dhilleysi.

Marka carruurta laga hadlayo, weli waa ka ganacsiga xitaa haddii aysan jirin rabshad, khiyaano ama hanjabaad.

## Halkee ayaan caawimo ka heli karaa?

Haddii adiga ama qof aad garanayso laga faa'iidaystay, waxaad la xidhiidhi kartaa Booliska xaafaddaada. Haddii aad rabto inaad si qarsoodi ah u soo sheegto, waxaad kala xiriiri kartaa Dembi Joojiyayaasha (Crime Stoppers) 1825 0022. Waxaad sidoo kale u soo diri kartaa iimayl, si qarsoodi ah oo sirteeda aad loo adkeeyay, blueblindfold@garda.ie.

Macluumaadka ku saabsan taageerada iyo adeegyada waxaad ka heli kartaa websaydka ka hortagga ka gancsiga aadamiga ee heer qaran www.blueblindfold.gov.ie

## Maxaan sameeyaa haddii la igu qasbo inaan dembi galo?



Haddii qof aad taqaano uu kugu qasbo inaad samayso fal sharci darro ah sida qaadashada daroogada, waa inaad waxa kugu dhacaya kala hadashaa qof weyn oo aad ku kalsoon tahay. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Booliska xaafadaada. Haddii aad rabto inaad si qarsoodi ah u soo sheegto, waxaad kala xiriiri kartaa Dembi Joojiyayaasha (Crime Stoppers) 1825 0022.

# 7.3 Markhaati danbi

## Miyaan u sheegaa Booliska haddii aan arkay dembi dhacay?

Waa inaad dhammaan dambiyada u soo sheegtaa Booliska. Dembiyada halista ah qaarkood, sida dembi galmo ka dhan ah ilmo kale ama qof weyn oo nugul, waa dembi aadan Booliska uu sheegi karayn waxa dhacay.

## Miyaan aadi doonaa maxkamad haddii aan markhaati ka ahay dembi?

Waxaa laga yaabaa inaad aaddo. Waxay kuxirantahay waxaad aragtay ama maqashay iyo in Dowladdu rabto inaad markhaati ka noqoto kiiska. Haddii lagu weydiiyo inaad maxkamadda u sheegto waxaad aragtay, waxaad iska ilaalin kartaa inaad isla qol ku wada jirtid eedaysanaha. Waxa laga yaabaa inaad caddayntaada ku bixiso xilliga maxkamadaynta:

- muraayad gadaasheed, ama
- adigoo markhaatiga ka soo dhex gudbinaya muuqaal xiriirsan adigoo qol kale oo maxkamadda ka tirsan.

## Dembiilayaasha la soo eedeeyay ma ogaan doonaan inaan aniga ahay kan soo sheegay?

Dembiilayaasha la soo eedeeyay looma sheegi doono cidda soo sheegtay dembiga. Si kastaba ha noqotee, haddii qof dhalinyaro ah uu qoraal rasmi ah oo cabasho ah u gudbiyo Booliska oo Agaasimaha Xeer Ilaalinta uu go'aansado in kiiska la geeyo maxkamadda, bayaankaas waxaa lala wadaagi doonaa eedaysanaha ka hor inta aan maxkamad la soo taagin. Qof kasta oo lagu soo oogay dambi wuxuu xaq u leeyahay inuu dhageysto cadeymaha lagu soo oogayo, markaasay way awoodi doonaan inay maqlaan oo arkaan waxaad ka dhahayso maxkamadda.

## Ma jirtaa taageero aan heli karo haddii aan markhaati u ahay dembi?

Haa, waxaa jira tiro taageerooyin ah oo aad diyaar u tahay sida:

- Adeegga Taageerada Maxkamadda, wac 01-872 6785 ama 087 288 552 ama websaydka
- Khadka carruurta, wac 1800 66 66 66
- Khadka Caawinta Dhibanayaasha Dembiyada, Taleefanka bilaashka ah 116006, qoraal u dir 085 1337711.

# 7.4 Qofka laga shakisan yahay ama lagu eedeeyay dembi

## Waa imisa da'da mas'uuliyadda dembigelista?

Ireland da'da mas'uuliyadda dembigu waa 12 jir. Taas macnaheedu waa in carruurta aan gaarin da'da 12 sano laguma soo oogi karo wax dambi ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira wax ka reeban sharcigaas oo carruurta da'doodu tahay 10 ama 11 waxa lagu soo oogi karaa dil, dil kama ah, kufsi ama xadgudub galmo oo daran.

Haddii aad ka yar tahay da'da 12 oo ay Boolisku ay haystaan sababo macquul ah oo ay ku rumaystaan inaad dembi gashay waa inay kuu geeyaan waalidkaa ama qofka kaa masuulka ah.

## Ma la i baari karaa amar la'aan ama ogolaansho la'aan?

Haddii Boolisku haysto sabab macquul ah oo ay ku aaminaan inaad dambi geysatay, way ku baari karaan idam la'aan. Tani waxay khusaysaa qof kasta oo ka yar da'da 18.

Boolisku uma baahna ogolaanshaha waalidkaa ama qofka kaa masuulka ah. Boolisku waa inay kuu sheegaan sababta laguu baarayo.

Boolisku inta badan wuxu u baahan yahay waaran baaritaan si uu u baaro guri ama dhisme kale. Maxkamad, ama mararka qaarkood sargaal sare oo Boolis ah, ayaa soo saari kara waaranka baaritaanka. Haddii baaritaanku la xiriiro wax ka badan in jeebkaaga la baaro waa inuu baaritaanka sameeyo qof aad isku jinsi tihiin.



## Boolisku ma baadhi karaa baabuurkayga?

Boolisku wuu baari kara gaarigaaga haddii ay qabaan sabab wanaagsan oo ugu maleynayaan inaad:

- gashay ama aad ku dhowdahay inaad gasho dembi hoos yimaada Dembiyada ka dhanka ah Sharciga Dawladda, sida dil ama dembi kale oo gaar ah, ama
- haysato daroogo la kontoroolo sida xashiishad ama heroin ama kuwa kale ee lagu sheegay Xeerka Si Xun U Isticmaalka Maandooriyayaasha.

Boolisku waxa kale oo uu gaadhigaga ku baadhi karaa awoodo kale oo kala duwan.

## Goorma ayuu Boolisku soo geli karaa gurigayga?

Guud ahaan, Boolisku ma soo geli karaan gurigaaga ogolaanshahaaga la'aanteed. Si kastaba ha ahaatee, waxa jira waxyaabo ka reeban qodobkan. Midda ugu badan waa haddii Boolisku uu haysto amar baaritaan oo sax ah ama uu baacsanayo tuhmane.

## Boolisku ma u baahan yahay warqad maxkamadeed si uu gurigayga u baadho?

Boolisku wuxu u baahan yahay waaran si u sameeyo gelitaanada iyo baaritaanada intooda badan, laakin marwalba sidaas maaha. Tusaale ahaan, Boolisku waxay soo geli karaan gurigaaga haddii ay aaminsan yihiin in qof dembi ku sameynayo gudaha guriga.

## Ilaalada dukaanka ama dadka kale ma loo ogolyahay inay i baaraan?

Ilaalada iyo dadka kale wax awood ah uma laha inay ku baaraan fasax la'aan. Waxa laga yaabaa inay kaliya kaa hor istaagaan rabitaannadaada haddii ay aamminsan yihiin inaad dembi gashay oo aad isku dayayeeyso inaad ka baxsato inay Boolisku ku xiraan. Haddii waardiye ama qof kale uu ku xiro, waa inay sida ugu dhaqsaha badan kuugu soo wareejiyaan Booliska. Boolisku wuu ku raadi karaa haddii loo baahdo.

## Boolisku ma i xiri karaan haddii aan ka yarahay 18 jir?

Awoodda Boolisku waa isku mid haddii ay la macaamilayaan ilmo, qof yar ama qof weyn. Laakin, haddii aad ka yar tahay 18, Boolisku waa inay tixgeliyaan da'daada iyo heerka qaangaadhnimadaada.

## Boolisku ma u sheegi doonaa waalidkay haddii la i xidhayoo oo la i geynayo saldhigga Booliska?

Sarkaalka Booliska ee ka masuulka ah saldhiga Booliska waa inuu u sheego waalidiintaa ama cidda kaa masuulka ah inaad xirantahay, sababta aad u xiran tahay iyo inaad xaq u leedahay inaad qareen hesho. Sarkaalkan boolisku waa inuu waalikaa ka dalbado inay si dhaqso ah u yimaadaan saldhiga sida ugu dhakhsaha badan.

## Boolisku ma i suaali karaan kaligeey?

Maya, waxaad xaq u leedahay in looyar kula joogo xilliga su'aalaha. Waxa laga yaabaa inaad awoodo inaad hesho la-talin sharci oo bilaash ah oo hoos timaada nidaamka La-talinta Sharciga ee Saldhigga Booliska, wixii dheeraad ah ka eeg Website-ka Guddiga Kaalmada Sharciga. Haddii kale, adiga ama waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah waa inay lacag ku bixiyaan looyar kula joogo xilliga su'aalaha.

Intaa waxaa dheer, haddii aad ka yar tahay da'da 18, Booliska looma oggola inay ku sua'alaan ama kaa dalbadaan inaad samayso caddayn qoran iyada oo aan waalidkaa ama mas'uulkaagu joogin, marka laga reebo haddii:

- ay la xiriiri kari waayaan waalidkaa ama qofkii kaa masuulka ahaa
- waalidkaaga ama mas'uulkaaga loo sheegay laakiin uusan ku iman saldhigga Booliska muddo macquul ah.
- Boolisku aaminsan yihiin in dad ama hanti ay halis ugu jiraan waxyeello haddii aad su'aalaha la daahdo.

Boolisku wuu u diidi karaa waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah inay wareysiga ka soo qaybgelaan. Waxay tan samayn karaan haddii ay aamminsan yihiin in waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah ay ku lug lahayd dembiga laga shakisan yahay ama in joogitaankoodu uu sababi karo carqaladayn caddaaladded. Tani waxay dhici kartaa, tusaale ahaan, haddii Boolisku u maleeyay in waalidkaa laga yaabo inuu farageliyo habka waraysiga.

Si kastaba ha ahaatee, haddii Boolisku ay rabaan inay su'aalo ku weydiiyaan iyada oo aan hal waalid ama cid kaa masuul ah aanay joogin, waa inay isku dayaan inay kuu diyaariyaan waalidkaaga kale, qaraabo kale ama qof kale oo weyn oo mas'uul ah inuu goobjoog ka ahaado waraysiga.

## Saldhiga Booliska halkee baa la igaga hayn doonaa?

Sarkaalka booliska ka masuulka ka ah saldhiga Booliska waa in uu xaqiijiyaa in aan lagula xidhin dadka waaweyn ilaa aysan jirin hoy kale oo sugan mooyaane.

## Xaq ma u leeyahay inaan ogaado sababta la ii xidhay?

Haa Waxaad xaq u leedahay in lagugu sheego af cad, oo si sahlan loo fahmi karo inaad xidhantahay iyo sababta.

## Xagee baan ka heli karaa xuquuqdayda markaan la macaamilayo Booliska?

Fiiri qaybta 'Ilmaha iyo Qofka Yar' ee hagaha Ogoow Xuquuqdaada ee Golaha Irishka ee Xoriyadda Madaniga ee caddaaladda dembiyada iyo awoodaha Booliska. Waxaad tan ka heli kartaa Websaydkar Know You Rights.

Hagaha ayaa kuu sheegi doona wax ku saabsan xuquuqdaada marka aad la macaamilayso Booliska, iyo sidoo kale:

- awoodaha raadinta ee Booliska
- awooda xiritaanka ee Booliska
- awoodaha nidaamka dadwaynaha ee Booliska

# 7.5 Barnaamijka weecinta

## Waa maxay Barnaamijka Weecintu?

Ilmaha lagu tuhunsan yahay inuu sharciga jebiyey waxa guud ahaan Boolisku u gudbiyaan Barnaamijka Weecinta. Haddii aad aqbasho mas'uuliyadda jabinta sharciga waxaa laguu tixgelin doonaa Barnaamijka. Waxa laga soo reebay marka Boolisku aaminsan yahay in aanay danta bulshadu ku jirin in lagu wareejiyo barnaamijka weecinta.

Barnaamijku wuxuu ujeedkiisu yahay inuu ka weeciyo carruurta inay galaan dembiyo kale iyadoo la siinayo ilmaha digniin loo yaqaan 'taxaddir'. Waxaa laga yaabaa in lagugu daro barnaamijkan haddii aad:

- aqbasho mas'uuliyadda jabinta sharciga (sidoo kale loo yaqaan 'dembi qirasho')
- ogolaato in laguu digo
- da'daadu u dhaxayso 12 iyo 18.

Si kastaba ha ahaatee, tani waxay ku xiran tahay darnaanta dembiga ama diiwaankaaga hore ee dembiyeed.

Waxa kale oo laga yaabaa in uu ku kormeero Sarkaalka Xidhiidhka Carruurta (JLO). Waxaad xaq u leedahay inaad la hadasho waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah iyo looyarkaaga ka hor inta aanad go'aankan gaadhin.

## Sidee buu u shaqeeyaa barnaamijka weecinta?

Barnaamijka weecinta waxa uu higsanayaa in uu ka ilaaliyo ilmo kasta oo dambi galay in uu maro nidaamka cadaalada dambiyada ee buuxa - wuxu siiyaa fursad labaad.

Waxaa jiri doona kulan lagu gorfeynayo laguna muujinayo halista uu leeyahay dembigaagu iyo saameynta uu ku leeyahay dhibbanaha ama dhibanayaasha kaas oo ay ka soo qaybgalayaan:

- adiga
- waalidkaaga ama mas'uulkaaga
- Sarkaalkaaga Xidhiidhka Carruurta (JLO)
- laga yaabee xubin kale oo Booliska ah.
- dhibanaha

Si laguugu daro barnaamijka weecinta iyadoo ay suurtogal tahay inaad digniin hesho, waa inaad aqbashaa mas'uuliyadda dembiga oo aad ogolaato inaad la shaqeyso sarkaalka caruuraha dembiga gala (JLO) ee laguu asteeyay.

Waa inaad qaaddaa tallaabooyin aad ku hubinayso inaadan mar kale samayn wax sharciga ka soo horjeeda. Waxa laga yaabaa in lagaaga baahdo inaad dugsiga joogto ama aad soo raaligeliso dhibbanaha. Waxa kale oo laga yaabaa in u sarkaalka JLO dusha kaala socdo muddo ilaa 12 bilood ah.

## Waa maxay Mashaariicda Weecinta Dhalinyarada ee Boolisku (GYDPs)?

Barnaamijka Weecinta waxa taageera shabakadda Mashaariicda Weecinta Dhalinyarada ee Booliska (GYDPs). GYDPs waa mashaariic bulsheed oo taageera horumarka dhalinyarada kuwaas oo doonaya in ay ka weeciyaan dhalinyarada inay ku lug yeeshaan (ama ku sii lug yeeshaan) dhaqamada bulshada ka soo horjeeda ama dembiyada. Hadda waxa jira 106 GYDP oo waddanka oo dhan ka jira iyo 10 mashruuc oo meelo gaar ah diiradda saaraya (tusaale ahaan taageera carruurta aadka u dhibta badan ama qoysaska.) Mashaariicda Weecinta waxaa maamula ururada sida Foróige and Youth Work Ireland.

Qof kasta oo dhallinyaro ah oo ku lug leh Mashruuca Weecinta Dhallinyarada e Booliska wuxuu maraa hab qiimayneed si loo ogaado baahiyahooda gaarka ah iyo meelaha ay ku wanaagsan yihiin. Tani waxay u oggolaanaysaa mashruuca inuu diyaariyo barnaamij hawleed gaar ah oo lagu daboolayo baahiyaha qofka da'da yar.

## Ma jiraa qof ogaan doona in aan barnaamijkaa ku jiro?

Maya, ku lug lahaanshahaaga barnaamijka Weecinta waa qarsoodi. Garsooraha ayaa loo sheegi doonaa ka mid ahaanshahaagii hore ee Barnaamijka Weecinta haddii maxkamadi dembi kugu hesho ka dib adiga oo soo maray Barnaamijka Weecinta.



# 7.6 Maxkamada horteeda ka eedaysane ahaan

## Waa maxay Maxkamadda Carruurta?

Haddii la go'aamiyo inaadan ku habboonayn Barnaamijka Weecinta, waxaa laga yaabaa inaad wajihi karto dacwad oo aad hortagto tagto maxkamad. Xaaladahan oo kale, waxaad aadi doontaa Maxkamadda Carruurta.

Maxkamaddan carruurtu waxay qaadaa kiisaska la xidhiidha carruurta iyo dhallinyarada da'doodu ka yar tahay 18 jir. Waxaa jira dhisme Maxkamada Carruurta ah oo ku yaalla Dublin. Meelaha Dublin ka baxsan, Maxkamadda Carruurta waxaa badanaa lagu qabtaa dhismaha Maxkamadda Degmada maalin ka duwan dhegeysiga maxkamadda ee dadka waaweyn.

Maxkamadda Carruurta waxay la tacaali kartaa inta badan kiisaska dembiyada ee ku lug leh dhalinyarada ka yar 18 iyo dadka da'da yar ee carruurta ahaa wakhtigii ay dembiga galeen.

Maxkamaddu ma qabato dembiyada culus sida dilka kama'a ah: Dembiyada culus waxaa laga soo gudbiyaa Maxkamadda Carruurta oo loo gudbiyaa Maxkamadda Dambiyada Dhexe.

Mararka qaarkood qofka dhalinyarada ah ee lagu soo oogay dambi culus wuxuu dooran karaa inuu hor tago Xaakinka Maxkamada Caruurta ama ay xukumaan guddida xeerbeegtida maxkamadaha dadka qaangaarka ah.

Waxaa laga yaabaa inaad haysato qareen aad kula kulantay xafiiskooda. Mararka qaarkood qareenkan ayaa kugu matali doona maxkamadda. Mararka qaarkood qareenku wuxuu garyaqaan kale amri doona inuu ku matalo halkii uu isagu ama iyadu ku meteli lahaayeen.

## Maxaan ka fili karaa Maxkamadda Carruurta?

Qolka maxkamaddu waa goob rasmi ah waxaana lagaa filayaa inaad u dhaqanto si rasmi ah. Ka dalbo looyarkaaga ama qareenkaaga ka hor dhegaysiga dacwadaada inuu kuu sharraxo:

- sida uu u eg yahay qolka maxkamaddu
- cidda ka soo qayb galaya dhagaysigaaga
- halka uu qof walba fadhiisan doono.

Haddii aadan fahmin waxa dhacaya inta lagu jiro dhageysiga, weydii looyarkaaga ama qareenkaaga inuu kuu sharaxo dhageysiga.

Haddii aad hor timaado Maxkamadda Carruurta, waa muhiim ah inaad sii wadato aadista dugsiga ama aad sii wadato waxbarashada ama tababarada oo aadan gelin wax dembi ah. Waxa laga yaabaa inuu garsooruhu arrintan kuu tixgeliyo marka ay go'aan ka gaarayaan kiiskaaga oo ay eegayaan inaad isku dayday inaad hagaajiso dhaqankaaga iyo haddii kale.

## Waa maxay xuquuqda aan leeyahay haddii kiiskayga uu maxakamad tago?

Haddii aad gashay dambi khatar ah oo daran, waxaad aadi doontaa Maxkamada Wareegsan ama Maxkamada Dhexe ee Dambiyada.

Waxaad xaq u yeelan doontaa in waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah kula joogaan inta dhegaysigu socdo.

## Kiiskeyga ma loo dhegeysan doonaa si ka duwan kiis qof weyn?

Haa Maxkamadda Carruurta, dhegeysigaagu wuxuu ahaan doonaa waqti ka duwan, maalin ka duwan ama qol maxkamadeed oo ka duwan dhegeysiyada dadka waaweyn ee caadiga ah. Taasi waxay ka dhigan tahay inaadan la mid noqon doonin dadka waaweyn ee wajahaya eedeymaha dembiga.

Garsooruhu waa inuu sidoo kale u maamulaa maxkamadda qaab aad fahmi karto waxa dhacaya.

## Aqoonsigayga ma la shaacin doonaa?

Waxay kuxirantahay maxkamada aad tagto. Guud ahaan, haddii aad ka yar tahay 18, maxkamaddu waxay si qarsoodi ah ula fadhiisan doonta dadka ka soo qaybgelaya oo keliyada sida:

- haqaalaha maxkamadda
- looyaro
- qareennada
- waalidkaaga ama cidda kaa masuulka ah
- booliska.

Magacaagu waa inuusan ka soo muuqan warbaahinta ama onlaynka. Haddii qof u sheego aqoonsigaaga dadweynaha, wuxu ku muteysan karaa ganaax ama xarig.

Maxkamadda Carruurta dhexdeeda, magacyada waxaa loogu wacaa magacyada koobaad. Markaad sugayso in kiiskaaga la soo waco, waxaad la fadhiisan doontaa caruur kale iyo waalidkood ama mas'uuliyiintooda iyo looyarkooda. Waxaa laga yaabaa in kiiskaaga lagu soo sheego wargeyska laakiin magacaaga, ama sifooyin kale oo lagu aqoonsan karo, sida dugsigaaga, lama sheegi doono.

## Qareen (nooc garyaqaana) ma igu meteli doonaa maxkamadda?

Haa Nooca looyarku wuxuu ku xirnaan doonaa nooca eedeymaha lagugu soo oogay, iyo awooda qoyskaagu lacagtiisa ku bixin karaan. Haddii qoyskaagu aanu awoodin qareen, waxaad u qalmi kartaa gargaar sharci (qareen bilaash ah). Kahor inta aan laguu magacaabin qareen, Agaasimaha Dacwad Oogista waa in uu go'aamiyaa haddii aad u gudbi doonto Maxkamadda Carruurta ama Maxkamadda Dambiyada Dhexe si loogu qaado dacwad xeerbeegti ah.

Looyarkaaga ayaa kuu sheegi doona waxa ka dhici doona shirka iyo maxkamada dhexdeeda. Waa inaad had iyo jeer waydiisaa looyarkaaga haddii aadan hubin waxa ka dhacaya maxkamada ama waxa dhici doona maxkamadda ka dib.

## Maxaa dhici kara marka uu kiiskeyga yimaado maxkamada?

Saddex arrimood midkood ayaa dhici kara, garsooruhu waxa uu noqon karaa:

- inuu dhegeysto dacwadaada
- inuu kiiskaaga dib u dhigo
- 'kaa saaro eeddaada'.

### Kiiskaaga waa la dhegaystay

Hadii xaakimku go'aansado inuu dhagaysto dacwadaada, waxa laga yaabaa inay:

- joojin karaan go'aan ka gaarista eedda oo kuu diri karaan Adeegga Asluubta ee Dadka Da'da yar kulan loogu yeero shir qoyska, ama
- dalbo warbixinta xaaladaada tijaabada ah - tani waxay ka dhigan tahay in Sargaalka asluubta la waydiin doono inuu baadho kiiskaaga iyo xaaladahaaga shakhsi ahaaneed, ama
- dambi lagugu helo ama dambi lagugu xukumo.

### Garsooraha ayaa laga yaabaa inuu dib u dhigo kiiskaaga

Taas macnaheedu waxa weeye in kiiska dib loo dhigi doono oo la dhegaysan doono maalin kale.

Haddi ay taasi dhacdo, xaakimku waxa uu go'aansan karaa in lagugu hayo xabsiga. Tani waxay la macno tahay in laguu diro xarunta lagu hayo ilaa kiiskaaga la dhagaysto - tani waxay dhici doontaa oo kaliya haddii eedaymaha ay aad u daran yihiin ama haddii aad si joogto ah sharciga u jebiso. Tan waxaa loo yaqaanaa in lagu hayo 'rumaan'. Haddii rumaan ahaan lagugu hayo xarun xabsi, waxaad xaq u leedahay in si gaar ah laguugu hayo meel ka baxsan dhalinyarada kale ee la xukumay.

Ikhtiyaarka kale waa in garsooruhu dammiin kugu fasaxo. Tani waxay ka dhigan tahay in waalidkaa ama qofka kaa masuulka ah ay ku qasban yihiin inay lacag bixiyaan ama ay ballan qaadaan inay lacag ku bixinayaan si xabsiga looga ilaaliyo. Haddii garsooruhu kuu oggolaado dammaanad, waxay u badan tahay inay ku jiraan shuruudo adag sida:

- in bandow lagu saaro
- ka fogaanshaha dadka ama meelaha qaarkood
- in aadan khamriga cabbin
- in aadan maandooriye qaadan
- in aad aaddo dugsiga.

Haddii aad jebiso shuruudahan waxa lagugu hayn karaa xabsi. Haddii damaanad ay diido Maxkamadda Carruurta, codsiga dammaanadda Maxkamadda Sare waxa samayn kara looyarkaaga.

### Laalista dacwadaada

Garsooruhu wuxu go'aansan karaa inuu 'laalo' xukunkaaga. Tani waxay ka dhigan tahay in kiiskaaga halkaas lagu joojin dooono, laakiin mar kale ayaa dambi lagugu soo oogi karaa iyadoo ku xiran duruufaha jira.

## Maxaa dhacaya haddii garsooruhu ii soo diro shirka qoyska?

Shirka qoysku waa kulan u dhexeeya adiga, qoyskaaga iyo sargaalka asluubta. Kulankaan waxa aad kala shaqayn doontaa dadkan sidii aad u samayn lahayd qorshe aad raacayso halkii inta dambiga lagugu helo lagu xukumi lahaa. Ujeedada qorshuhu waa in lagaa joojiyo xumaanta.

# Maxaa dhacaya haddii dembi laygu helo oo la i xukumo?

Haddii lagugu helo dembi oo lagu xukumo, xaakinku wuxuu kugu xukumi doonaa xayiraad bulsho ama xadhig. Tani waxay ku xirnaan doontaa:

- dambiga aad gashay
- sida uu dambigu u daran yahay
- xaaladahaaga gaarka ah marka uu qiimeeyo sarkaalka asluubta.

Maxkamaddu waxay ku amraysaa in:

- aad bixiso ganaax
- aad hesho dammaanad tijaabo ah taas oo ku amraysa inaad u dhaqanto sida sharcigu kuu qeexay oo waxa sidoo kale la socon kara shuruudo sida inaad ku noolaato goob khaas ah ama aadan ka bixin goob cayiman.
- lagugu hayo xabsi (haddii dembigu uu aad u daran yahay).

Waqtiga iyo xabsi ku haynta waxa lagu sharaxay qaybaha soo socda.



# 7.7 Waqtiga tijaabada

## Waa maxay waqtiga tijaabadu?

Tijaabadu waa digniin rasmi ah oo uu garsooruhu ku siin karo halkii uu ku diri lahaa xabsiga. Maxkamaddu waxa ay ku amri kartaa in aad joojiso dhaqanka gafka ah waxana laga yaabaa in ay shuruudo gaar ah u dejiso habdhaqankaaga muddo cayiman waqti dheer oo cayiman ah. Waxaa laguu asteyn doonaa sarkaal asluubeed oo shaqadiisu tahay inuu hubiyo inaad raacdo shuruudaha amarka maxkamada. Shuruudaha waxaa ka mid noqon kara:

- sii wadida waxbarashada ama tababarka
- dhigashada koorso maandooriyaha ama khamriga ka hadalysa
- La shaqaynta ururka Le Cheile Mentoring.

## Maxaa dhacaya haddii aanan raacin shuruudahayga tijaabada?

Waxaa lagugu soo celin karaa maxkamada. Maxkamaddu waxay ku amri kartaa inaad u hoggaansanto shuruudaha ama waxay nasakhi kartaa amarka oo ku beddeli kartaa ciqaab bulsheed kale.

## Ma jiraa adeeg tijaabo oo gaar ah oo loogu talagalay dhalinyarada?

Adeegga Tijaabinta Dadka Da'da yar (YPP) waa qayb gaar ah oo ka tirsan Adeegga Asluubta kaas oo la shaqeeya dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 12 ilaa 18 ee hor yimaada maxkamadaha. YPP waxay u ololeysaa ciqaabaha ama xayiraadaha bulshada (sida amar ku faraya inaad bulshada u adeegto ama ganaax) iyo cadaaladda xaal-mastuurka ah iyo heshiisinta ah (tani waa halka dhibanayaasha lagu siiyo fursad ay kula kulmaan ama kula xidhiidhaan dembiilaha si ay ugu sharraxaan oo ugu bayaamiyaan sida dhabta ah ee dembigu u saameeyay) si loo yareeyo in dembigu dib u dhaco.

# 7.8 Xariga

## Xabsi ma la ii diri karaa?

Maya. Dhalinyarada da’doodu ka yar tahay 18 sano xabsiga looma diri karo. Si kastaba ha ahaatee, xaakimku waxa uu go’aamin karaa in qofka dhalinyarada ah laga saaro bulshada, laba midkood:

- inta garsooruhu go’aan ka gaarayo waxa la sameynayo, ama
- sababtoo ah garsooruhu ayaa go’aansaday in qofka dhalinyarada ah loo diro xabsiga.

Haddii xaakimku go’aansado in qof dhalinyaro ah laga saarayo bulshada, waxay u diraan qofka dhalinyarada ah xerada lagu hayo carruurta ee Oberstown ee Dublin. Xaruntu himiladeedu waa inay bixiso barnaamijyo waxbarasho iyo tababar habboon. Waxay bixisaa daryeel, waxbarasho iyo tababar, laakiin waa xarun xiran taas oo macnaheedu yahay inaadan xor u ahayn imaanshaheeda iyo ka bixitaankeeda. Inkastoo Xaruntu ay hiigsaneyso inay ilaaliso oo ay dhiirigeliso xiriirka qoyska, haddii aad xiran tahay, waxay taasi saameyn kartaa xiriirka aad bannaanka la yeelanayso.

## Maxaa dhici doona intaan joogo Obertown?

Ujeedkaa Oberstown waa in ay bixiso daryeel badbaado leh, sugan oo habboon si aad u daboosho baahiyahaaga caafimaad iyo waxbarasho. Oberstown waxay kaa caawin doontaa inaad wax ka qabato dhaqan-xumooyinkaaga oo ay kuu diyaariso sidaad dib ugu laaban lahayd qoysaskaaga iyo bulshadaada ka dib marka xabsiga lagaa sii daayo.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxa dhici doona ka fiiri Hagaha Macluumaadka Oberstownee dhalinyarada.

## Waa maxay xuquuqda aan leeyahay inta aan xiranahay?

Waxaad xaq u leedahay in laguu daryeelo caafimaadkaaga, badbaadadaada iyo daryeelkaaga. Waa in lagu siiyo waxbarasho. Waxaad dhigan kartaa maaddooyinka iyo imtixaannada dugsiga hoose iyo kuwa Shahaadada Dugsiga Sare ama cutubyada QQI (Tayada iyo Shahaadooyinka Ireland) Xiisaduhu waxay socdaan 45 daqiiqo midkiiba. Waxaad qaadan doontaa saddex ama afar xiisadood maalin kasta.

- Waa inaad heshaa daryeel habboon oo aad awoodid inaad ilaaliso oo aad horumariso xidhiidhka aad qoyskaaga la leedahay.
- Baahidaada shaqsi, dhaqan iyo luuqadeedba waa in la aqoonsadaa.
- Waa in laguula dhaqmaa si xushmad leh lagana ilaaliyo takoorka iyo waxyeelada, sida cagajuglaynta ama xoog-sheegashada.

Haddii aad u baahato daawayn aan si sax ah loogu bixin karin gudaha Xerada, Agaasimaha Xerada waa inuu kuu diyaariyaa in lagu dhigo cusbitaal. Dhammaan go'aamada waa in loogaa gaari sida waafaqsan dantaada, waxaadna xaq u leedahay in fikirkaaga la maqlo inta aad joogto Oberstown. Waxaad ka qayb qaadan kartaa shirar kala duwan oo ay ku jiraan shirarka ku saabsan daryeelkaaga iyo shirar unugeedyo.

## Ma ka caban karaa sida la iigula dhamay xarrunta haynta?

Haa, sida laguula dhaqmay waxaad uga dacwoon kartaa qofka laguu xilsaaray oo ah xubin ka mid ah shaqaalaha Obertown. Waxaad sidoo kale la hadli kartaa maamulka Oberstown.

- Nidaamka cabashooyinku waa inuu noqdaa mid cadaalad ah oo ay fududahay helitaankiisu.
- Waa in sidoo kale lagu siiyo macluumaad cad iyo taageero ku saabsan sida loo cabanayo.
- Qofka shaqaalaha ah ee laguu xilsaaray ayaa kuu sharraxi kara nidaamka cabashada.
- Waa inaad ka heshaa jawaab celin cabasho kasta oo aad sameyso.

Awoodsiinta Dadka Daryeelka ku jira (EPIC) waxay sidoo kale bixiyaan adeeg booqasho bille ah oo lagaaga caawinayo inaad fahamto xuquuqdaada. Haddii aad rabto inaad cabasho samayso intaad xiran tahay, EPIC ayaa kaa caawin doonta inaad sidaas samayso. Waxaad EPIC si toos ah ugala xiriiri kartaa lambarka (01) 872 7661.

Haddii aadan ku faraxsanayn jawaabta cabashadaada, waxaad racfaan u qaadan kartaa Agaasimaha Oberstown. Haddii aadan ku faraxsanayn natiijada (natiijada) racfaanka, waxaad u dacwoon kartaa Wakiilka Xuquuqda carruurta.

Waxaad sidoo kale u dacwoon kartaa Hay'adda Macluumaadka Caafimaadka iyo Tayada kuwaas oo sameeya kormeerada Obertown oo daabaca warbixinnada kormeerka. Ma daabici doonaan faahfaahinta cabashadaada, laakiin waxay saamayn kartaa kormeerkooda xiga.


Haddii aad rabto macluumaad ku saabsan sida loo maareeyo nidaamka cabashooyinka waxaad kala xidhiidhi kartaa khadka macluumaadka ee Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta ee 01-902 0494.

## Ma inaan dadka u sheegaa in dambi la igu helay?

Tani xaaladaha ayay ku xiran tahay. Haddii dembigaagu aanu culusayn, xogta dembiga waa laga saari karaa diiwaanada haddii aadan dembiga dib u gelin muddo saddex sannadood ah ka dib markaad 18 jir noqoto. Haddii tani dhacdo, waajib kuguma aha inaad qofna u sheegto dembiga. In lagugu daray Barnaamijka Weecinta waa la sheegi karaa haddii aad marayso Turxaanbixinta Booliska iyadoo xaaladaha jira ku xiran.

Xukunnada qaarkood lagama saari karo diiwaankaaga, tusaale ahaan haddii lagugu xukumay Maxkamadda Dhexe ee Dambiyada ama haddii dembigaagu hoos yimaado Xeerka Dembiilayaasha Galmada 2001. Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xidhiidh Khadka Macluumaadka Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta 01-902 0494.

Wadamo kala duwan ayaa laga yaabaa inay wali kaaga baahdaan inaad u sheegto dembiyada lagugu helay haddii aad raadinayso fiiso aad ku safarto ama aad rabto inaad u guurto halkaas. Waddamadan waxaa ku jira Maraykanka iyo Ustaraaliya. Xukunku wuxuu kaa hor istaagi karaa inaad hesho fiisaha ama laguu oggolaado inaad halkaas u guurto. Wixii macluumaad dheeraad ah oo arrintan ku saabsan waa in aad la xiriirto safaaradda dalka aad raadinayso inaad u safarto.



## Sideen ku heli karaa xukunada dembiyada ee aan xaqa u leeyahay in laga saaro diiwaankayga?

Xukunada dembiyada aad xaqa u leedahay in lagaa saaro waa in si toos ah looga saaraa diiwaankaaga. Haddii aad u malaynayso in xukunno ay ahayd in laga saaro diiwaankaaga ay weli diiwaanka kuugu jiraan, waa in aad la xidhiidho Xafiiska Turxaanbixinta Qaranka oo aad waydiiso iyaga.

# Cutubka 8

# Xuquuqdayda internetka





# Da'dee ayaan sifo sharci ah u heli karaa adeegyada onlaynka, sida ku biirista baraha bulshada ama isticmaali karaa baraha bulshada ama ku dheeli karaa boombalooyinka khadka ku xiriirsan ee lagu dheelo?

### Inta badan adeegyada, sida google, ma jiro sharci xaddidaday da'da aad ku heli karto.

Haddii warbaahinta baraha bulshadu isticmaasho xogtaada shakhsi ahaaneed waa inaad jirtaa 16 jir si aad isu diiwaan geliso adiga oo aan waalidkaagu ama qofka kaa masuulka ahi oggolaan. Warbaahinta baraha bulshada, waxaan ula jeednaa ablikayshanada sida Snapchat, YouTube, Instagram iyo TikTok. Agabka isku xidhan ee caruurtu ku cayaaraan, waxaan ula jeednaa alaabta lagu ciyaaro oo aad si toos ah ula falgeli karto ama adigoo u maraya ablikayshan.

## Waa maxay xogtayda gaarka ah?

Xogtaada khaaska ah waa macluumaadka adiga kula xidhiidha ee lagugu aqoonsan karo. Xogta shaqsiga ah waxaa ku jira magacaaga, cinwaankaaga, taariikhda dhalashada, macluumaadkaaga caafimaad, iimaylkaga gaarka ah, xogta goobtaada, cinwaanka IP-ga ee moobilka ama aaladaada (kani waa kood gaar ah oo lagu aqoonsan karo qalabkaaga kaas oo oggolaanaya inuu ku shaqeeyo internetka).

## Maxay shirkaduhu u rabaan macluumaadkayga gaarka ah?

Markaad iska diiwaan galiso adeega khadka tooska ah sida fariimaha ama ablikayshanka ciyaaraha ama aad ku xidho abka carruurtu ku dheesho, waa inaad marka hore siisaa adeega macluumaadka shakhsiyeed oo aad ogolaato shuruudaha adeega abka. Ablikayshanada, gaar ahaan kuwa isticmaalkoodu bilaashka yahay, badanaa waxay sameeyaan lacag iyagoo isticmaalaya macluumaadkaaga khaaska ah si ay kuugu keenaan xayaysiis ama si ay uga iibiyaan macluumaadkaaga shirkado kale si ay sidaas oo kale iyana xayaysiis kuugu soo diraan.



## Sidee baan u ilaalin karaa sirtayda iyo xogta shaqsiyeed ee onlaynka?

Waxaa jira dhowr tallaabo oo aad qaadi karto si aad u ilaaliso sirtaada onlaynka sida:

- inaad hubiso tillaabooyinka asturnaanta xogta ee abka aad isticmaalayso si aad u hubiso in barofaylkaagu aanu dadwaynaha u muuqan
- inaad baaswoodho adag u isticmaasho koontooyinka onlaynka
- inaad damiso qaybaha muujiya goobta aad joogto ee aaladaada iyo ablikayshanada aad isticmaalayso.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo SpunOut.ie.

## Sidee baan ku ilaalin karaa ammaanka naftayda marka onlaynka aan ku jiro?

Ilaalinta sirtaada onlaynka waa qayb muhiim ah marka laga hadlayo ilaalinta naftaada. Waxaa muhiim ah in la xasuusto in qof kastaa aanu ahayn cidda ay sheegaan inay yihiin markeey internetka ku jiraan oo aanad hubin karin aqoonsigooda. Uma baahnid inaad sameyso wax aadan ku qanacsanayn. Waad aamusiin kartaa, xannibi kartaa oo aad gudbin kartaa dadka tacaddiga sameynaya.

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa Webwise, Xarunta Wacyigelinta Badbaadada Internetka ee Irishka. Waxay haysaa qalab iyo tilmaamo ka caawinaya waalidiinta, macallimiinta iyo dhalinyarada badbaadada internetka. Waxa kale oo ay bixisaa macluumaadka ku saabsan ablikayshanada kala duwan, ciyaaraha iyo shabakadaha bulshada. CyberSafeKids waxay hayaan ilo faa'iido leh oo ku jira boggooda internetka oo ku saabsan isticmaalka internetka ee badqaba,

Khadka Internetka ee Irishku wuxuu u oggolaanayaa qof kasta inuu si qarsoodi ah uga warbixiyo waxyaabaha dhibka leh ama dhibaya ee ay kala kulmaan khadka. Waxa kale oo ay bixiyaan talo iyo macluumaad loogu talagalay waalidiinta, dadka ardayda masuulka ka ah iyo dadka dhalinyarada ah oo ku saabsan isticmaalka internetka.

## Sharcigu ma ii oggol yahay in aan sawiradayda oo galmo muujinaya onlayn ahaan u wadaago ama ku gudbiyo ablikayshan farriimaha la isku dhaafsado?

Haddii aad ka yar tahay 18 oo aad soo dirto sawir galmo ah waxaa loo tixgelinayaa ka faa'iidaysiga carruurta sida sharcigu qabo. Taas macneheedu waxa weeye in adiga iyo qofka aad wada xiriiraysaan aad ku jirtaan dhibaato aad u daran. Sababtoo ah haysashada iyo sii qaybinta sawirro galmo muujinaya ee qof yar oo ka yar da'da 18 waa sharci darro oo waxay dhalin kartaa dacwad dambiyeed.

Ciqaabaha waxaa ka mid noqon kara xarig ama xabsi, ganaax iyo in lagu geliyo diiwaanka dembiilayaasha jinsiga. Haddii aad aragto xaaladdan waxaad caawinaad ka raadsan kartaa shaqaale bulsho ama Booliska kaasoo laga yaabo inuu kaa caawiyo qabashada iyo haynta sawirka ama muuqaalka.

## Sharicigu ma ii ogol yahay inaan khadka ku wadaago sawiro galmo la xiriira ee qof kale oo ka yar 18 jir?

Maya. Sharci maaha in la wadaago sawiro galmo la xiriira ee qof kale oo ka yar da'da 18. Sharcigu waxa uu u arkaa soo dhigista ama faafinta sawirada kuwan oo kale ah inay yihiin qaybinta waxyaabaha xadgudubka galmada carruurta oo badanaa loo yaqaano muuqaalad anshax xumada carruurta.

Haysashada sawirada noocaan ah sidoo kale waa sharci darro, xitaa haddii aadan meel kale soo dhigin ama aadan tusin qofna.

## Maxaan sameeyaa haddii qof ka yar 18 uu ila wadaago sawirkooda oo galmo la xiriira?



Abuuritaanka, qaybinta ama xitaa haysashada muuqaal kasta oo qaawan oo khuseeya qof ka yar 18 waa fal dambiyeed suurtagal ah waana in lagu wargeliya Xarunta Booliska.

## Maxaan sameeyaa haddii aan khadka ku arko shay i dhibaya?

Inta badan mareegaha ayaa leh nidaam aad ku soo sheegi karto qoraal ama sawir aad u aragto inuu dhib leeyahay ama la karhayo. Haddii aad la kulanto shay ka sii daran oo aad uga shakisan tahay inuu sharci darro yahay sida waxyaabaha xadgudubka galmada ee carruurta, waxaad si qarsoodi ah ugu soo wargelin kartaa www.hotline.ie

Waa inaad sidoo kale kala hadashaa qof weyn oo aad ku kalsoon tahay waxaad aragtay oo aad kala hadasho sida aad ku dareentay.

## Haddii khadka la iigu dhex xoogsheegto maxaan sameeyaa yaanse uga dacwoon karaa?

Xoogsheegashadu waxay ka dhacdaa onlaynka iyo sidoo kale si toos ahba. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cagajuglaynta guud ahaan, ka eeg qaybta 2.8 ee warbixintan. Xoog u sheegashada internetka ama cagajuglaynta internetka waa sida xoogsheegashada ta tooska ah laakiin waxa la isu soo dhexmariyaa tignoolajiyada. Cagajuglayntu waxay noqon kartaa farriimo aadan rabin, muuqaalo, cod ama sawirro dhibaato leh, oo ku dhibaya.

## Haddii aad dareento in lagugu cagajugleeyo, waxa jira dhawr waxyaalood oo aad samayn karto.

### Qof weyn u sheeg

Haddii laguu cagajugleeyo, waa muhiim inaad u sheegto qof weyn oo aad ku kalsoonaan karto sida waalid, macalin ama lataliyaha hagitaanka.

Haddii qofna uusan kuu dhaweeyn, waxaad wici kartaa Khadka caruurta 1800 66 66 66 si aad ula hadasho qof ku taageera ama Khadka dhalinta 1800 833 634.

Haddii cagajuglaynta ay diirada saarto inaad tahay khaniis, lesbian, bisexual, waxaad la xidhiidhi kartaa urur taageera sida BeLonG To.

### Ha ka jawaabin

Ha ka jawaabin qoraalad, iimaylada cagajuglaynta ah ama qoraalada aflagaadada ah ee shabakadaha warbaahinta bulshada la soo dhigo. Ka jawaabistu inta badan xaaladda way uga sii dartaa.

### Hayso diiwaanka

Haddi ay suurtagal tahay, kaydso fariimaha xanafta leh ama ku dhibaya (ma aha inaad akhrido). Haddii ay yihiin fariimo qoraal ah, kaydi. Haddii ay jiraan qoraallo ama fariimo ah onlaynka la soo geliyay, ka qaad sawir shaashadda ama iimayl ugu dir qof weyn oo aad ku kalsoon tahay.

### U sheeg shirkadda leh moobilka aad wadato

Haddii cagajuglaynta ay ka dhacayso taleefanka gacanta, u sheeg shirkadda bixisa adeega teleefankaaga gacanta, beddel lambarkaaga teleefanka adiga oo qaadanaya simkaarka cusub macluumaadkaagana ka dhig mid gaar ah.

### Hubi qaybta asturnaanta xogtaada ee aaladda

Haddii qof uu internetka kugu xoogsheegto, waxaad isticmaali kartaa goobaha gaarka ah si aad u hubiso in qofka kuu xoogsheeganaya uusan arki karin macluumaadkaaga ama uusan kuu qori karin faallooyin.

### Saar faallooyinka waxyeellada leh

Haddii qof kuu reebo faallo ku dhibaysa, adiga laftaada ayaa iska saari kara ama la xiriir maamulayaasha goobta oo weydii inay isla markiiba saaraan.

### U sheeg Booliska

Haddii cagajuglaynta ay joogto tahay ama uu qof kugu sameeyo cunsurimo ama faallooyin galmo aan habboonayn khadka kuu soo dhexmariyo, waxaad tan u soo gudbin kartaa Booliska ama www.hotline.ie.

# Maxaa la sameeyaa haddii qof kuu sir sheegto

Haddii qof aad taqaano uu kuu sheego in loogu xoogsheegtay internetka, waa muhiim inaad u sheegto qof weyn ama qof aad ku kalsoon tahay si cagajuglaynta wax looga qabto. Waa inaad sidoo kale ku dhiirigelisaa inay la hadlaan qof weyn oo ay ku kalsoon yihiin.

## Maxaa la sameeyaa haddii sawirka ama muuqaalka ilmahayga lagu wadaago internetka?

Haddii sawirada ama fiidyowga ilmahaaga loo isticmaalay ujeedo aanad raali ka ahayn, waxaad la xidhiidhi kartaa qofka isticmaalay oo ka dalban kartaa inay ka saaraan.

Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa qofka leh xuquuqda daabacaadda sawirka (tusaale haddii aad ogolaatay in dugsigu sawir uga qaado ujeeddo gaar ah) oo ogaysiin kartaa in loo isticmaalay shay aanad fasax u siin. Cidda leh xuquuqda daabacaada ayaa markaa weydiisan kara goobta in ay sawirka saaraan.

Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa Guddida Ilaalinta Xogta si aad cabasho u samayso.

## Maxaan sameeyaa haddii sawirka galmada la xiriira ama muuqaalka ilmahayga lagu wadaago khadka?

Haddii ilmahaagu ka yar yahay da'da 18, sawir kasta oo galmo la xiriira oo iyaga ku lug leh waxa loo tixgelin karaa inuu yahay ku xadgudub galmo ilmo ka dhan ah ama filim anshax xumo carruur lagula kacay. Waa sharci darro in qof kastaa sii wadaago sawiradan ama haysto.

Waa inaad tan u sheegtaa Booliska oo aad sii haysato caddaymo kasta oo ku saabsan halka lagu wadaagay iyo cidda wadaagtay. Haddii aad garanayso cidda wadaagtay ama soo dhigtay sawirrada waxa laga yaabaa inay roon tahay inaad hubiso inay sawirrada la wadaageen cid kale iyo in kale.

# Xuquuqdayda helitaanka hoyga

Cutubka 9



## Maxaa taageero ah oo aan xaq u leeyahay haddii aan guri la'aan ahay qoyskayga la'aantiis?

Haddii aad tahay guri la'aan oo aadan waalid ama cid kaa masuul ah lahayn, ama haddii aad ku jirto dhibaato oo aad u baahan tahay daryeel degdeg ah, waxaad la xiriiri kartaa adeegaha bulshada ee degmada Tusla (www.tusla.ie).

Haddii ay tahay 5galabnimo ka dib ama Sabtida iyo Axadda oo xafiisku xiran yahay, la xidhiidh xarunta Booliska ee degaankaaga halkaas oo xubin ka tirsan Booliska uu kuula xidhiidhi doono shaqaale bulsho.

Adeegaha bulshadu wuxuu qiimayn doonaa baahiyahaaga oo isku dayi doona inuu kuu helo hoy ama daryeel. Shaqaaluhu wuxuu la xiriiri karaa qoyskaaga haddii ay ku habboon tahay in sidaas la sameeyo. Ama, shaqaalaha bulshadu waxa uu ku gelin karaa hoyga dadka bilaa hoyga ee degdeg ah.

Adeegyada dadka bilaa hoyga ah iyo xaaladaha degdega ah waxaa lagu bixiyaa Adeegga Wax ka qabadka Qalalaasaha ee Dublin, Kildare iyo Wicklow iyo iyada oo loo sii marayo goobta adeegga badbaadada degdegga ah ee dalka intiisa kale.

Waxa kale oo jira tiro ururo ah, sida Focus Ireland, kuwaas oo la shaqeeya dadka dhallin-yarada ah ee hoy la'aanta noqda. Eeg boggaga Cutubka 10: Halkee ayaan caawimo ka heli karaa? Faahfaahinta xiriirka.

## Maxaa kaalmo ah oo la heli karaa haddii aan guri la'aan ahay anigoo qoyskayga la nool?



Inta lagu jiro saacadaha shaqada (sida caadiga ah 9 subaxnimo -5 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha) qoyskaagu waa inuu aado Maamulka Deegaanka oo leh mas'uuliyad guud ee guriyeynsiinta dadka waaweyn ee aan awoodin inay iskood u helaan guriga, iyo kuwa sida caadiga ah la nool. Waxay idinka caawin karaan hoyga iyagoo adeeg guriyayneed toos idiin siin kara (guryaynta bulshada) ama iyaga oo u maraya ururada guryaynta tabaruca ah ama hay'adaha kale ee tabarucaadka bixiya. Xilliyada xaaladaha dhibaatooyinka baahsan jiraan, waxa laga yaabaa inay bixiyaan hoy degdeg ah, sida qolalka hudheelka ama Barkulanka Qoysaska (Family Hubs) ama waxa laga yaabaa inay aqbalaan inay bixiyaan kharashka hoyga hudheelka ama albeerkooyinka Sariirta iyo Quraacda. Wixii ka baxsan saacadaha shaqada ee Dublin waxaad kala xidhiidhi kartaa Maamulka Guri la'aanta Gobolka Dublin telefoonka bilaashka ah ee 1800 707 707.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad ku saabsan adeegyada la heli karo, kala xidhiidh Focus Ireland 01-671 2555 ama Facebook @focusirelandcharity.

## Ma dooran karaa meesha la i geynayo – ma la i geyn karaa meel u dhow dugsigeyga, gurigaygii hore ama saaxiibaday?

Maya, nasiib darro adiga iyo qoyskaaga way idinku xaddidnaan doontaa inaad xulataan halka la idin geynayo. Waxay kuxiran tahay meesha hoy laga heli karo. Waxaa laga yaabaa inaad ka guurto xaafadda aad degan tihiin oo aad gasho dugsi kale.

## Ma inaan dugsigeyga u sheega inaan guri la'aan ahay?

Maya, uma baahnid inaad u sheegto dugsiga inaad tahay guri la'aan, laakiin waalidkaa ama cidda kaa masuulka ah ayaa laga yaabaa in looga baahdo inay ku wargeliyaan inaad beddeshay ciwaanka si ay u heli karaan dukumeentiyada ama waraaqaha. Mararka qaarkood way ku caawin kartaa inaad la hadasho macalin ama aad ogeysiiso dadka kale ee dugsiga jooga xaaladda aad ku sugan tahay, laakiin taasi waa ikhtiyaarkaaga.

## Dugsigaygu ma inuu gunno ii sameeyaa haddii aan hoylaawe ahay?

Ma jiro hagitaan rasmi ah oo iskuulada leeyihiin oo ku saabsan sida loola macaamilo carruurta ay haysato hoy la'aantu. Dugsiyo badan ayaa isku daya inay gunno bixiyaan haddii ay ogaadaan inaad guri la'aan tahay. Waxaa laga yaabaa inay:

- eegaan sida ay kaaga taageeri karaan shaqada guriga
- kuu ogoladaan inaad buugaagta kaga tagto dugsiga halkii aad dib ugula laaban lahayd hoygaaga
- kuu oggolaadaan inaad seexato huradadii aad seegtay
- kugu taageeraan agabka dugsiga.

Tani waxay ku xidhan tahay dugsiga iyo agabka ay haystaan.

## Ma jiraan taageerooyin dugsi oo aan heli karo haddii aan guri la'aan ahay?

Haddii aad tagto dugsi ku jira barnaamijka Bixinta Sinaanta Fursadaha Dugsiyada (DEIS), waxaad waydiin kartaa helida taageerooyinka sida Saraakiisha Xiriirinta Bulshada ee Dugsiga Guriga. Dugsiyada qaar waxa kale oo laga yaabaa inay haystaan dhaqaale ay kaga caawin karaan kharashka dugsiga.



Dugsiyada qaarkood waxay leeyihiin naadiyada quraacda, ama waxay qayb ka yihiin Barnaamijka Cuntada Dugsiga markaas waxa laga yaabaa inay qado sameeyaan. Tani waxay ku caawin kartaa haddii ay tahay inaad ka tagto hoyga degdega ah ka hor intaadan fursad u helin inaad quraacato.

## Maxaa taageero ah oo aan heli karaa haddii aan rabo inaan ka hadlo xaaladdeyda?

Childline waxay bixisaa taageero balaadhan waxayna diyaar u yihiin wakhti kasta si loola xidhiidho:

- telefoonka bilaashka ah 1800 66 66 66
- Fariin bilaash ah 50101
- adigo si toos ah ugala sheekeysanaaya boggooda.

Qaybta 3.5 ayaa ku siinaysaa talo ku saabsan halka ay carruurtu ka heli karaan taageerada iyo macluumaadka la xidhiidha caafimaadka dhimirka.

# Halkee ayaan caawimo ka heli karaa?

# Cutubka 10

Waxa jira tiro oo ururo iyo hay'ado dhowr ah oo lagu sheegay hagahan. Waxaa la isugu kooxeeyay mawduuc ahaan waxaana halkan loogu taxay siday u kala horreeyaan alifbeeto ahaan iyada oo ay la socoto sharraxaad gaaban oo ku saabsan waxay qabtaan iyo sida ay kuu caawin karaan. Si toos ah ayaad uga caban kartaa qaar ka mid ah hay'adaha iyo ururada, laakiin kuwa kale waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad waalidkaa ama qofka kaa masuulka ah ama qof weyn oo aad aaminsan tahay uu kuugu soo helo macluumaadka oo uu kuugu cowdo isagoo adiga ku metelaya.

## Tilmaanta ku tusaysa ururo iyo hay'ado waxtar leh


1. Hay'adaha cabashooyinka iyo dhibaato xallinta (dib u hagaajin macnaheedu waa wax ka qabasho) 158

2. Ururada sharciga 162

3. Macluumaadka ku saabsan Adeegyada Dadweynaha 165

4. Hay'adaha Iyo Waaxyaha Dawladda 166

5. Ururada Carruurta 169

6. Ururada Dhalinyarada 170

7. Khadka Taleefanka 171

8. Caafimaadka (guud iyo caruur) 179

9. Caafimaadka (Caafimaadka maskaxda) 181

10. Naafada 183

11. Waxbarashada 187

12. Waxbarashada iyo daryeelka carruurnimada hore 189

13. Carruurta Ku Jirta Daryeelka 190

14. Guri la'aan 191

15. Arrimaha qoyska iyo taageerada 194

16. Socdaalka iyo magangalyada 197

17. Nidaamka Cadaaladda 202

# 1. Hay’adaha cabashooyinka iyo dhibaato xallinta (dib u hagaajin macnaheedu waa wax ka qabasho)

Haddii aad rabto inaad cabasho samayso, waa inaad marka hore u soo bandhigtaa arrinta ururka ama qofka aad dareemayso inuu ku xadgudbay xuquuqdaada si aad u siiso fursad ay ku xaliyaan dhibaatada. Waxaad taas u samayn kartaa si aan rasmi ahayn. Isticmaal foomka cabashada haddii ay mid leeyihiin ama ku qor cabashadaada adigoo raacinay faahfaahinta waqtiyada, taariikhaha, sababta aadan u faraxsanayn iyo waxa ururka ama qofka uu samayn karo si ay wax u wanaajiyaan. Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabta ama aad dareentid in arrinta aan la xalin, mid ka mid ah hay’adaha soo socda ayaa laga yaabaa inay ku caawiyaan.

### Guddiga Tartanka iyo Ilaalinta Macaamiisha

Wakaaladani waxay ku siin kartaa macluumaadka ku saabsan xuquuqda macaamiisha, sida loo maareeyo lacagtaada iyo badbaadada badeecooyinka. Haddii aad u malaynayso in ganacsigu ku xad-gudbay xuquuqahaaga macaamilka, waxaad u sheegi kartaa ganacsiga Wakaaladda Macmiilka Qaranka.

Guddiga Tartanka iyo Ilaalinta Macaamiisha
Bloom House
Railway Street
D01-C576

Khadka caawinta macaamiisha ee Lo-call 1890 432 432 ama 01-402 5555 (furan 9 subaxnimo ilaa 6 galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha)

www.ccpc.ie/consumers/

### Guddoomiyaha Ilaalinta Xogta

Guddoomiyaha Ilaalinta Xogta wuxuu baaraa cabashooyinka shakhsiyaadka dareemaya in xuquuqdooda gaar ahaaneed aan si ku filan loo ilaalin ama in xogtooda gaarka ah loo isticmaalay si khaldan. Haddii aad siiso wax tafaasiil shakhsi ah ama macluumaad ah hay’ad ama shakhsi, waxay leeyihiin mas’uuliyadda inay ixtiraamaan xaqaaga gaar ahaanshaha iyagoo xafidaya macluumaadkaaga kana dhigaaya mid ammaan ah oo gaar ah.

Mareegta Guddidu waxa ku jira hage ku qoran luuqad Ingiriisi faham fudud oo ka hadlaya xuquuqdaada aad ku leedahay shuruucda ilaalinta xogta, iyo sidoo kale jaantus loogu talagalay oo muujinaya ilaalinta xuquuqdooda iyo masuuliyadahooda ilaalinta xogtooda. Waxa kale oo ay kuu hayaan foom aad u isticmaali kartid inaad helitaanka xogta kaga dalbatid ururada kaas oo ku jira websaydkooda.

Guddiga Ilaalinta Xogta
21 Fitzwilliam Square South
D02 RD28

Taleefan: +353 578 684 800 • +353 761 104 800
Saacadaha ay furan yihiin 9.15 subaxnimo illaa 5.30 galabnimo (5.15 galabnimo Jimcaha) www.dataprotection.ie/ Foomka websaydka: forms.dataprotection.ie/contact

## GSOC (Guddiga Dhexdhexaadinta ee Ciidamada Booliska)

Waxaad u dacwoon kartaa Wakiilka Ciidamada Booliska (GSOC) wixii ku saabsan dhaqanka Booliska haddii:

1) si toos ah uu kuu saameeyay.
2) aad markhaati ka ahayd hab-dhaqanka, ama
3) aad rabto inaad sidaas samayso adoo wakiil ka ah qof kale oo aad fasax ka haysato.

Waa in aad ku cabato 6 bilood gudahooda ka dib marka ay dhacdadu dhacdo, ilaa aad dib u dhigista sabab fiican u haysato mooyee. Waalidka ama mas'uulkaaga waxa sidoo kale laga yaabaa inay u dacwoodaan dugsiga iyagoo adiga ku metelaya. GSO ayaa go'aamin doonta haddii ay tixgelin karaan cabashadaada (haddii ay tahay 'la mid la aqbali karo'). Haddii la aqbali karo, Wakiilku waxa uu u gudbin karaa cabashada dhexdhexaadin, ama Taliyaha Booliska ayaa baadhi kara cabashadaada. Haddii cabashada la ogolaado, waxaa laga yaabaa in tallaabo anshaxeed laga qaado Sarkaalka Booliska ee laga hadlayo ama waxaa laga yaabaa, haddii ay ka sii daran tahay, in loo gudbiyo dacwad ciqaabeed.

Wakiilka Ciidamada Booliska
150 Upper Abbey Street
D01 FT73

Iimayl: info@gsoc.ie
Taleefan: 1890 600 800
www.gardaombudsman.ie

## Komishanka Xuquuqul Insaanka iyo sinnaanta ee Ireland

Komishanka Xuquuqul Insaanka iyo Sinnaanta Irishka (IHREC) wuxuu ka shaqeeyaa ilaalinta iyo horumarinta xuquuqda aadanaha. Waxa kale oo ay hubiyaan in takoor aanu ka dhicin mid ka mid ah 9-ka qaybood ee lagu qeexay sharciga sinnaanta: jinsiga, xaaladda guurka, heerka qoyska, da'da, naafanimada, jinsiga, nooca galmada, caqiidada diinta ama xubinnimada bulshada socotada ah.

Waad u dacwoon kartaa IHREC haddii aad dareento in lagu takooray. IHREC waxay ku siin karaan macluumaad ku saabsan sharciga sinnaanta. Waxay ku siin karaan kaalmo sharci haddii si sharci darro ah lagaaga takooray helitaanka adeeg sida dugsi, shaqo ama gaadiid dadweyne. Si kastaba ha ahaatee, ugama caban kartid takoorid ku salaysan da'daada. Waxa kale oo aad IHREC ka codsan kartaa inay samayso baadhitaan ama inay ku siiso talo sharci ama caawimo si aad u qaadatid kiis haddii aad dareento in lagu xad-gudbay xuquuqdaada bini'aadanimo ama la iska indho-tiray. Si kastaba ha ahaatee, waxay tixgalin doonaan codsigaaga baaritaanka ama kiis sharci qaadi karaan marka aanay jirin hay'ad kale oo cabashada wax ka qabanaysa.

Komishanka Xuquuqul Insaanka iyo sinnaanta ee Ireland
16-22 Green Street
DO7 CR20

Taleefan: 01 858 9601
Soo wac: 1890 245545
Iimayl: info@ihrec.ie
www.ihrec.ie

## Xafiiska Wakiilka Dadweynaha

Office of the Ombudsman
Oifig an Ombudsman

Doorka Wakiilka Xuquuqaha dadwaynaha waa inuu baadho cabashooyinka xubnaha dadweynaha ee aaminsan in ay si cadaalad darro ah ula dhaqmeen bixiyeyaasha adeegga dadweynaha qaarkood. Kuwaas waxaa ka mid ah:

- Waaxaha Dowladda
- maamulka deegaanka
- Adeega Fulinta Caafimaadka (HSE)
- hay'adaha, sida samafalayaasha iyo hay'adaha taburaca ku shaqeeya, ee bixiya adeegyada caafimaadka ee bulshada iyagoo ka wakiil ah HSE
- isbitaalada dadweynaha
- hay'adaha waxbarashada heerka saddexaad ee ay dadweynuhu maalgaliyeen
- guryaha dadka waaweyn iyo kuwa gaarka loo leeyahay

Wakiilku waxa kale oo uu eegaa cabashooyinka ku saabsan fashilka hay'adaha dawladda ee dhanka bixinta dhismayaal, adeegyo iyo macluumaad la heli karo, sida uu waajibiyay Xeerka Naafada ee 2005 Qaybta 3. Dacwadaha noocaan ah, ereyga 'hay'adda dadweynaha' wuxu koobsanayaa waaxaha dowladda, maamulada maxalliga ah, HSE iyo hay'adaha qayb ahaan dowladdu maamusho, iyo sidoo kale badi ururada kale ee dowladda.

Xafiiska Wakiilka Dhexdhexaadinta
18 Lower Leeson Street
D02 HE97

Taleefan: 01 639 5600
Soo wac: 1890 22 30 3030 (dacwooyinku way kala duwanaan karaan)
Iimayl: info@ombudsman.ie
www.ombudsman.ie/

## Xafiiska Guddida Warfaafinta

ico.
Information Commissioner's Office

Haddii aad ka yar tahay 18 sano, waalidkaa wuxuu codsan karaa diiwaan kasta ama dukumeenti kasta oo hay'adaha dadweynuhu ay kaa hayaan sida ku cad sharciga Xoriyadda Macluumaadka (FOI). Xafiiska Guddida Warfaafinta wuxuu fuliyaa dib u eegis madax bannaan oo ku saabsan go'aamada ay qaataan hay'adaha dawliga ah ee codsiyada FOI. Haddii codsiga FOI la diido, markaas adiga ama waalidkaa waxaad rafcaan uga qaadan kartaan go'aanka Guddida Warfaafinta. Waa inaad ka codsataa hay'adda dadwaynaha inay dib u eegaan go'aankoodii asalka ahaa ka hor inta aanad waydiisan Guddida Warfaafinta inay dib u eegaan. Dib-u-eegiddu waa bilaash haddii ay la xidhiidho diiwaannada shakhsi ahaaneed. Waxay furan yihiin inta u dhaxaysa 9.15 subaxnimo ilaa 5 galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha.

Xafiiska Guddida Warfaafinta
18 Lower Leeson Street
D02 HE97

Wac 01 639 5689
Iimayl: info@oic.ie
www.oic.ie/

## Xafiiska Dhexdhexaadiyaha Carruurta

Xafiiskani wuxuu kala taliyaa dawladda arrimaha dhalinyarada iyo carruurta. Waxay kaloo wax ka qabataa cabashooyinka. Haddii aad ka yar tahay 18 oo uu si xun kuu saameeyay go'aanka ay gaareen hay'ad Dowladeed ama dadwayne, waxaad u dacwoon kartaa OCO. Wakiilku wuxuu eegaa cabashooyinka ka dhanka ah hay'adaha kala duwan oo ay ku jiraan waaxyaha dawladda, dugsiyo gaar ah, isbitaallo, hay'ado dadweyne ama hay'adaha bixiya adeegyo ay ku metelayaan Dowladda. Haddii aad ka yar tahay 18 jir toos baad u caban kartaa ama waalidkaa oo ku metelayaa ayaa kuu caban kara.

Wakiilka Carruurta
Millennium House
52-56 Great Strand Street
Dublin 1,
D01 F5P8

Taleefan: 01 865 6800
Freefone: 1800 20 20 40
Iimayl: oco@oco.ie
www.oco.ie, www.itsyourright.ie

## Xafiiska Racfaanka Daryeelka Bulshada

Xafiiska Rafcaanka Daryeelka Bulshada waxa uu u shaqeeyaa si ka madaxbanaan Waaxda Ilaalinta Bulshada. Waxa ay higsaneyaan in ay bixiyaan adeeg racfaan oo madax banaan, la heli karo oo cadaalad ah marka la eego xaq u lahaanshaha lacagaha daryeelka bulshada iyo in lagu bixiyo adeegaas si degdeg ah oo xushmad leh. Waxaad ka heli kartaa faahfaahin ku saabsan sida loo dacwoodo boggooda interneetka.

Xafiiska Racfaanka Daryeelka Bulshada
D'Olier House,
D'Olier Street
Dublin 2,
D02 XY31

Isniin - Jimco 10 subaxnimo - 12.30 galabnimo iyo 2.30 galabnimo - 4 galabnimo

Iimayl: : swappeals@welfare.ie
Gudaha1890 74 74 3401
01 6732800
www.socialwelfareappeals.ie/

## Guddiga Xiriirka Goobta Shaqada

Guddiga Xiriirka Goobta Shaqada (WRC) waa hay'ad madax-bannaan oo sharciyeed. Adeegyada xudunta u ah guddiga waxaa ka mid ah kormeerka u hoggaansanaanta xuquuqda shaqada, bixinta macluumaadka, habaynta wakaalada shaqada iyo ilaalinta shatiyada dhalinyarada (shaqaale) iyo bixinta dhexdhexaadinta, heshiisiinta, fududaynta iyo adeegyada latalinta. WRC waxay sidoo kale bixisa dib u hagaajinta jebinta Xeerarka Sinaanta si aad u aragto shabakadooda.

**Macluumaadka & Adeegga Macmiilka**
Soo wac: 1890 80 80 90
Taleefan: 059 9178990
(9.30 subaxnimo - 5 galabnimo)

www.workplacerelations.ie

# 2. Ururada sharciga

Waxaad talo ka raadsan kartaa looyar haddii aad hayso su'aal sharci, aad u baahan tahay hagitaan sharci ama wakiil dacwadaha sharciga ah ama aad u baahan tahay caawimaad si aad u fahamto ama aad u diyaaristo dukumentiyada sharciga ah. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad hesho caawimo xagga arrimaha sharciga ah sida sharciga shaqada, xaaladda socdaalka ama arrin kasta oo sharci ah.

Waxaad xaq u leedahay qareen haddii Boolisku maxkamd ku geeyaan. Haddii aadan awoodin inaad hesho qareen, garsooruhu wuxuu amri doonaa in lagu siiyo mid bilaash ah. Haddii aad ugu baahan tahay qareenka sabab kale, qof kale oo weyn sida waalidkaa ama mas'uulkaaga ayaa kuula xiriiri kara mid isagoo adiga ku metelaya. Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah faahfaahinta xiriirka ee adeegyada sharciga ee ka shaqeeya arrimaha aan ahayn arrimaha dembiyada.

## Hay'adaha sharciga ah

Legal Aid Board
An Bord Um Chúnamh Dlíthiúil

### Guddiga Kaalmada Sharciga

Guddiga Kaalmada Sharciga ayaa mas'uul ka ah kaalmada sharciga haddii aadan awoodin inaad iska bixiso kaalmada sharci. Waxay bixisaa gargaar sharci oo la xidhiidha arrimaha madaniga ah - tusaale ahaan, sharciga qoyska, dacwadaha daryeelka carruurta, dhaawacyada shakhsi ahaaneed ama codsiyada magangalyada. Waa inaad buuxisaa shuruudaha tijaabada heerka dhaqaale taas oo ka dhigan in loo baahan yahay in dakhligaagu ka hooseeyo 'qiyaas' cayiman taas oo ka dhigan in kiiskaagu fursad uu ku guuleysto uu leeyahay.

Kaalmada sharciga ciqaabta kama codsan karti Guddiga Kaalmada Sharciga, taas beddelkeeda waxaad toos codsigaaga u gudbin kartaa garsooraha.

Xafiiska Guud
Quay Street
Cahirciveen
Co. Kerry

Taleefan: 066 947 1000

Xafiiska Dublin
48-49 North Brunswick Street
Georges Lane
Smithfield
Dublin 7,
D07 PE0C

Taleefan: 01 646 9600 Soo wac: 1890 615 200
Iimayl: info@legalaidboard.ie
www.legalaidboard.ie

## Hay'adaha aan sharciga ahayn

### The Bar of Ireland

Kani waa wakiilka iyo hay'adda sharciyaynta ee qareenada, kuwaas oo ah nooc qareen ah. Haddii aad raadinayso garyaqaan ama aad ka dacwoonayso qareenkaaga, waxaad la xidhiidhi kartaa Golaha Qareenada.

Xafiiska Maamulka Qareenada
Four Courts
Dublin 7
D07 WDX8

Taleefan: 01 817 5000
Iimayl: thebarofireland@lawlibrary.ie
www.lawlibrary.ie

### Bulshada Sharciga ee Ireland

Kani waa wakiilka iyo hay'adda sharciyeynta ee looyarada. Haddii aad raadinayso looyar ama aad cabasho ka qabto looyarkaaga, waxaad la xidhiidhi kartaa Bulshada Sharciga.

Bulshada Sharciga
Blackhall Place
Dublin 7
D07 VY24

Taleefan: 01 672 4800
Iimayl: : general@lawsociety.ie
www.lawsociety.ie

### Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta Macluumaadka Sharciga iyo Adeegga La-talinta

Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta waxa uu bixiyaa macluumaad iyo talo sharci oo bilaash ah oo ku saabsan xuquuqda carruurta, dhalinyarada, qoysaska iyo kuwa la shaqeeya.

Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta
7 Red Cow Lane
Smithfield
Dublin 7
D07 XN29

Khadka caawinta: 01 9020494
Iimayl: help@childrensrights.ie
www.childrensrights.ie

Wuxu furan yahay Isniinta iyo Arbacada 10 subaxnimo - 4 galabnimo iyo Jimcaha 10 subaxnimo - 12 galabnimo

## Xarumaha La-talinta Sharciga ee Bilaashka ah (FLAC)

Ururkan aan dowliga ahayn wuxuu ka shaqeeyaa sidii loo heli lahaa cadaalad. Ururku wuxuu ka shaqeeyaa arrimo badan oo kala duwan wuxuuna bixiyaa adeegyo sharci oo bilaash ah oo aasaasi ah oo dadweynaha siiya khadka taleefanka iyo rugaha caafimaadka ee waddanka oo dhan. Waxay kaloo bixiyaan adeegyo gaar ah oo loogu talagalay qoyska, shaqada iyo sharciga socdaalka. Adeegyada qaarkood waxaa lagu bixiyaa Luuqadda Ishaarada ama Dhegoolayaasha iyo Luuqadda Irishka.

Xarumaha La-talinta Sharciga ee bilaashka ah
85/86 Dorset Street Upper
Dublin 1
D01 P9Y3

Khadka Macluumaadka iyo Gudbinta: 1890 350 250
Taleefan: 01 8873600
www.flac.ie

## Mercy Law Resource Centre (MLRC)

Mercy Law Resource Centre (MLRC) waa xarun sharci oo madax bannaaan, oo diiwaangelisa ururada samafalka iyo shirkadaha dammaanadda leh taasoo ka siisa talo sharci oo bilaash ah iyo matalaad dadka hoylaawayaasha ah ama halista ugu jira inay noqdaan guri la'aan dhinacyada guryaha bulshada iyo sharciga daryeelka bulshada. Xaruntu waxa kale oo ay doonaysaa in ay u doodo beddelka sharciyada, siyaasadaha iyo hab-dhaqanka kuwaas oo si xun oo daran u saameysa kooxda macmiilka.

Mercy Law Resource Centre
25 Cork St
Dublin 8
D08 YD91

Taleefan: 01 453 7459
Iimayl: info@mercylaw.ie
www.mercylaw.ie

# 3. Macluumaadka ku saabsan Adeegyada Dadweynaha

### Guddiga Macluumaadka Dadweynaha

Guddiga Macluumaadka Dadweynaha waa adeeg macluumaad dadweyne oo bixiya macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan xuquuqdaada daryeelka caafimaadka, guriyeynta, daryeelka bulshada iyo waxbarashada. Guddigu waxay macluumaadka ku bixiyaan shabakad ka badan 250 Xarumaha Macluumaadka Muwaadiniinta (CICs) ah oo dalka oo dhan ka jira iyagoo u marsiinaya websaydkooda. CIC-yadu waxay ku siin karaan macluumaad ama waxay kuu tilmaami karaan hay'ad kale ama qaab kale oo laga yaabo inaad caawimo ku hesho. Waa inaad wacdaa khadka caawinta ama booqata boggooda si aad u hesho xarunta kuugu dhow.

George's Quay House
43 Townsend Street
Dublin 2
D02 VK65

Taleefan: 0761 07 4000
www.citizensinformation.ie

# 4. Hay'adaha Iyo Waaxyaha Dawladda

## Waaxda Carruurta, Sinnaanta, Naafonimada, Is-dhexgalka iyo Dhalinyarada

An Roinn Leanaí agus Gnóthaí Óige
Department of Children and Youth Affairs

Waaxdan dawladu waxay mas'uul ka tahay siyaasadaha iyo adeegyada carruurta iyo dhalinyarada Ireland laga bilaabo da'dooda hore ilaa ay noqdaan dad qaangaar ah. Waxay kaloo mas'uul ka tahay Tusla, Maamulka korsashada ee Ireland iyo Xafiiska Dhexdhexaadiyaha Carruurta.

Qeybta 1
Miesian Plaza
50-58 Baggot Street Lower
Dublin 2
D02 XWI4

iimayl: contact@dcya.gov.ie
www.dcya.gov.ie
Taleefan:01 647 3000

## Waaxda Waxbarashada

An Roinn Oideachais agus Scileanna
Department of Education and Skills

Tani waa waaxda dawladda ee u xilsaaran waxbarashada iyo tababarka. Waxay kormeeraan siyaasadda waxbarashada. Waxay leeyihiin masuuliyad ballaaran oo ka bilaabanta sannadaha hore soconaysana illaa heerka saddexaad ee waxbarashada. Waxay sidoo kale mas'uul ka yihiin dhismayaasha dugsiga, gaadiidka dugsiga iyo waxbarashada iyo taageerada baahida waxbarashada gaarka ah.

Waaxda Waxbarashada
Marlborough Street
Dublin 1
D01 RC96
Taleefan:01 889 6400

www.education.ie

## Waaxda Ilaalinta Arrimaha Bulshada

An Roinn Gnóthaí Fostaíochta agus Coimirce Sóisialaí
Department of Employment Affairs and Social Protection

Tani waa waaxda dawladda ee bixisa taageerooyinka dakhliga, faa'iidooyinka, adeegyada shaqada, iyo talada xubnaha dadweynaha. Mareegta wasaaradda waxaa ku jira macluumaad ku saabsan faa'iidooyinka iyo taageerada la heli karo, iyo sida loo galo. Waxa kale oo ay haysaa macluumaadka goobta uu ku yaal xafiiska daryeelka bulshada ee kuugu dhow.

Áras Mhic Dhiarmada
Store Street
Dublin 1.
Taleefan: 01 704 3000

www.welfare.ie

### Booliska

An Garda Síochána waa magaca adeegga booliiska Irishka. Shaqadooda waxaa ka mid ah baarista dambiyada, fulinta shaqada ka hortagga dembiyada iyo la shaqeynta dhibanayaasha.

Qaybta Dhexe ee Booliska
Phoenix Park
Dublin 8

Taleefan: 01-666 0000
Khadka Caawinta Qarsoon ee Booliska: 1800 666 111
Xaaladaha degdega ah: 999
www.garda.ie

### Khadka Warfaafinta Qaranka ee Fulinta Adeegga Caafimaadka

HSE waxa ay bixisa dhamaan caafimaadka guud iyo adeegyada bulsho ee gaarka ah ee Ireland, cisbitaalada iyo jaaliyadaha dalka oo dhan. Wac lambarkan si aad u hesho adeegga aad u baahan tahay.
La xidhiidh khadka macluumaadka HSE laga bilaabo 8 subaxnimo ilaa 8 galabnimo, Isniinta ilaa Sabtida.

Callsave: 1850 24 1850 ama 041 6850300
Iimayl: infoline1@hse.ie
www.hse.ie

### Hay'adda Carruurta iyo Qoyska Tusla

Wakaaladda Carruurta iyo Qoyska (Tusla) waa hay'adda Dowladda uga mas'uulka ah horumarinta fayoqabka iyo natiijooyinka carruurta. Shabakadda Tusla waxa ku jira macluumaad ku saabsan adeegyada ilaalinta carruurta, daryeelka carruurta, daryeelka, waxbarashada, adeegyada cilmi nafsiga, iyo adeegyada ka shaqeeya noocyada kala duwan ee rabshadaha oo ay ku jiraan xadgudubka galmada. Waxay sidoo kale kaa caawineysaa inaad la xiriirto shaqaale bulsho oo aagaaga ka jira.

The Brunel Building
Heuston South Quarter
Saint John's Road West
Dublin 8
D08 X01F

Taleefan: 01-771 8500
Iimayl: info@tusla.ie
www.tusla.ie
Jawaab-celinta iyo cabashooyinka: www.tusla.ie/get-in-touch/feedback-and-complaints1/

# 5. Ururada Carruurta

### Barnardos

Barnardos waa hay'ad samafal oo madaxbannaan oo si toos ah ula shaqeysa carruurta iyo qoysaska baahida qaba, iyagoo adeegyo iyo taageero ku bixiya 40 xarumood oo dalka ah. Waxay kaloo u ololaysaa xuquuqda carruurta Ireland waxayna siisaa tababar iyo agab xirfadlayaasha daryeelka carruurta.

Barnardos
Afar-geeska Christchurch
Dublin 8
D08 DT63

Taleefan: 01 453 0355
Callsave: 1850 222 300
Iimayl: info@barnardos.ie
www.barnardos.ie

### ISPCC

Bulshada Irishka ee Ka Hortagga Arxan darada Carruurta (ISPCC) waa urur samafal carruureed kaas oo u dooda dhammaan carruurta Ireland. Waxay bixisaa adeegyo kala duwan oo madax banaan kuwaas oo dabciyan ka-hortagg iyo awood-siin ah.

ISPCC
29 Lower Baggot Street
Dublin 2
D02 XT93

Taleefan: 01 676 7960
Iimayl: info@ispcc.ie
www.ispcc.ie

# 6. Ururada Dhalinyarada

## Comhairle na nÓg

Comhairle na nÓg waa golaha caruurta iyo dhalinyarada oo ka shaqeeya maamulada dowladaha hoose ee Ireland oo dhan. Waxay dhalinyarada cod ka siiyaan adeegyada, siyaasadaha iyo arrimaha ku saameeyaa deegaankooda. Waxaad ka heli kartaa Comhairle iyo nÓg kuugu dhow shabakadooda.

Khadka tooska ah ee maamulka: 01 858 4520
Iimayl: citizenparticipation@dcya.gov.ie
www.comhairlenanog.ie

## Foróige

Foróige, Ururka Horumarinta Dhallinyarada Qaranka, waa urur dhallinyaro hormuud ah oo la shaqeeya 56,000 oo dhallinyaro ah oo da'doodu u dhaxayso 10-18 sannad kasta iyada waxayna adeegsadaan naadiyo tabaruc iyo mashaariic shaqaale leh. Ka hel naadiga Foróige ee kuugu dhow boggooda.

Foróige
Block 12D,
Joyce Way
Park West,
Dublin 12
D12 YOA6

Taleefan: 01 630 1560
Iimayl: info@foroige.ie
www.foroige.ie

## Golaha Dhalinyarada Qaranka ee Ireland (NYCI)

Golaha Dhallinyarada Qaranka ee Ireland waa hay'adda matalaysa ku dhawaad 50 ururo dhallinyaro oo tabaruc ka sameeya gudaha Ireland. Waxay isticmaashaa waayo-aragnimada ururadan si ay uga shaqeyso arrimaha saameeya dhalinyarada.

NYCI
3 Montague Street,
Dublin 2
D02 V327

Taleefan: 01 478 4122
Iimayl: info@nyci.ie
www.nyci.ie

## SpunOut.ie

SpunOut.ie waa mareeg ay dhalinyaradu u sameeyeen dhalinyarada. Waxay kor u qaadaa samaqabka guud iyo nolol caafimaad leh. Websaydhku waxa uu bixiyaa talo la isku hallayn karo, habboon, si sahal ah loo heli karo, oo aan ku xukminayn taas oo dhalinyarada jirta da'da u dhexeysa 16 iyo 25 ka caawinaysa gaarista go'aamada macquulka ah.

Supunout.ie
48 Fleet Street, Temple Bar
Dublin 2
D02 T883

Taleefan: 01 675 3554
Iimayl: info@spunout.ie
www.spunout.ie

## Youth Work Ireland (YWI)

Youth Work Ireland waa urur ka kooban 22 Urur Adeeg Dhalinyaro Maxalli ah iyo xafiis qaran. Youth Work Ireland waxay isku keentaa oo maamushaa Nidaamyo Adeeg Dhalinyaro oo Isku-dhafan kuwaas oo mashaariic, adeegyo, naadiyo dhalinyaro iyo barnaamijyo kala duwan siiya dhalinyarada.

Youth Work Ireland
20 Lower Dominick Street
Dublin 1
D01 YP97

Taleefan: 01 858 4500
Iimayl: info@youthworkireland.ie
www.youthworkireland.ie

## Barnaamijka U doodaha Dhallinyarada (YAP)

YAP waxay siisaa barnaamijyo taageero dhalinyarada iyo qoysaska Ireland. Dhallinyarada iyo qoysaskoodu waxay la shaqeeyaan u doode (qof si gaar ah ugu tababaran in uu caawiyo hagaajinta xidhiidhka idinka dhexeeya adiga, qoyskaaga iyo bulshadaada) muddo 6 bilood ah.

YAP
Dabaqa 3aad ee Park House
191-193a North Circular Road
Dublin 7
D07 ENV4

Taleefan: 01 868 9180
Iimayl: info@yapireland.ie
www.yapireland.ie

## LGBTI+ Young People

### BeLonGTo

BeLonGTo waa adeega dhalinyarada qaranka ee lesbian, khaniis, lab iyo dhedig iyo transgender (LGBT) dhalinyarada Ireland. Waxay siisaa adeegyo toos ah dhalinyarada LGBT ee Dublin waxayna taageertaa kooxaha dhalinyarada LGBT ee dalka oo dhan.

BeLonGTo
Parliament House
13 Parliament Street
Dublin 2
D02 P658

Taleefan: 01 670 6223
www.belongto.org

### TENI

Transgender Equality Network Ireland (TENI) waxay doonaysaa inay hagaajiso xaaladaha oo ay horumariso xuquuqda iyo sinnaanta dadka Trans iyo qoysaskooda.

TENI
Taleefan: (01) 873 3575
Iimayl: office@teni.ie
www.teni.ie/

## Traveller Young People

### Dhaqdhaqaaqa Socdaalka Irishka (ITM)

Dhaqdhaqaaqa Socdaalka Irishku waa shabakad qaran oo kooxo iyo shakhsiyaad ah oo la shaqeeya bulshada Traveller. Shabakaddeeda goboleed waxay hiigsanaysaa inay kordhiyaan ka qaybgalka Traveller waxayna taageero siiyaan Travellers-ka heer maxalli. Waa Kooxo Shaqo Qaran oo wax ka qabta arrimaha siyaasadda ee khuseeya socdaalka, oo ay ku jiraan kuwa saameeya dadka Travellers.

ITM
4-5 Eustace Street,
Dublin 2
D02 XN59

Taleefan: 01 679 6577
Iimayl: itm@itmtrav.ie
www.itmtrav.ie

### Pavee Point Traveller and Roma Centre

Ujeedada Pavee Point waa in ay gacan ka geysato horumarinta tayada nolosha iyo duruufaha nololeed ee Irish Travellers iyo Roma iyada oo ka shaqaynaysa caddaaladda bulshada, midnimada iyo xuquuqda aadanaha.

Pavee Point waxay qabataa barnaamijyo gaar ah oo leh tiro bartilmaameedyo muhiim ah, oo ay ku jiraan caafimaadka, dhalinyarada, horumarinta bulshada, waxbarashada, rabshadaha ka dhanka ah haweenka, isgaarsiinta, daroogada iyo khamriga iyo Roma.

Pavee Point
46 North Great Charles Street
Dublin 1
D01 AD92

Taleefan: 01 878 0255
Iimayl: info@pavee.ie
www.paveepoint.ie

# 7. Khadka Taleefanka

### Childline

Khadka carruurta waxaa bixiya Bulshada Irishka ee ka hortagga naxariisdarrada carruurta (ISPCC) si ay u caawiyaan oo u taageeraan carruurta iyo dhallinyarada. Waxaad ula xiriiri kartaa Childline siyaabo kala duwan:

Khadka Tooska ah ee 24 Saac: 1800 666666
Qoraal ahaan 'Talk' ugu dir 50101-oo hel dib u soo wacitaan
U dhaaf fariin guud ama mid gaar ah shabakada Childline www.childline.ie

### Shabakadda Dhibaatada Kufsiga Ireland

Shabakadda Dhibaatada Kufsiga ee Ireland (RCNI) waa xog gaar ah iyo xarun kheyraad oo ku tacaluqda kufsiga iyo dhammaan noocyada xadgudubyada galmada oo leh karti la xaqiijiyay oo dhanka hoggaaminta istiraatiijiyadda. Waa wakiil guud, oo ah dalladguud oo loogu talagalay xubnahayaga Xarumaha Dhibaatooyinka Kufsiga kuwaas oo bixiya talo bilaash ah, talobixin iyo taageero loogu talagalay dadka ka badbaada tacaddiga galmada.

Xarunta Carmichael,
North Brunswick Street
Dublin 7,
D07 RHA8

Taleefan: +353 1 865 6954
Iimayl: admin@rcni.ie
www.rapecrisishelp.ie

### Khadka Caawinta Qaranka ee Xarunta Dhibaatada Kufsiga ee Dublin

Kani waa adeeg dhegeysi iyo taageero bilaash ah, sir ah oo loogu talagalay dadka la kufsaday, la faraxumeeyey, jinsi ahaa loogu tacaddiyay ama galmo ahaan loogu xadgudbay waqti noloshooda ka mid ah. 24-kii saacadood ee maalintii, 365 maalmood ee sannadka

70 Lower Leeson Street
Dublin 2.

Taleefan: 1800 77 8888
Iimayl: counselling@rcc.ie
www.drcc.ie

## Samaritans

Samaritans waxay bixiyaan adeeg taleefoon oo shaqeeya habeen iyo maalinba haddii aad cidhiidhi ku jirto. Tabarucayaashu waxay kaa caawinayaan inaad kala hadasho wax kasta oo ku dhibaya, waxay ku siin doonaan jawaabaha kugu habboon, iyo inay taageero ku siiyaan. Adeeggu waa bilaash waana qarsoodi, mana aha inaad sheegto magacaaga saxda ah ama macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed haddii aadan rabin.

Samaritans
4-5 Usher's Court Usher's Quay
Dublin 8

Khadka 24-saac ee bilaashka ah: 116 123
Iimayl: jo@samaritans.ie
www.samaritans.org

## Khadka dhalinyarada

Khadka dhalinta ee Ireland waa adeeg telefoon oo qarsoodi ah oo bilaash ah oo furan maalin kasta usbuuca ka mid ah laga bilaabo 8fiidnimo ilaa 11habeenimo iyo Arbacada laga bilaabo 4galabnimo ilaa 11habeenimo, looguna talogalay dhalinyarada u baahan cid la hadasha.

Taleefan: 1800 833 634
Iimayl: info@teenline.ie

## Khadka Caawinta Haweenka

Khadkan caawinta ee telefoonka bilaashka ah wuxuu bixiyaa macluumaad iyo taageero faham oo qarsoodi ah, oo loogu talagalay haweenka Jamhuuriyadda Ireland, kuwaas oo ay jidh ahaan, shucuur ahaan, dhaqaale ahaan iyo jinsi ahaanba ay ugu tacaddiyeen saaxiibadood, ragooda iyo lammaanahooda. Waxay furan yihiin 7 maalmood usbuucii laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 10 galabnimo (marka laga reebo Maalinta Kiristaanka).

Women's Aid
5 Wilton Place
Dublin 2.

Iimayl: info@womensaid.ie
Khadkabilaashkaah: 1800 341 900

## Khadka ilmaha

Waxaan bixinaa taageero, hagitaan iyo macluumaad ku saabsan dhammaan dhinacyada waalidnimada oo waxaan hubinaa in, dhib kasta oo aad wajahayso, aadan noqon waalidkii u horreeyay ee la kulmay. Mararka qaarkood, waxa kaliya ee aad u baahan karto waa qof si furan u dhegeysta.

Khadka waalidka way furan yihiin: Isniin - Khamiis 10 subaxnimo - 9.30 galabnimo iyo Jimcaha 10 subaxnimo - 4.30 galabnimo
Soowac: 1890 927277 ama 01-873 3500
Iimayl: info@parentline.ie

## My Options

My Options waa khadka taleefanka bilaashka ah ee HSE kaas oo siiya macluumaad bilaash ah oo qarsoodi ah iyo la-talin dadka qaada uur aan qorsheysnayn. Waxay u furan tahay dadka da' kasta leh oo ay ku jiraan dadka ka yar da'da 18.

Talobixinta uurka ee aan qorshaysnayn waxay kaa caawin kartaa inaad la qabsato uurkaaga aan qorshaysnayn. Waxay kaa caawin karaan inaad la hadasho qof kaa caawin kara inaad hesho jawaabaha su'aalahaaga.

### Macluumaadka iyo la-talinta:

MIsniinta ilaa Jimcaha: 9 subaxnimo ilaa 9 galabnimo
Sabti: 10 subaxnimo ilaa 2 galabnimo

### Talo caafimaad:

24 saacadood maalintii, 7 maalmood usbuucii
Taleefan bilaasha: 1800 828 010
Ka baxsan Jamhuuriyadda Ireland: 01 687 7044
www.myoptions.ie

## One Family

Askonefamily waa khadka caawinta ee waalidiinta kelida ah, iyadoo wadaagaya hawlaha barbaarinta, kala-tegista, ama dhibaatooyinka dhanka uurka. Waxay bixiyaan macluumaadka ku saabsan xaqa iyo arrimaha daryeelka bulshada, arrimaha sharciga qoyska, guriyeynta, waxbarashada, dhaqaalaha, daryeelka carruurta, barbaarinta iyo taageerada bulshada. Waxay sidoo kale bixiyaan taageero loogu talagalay dadka wajaha uur aan qorsheysnayn.

Taleefan: Talk to a trained askonefamily team member on 01-662 9212
Iimayl: info@onefamily.ie.
www.onefamily.ie

## Ee ku jira websaydka

### CypersafeKids

CyberSafeKids waxaa loo aasaasay inuu bixiyo talo khubaro, isu miisaaman oo xirfad leh oo loogu talagalay dugsiyada, carruurta iyo waalidiinta ee dhanka isticmaalka ammaanka ah ee tiknoolajiyadda lagu wada xiriiro Waxay diiradda saaraan carruurta da'doodu u dhaxayso 9 ilaa 13 marka ugu horreysa ee ay sahaminayaan dhinacyo badan oo isgaarsiinta internetka ah. Waxay rabaan inay awood u siiyaan carruurta si ay u noqdaan kuwo xoog leh, caqli badan oo ammaan ah khadka internetka.

CyberSafeKids
93 Upper George's Street,
Dun Laoghaire
Co. Dublin

Taleefan: 089252084
Iimayl: alex@cybersafeireland.org
www.cybersafekids.ie

### Khadka Internetka ee Irishka

Khadka Wicitaanka Degdeda ah ee Internetka ee Irishka ah wuxuu ku siinayaa hab aad si badbaado leh oo qarsoodi ah ugu soo gudbin karto muuqalo muujinaya anshax xumada ee carruurta iyo waxyaabaha kale onlaynka ee sharci-darrada ah.

Waxaad warbixin ku samayn kartaa iimayl, boosto, telefoon ama addoo isticmaalaya abka (oo laga heli karo websaydkooda).

Khadka Internetka ee Irishka
Unit 25 Sandyford Office Park
Blackthorn Avenue
Dublin 18
D18 HX62

Taleefan: 1890 610 710
Iimayl: info@hotline.ie
www.hotline.ie

### Ka Feker Ka Hor Inta Aadan Gujin

Ka Feker Ka Hor Inta Aadan Gujin waa qorshe xiisadeed, kayd macluumaad, waraaqo talo bixin ah iyo agab mashruuc oo loogu talagalay dhalinyarada iyo macalimiintooda kuwaas oo raba inay wax ka ogaadaan sirta onlaynka ee khuseeya xuquuqaha iyo masuuliyadaha.

www.thinkb4uclick.ie

### Watch Your Space

Watch Your Space waa wacyigelin kor u qaadaysa hindisaha Webwise. Waxay kor u qaadaa isticmaalka badbaadada leh, waxtarka leh ee internetka ee dhalinyarada iyada oo loo marayo wacyigelin, agab iyo ololeyaal. The Watch Your Space waxay ka kooban tahay agab waxtar leh, talo iyo agabka ololaha arrimaha sida cagajuglaynta onlaynka ah iyo isticmaalka internetka nabdoon.

www.watchyourspace.ie

### Webwise

Webwise waa Xarunta Wacyigelinta Badbaadada Internetka ee Ireland. Webwise wuxuu la shaqeeyaa Xafiiska Badbaadada Internetka si uu u horumariyo waxqabadyada qaranka iyo barnaamijyada waxbarashada ee kor u qaadaya isticmaalka badbaadada leh ee internetka ee carruurta iyo dadka nugul.

Jaamacadda Magaalada Dublin,
Dublin 9

Iimayl: internetsafety@pdst.ie
www.webwise.ie

# 8. Caafimaadka (guud iyo caruur)

## B4Udecide

Iyadoo ay maalgelisay Barnaamijka Uurka Qalalaasaha ee HSE, B4Udecide waa shabakad macluumaad bilaa xukun ah oo ku saabsan galmada iyo xiriirka siisa dhalinyarada, waalidiintooda, iyo macalimiintooda.

Taleefan:076 695 9130
Iimayl: info@crisispregnancy.ie
www.b4udecide.ie

## Bodywhys

Bodywhys, Ururka Cunto-xumada ee Ireland, waa urur qaran oo iskaa wax u qabso ah iyo adeegga taageerada dadka ay saameeyeen cudurada cunto xumida. Waxa kale oo ay u ololaysaa bixinta adeegyada daawaynta wanaagsan.

Isbitaalka St. John of Gods
PO Box 105
Blackrock
Co Dublin

Taleefan: 01 283 4963
Khadka caawinta: 01 210 7906
Iimayl: info@bodywhys.ie
www.bodywhys.ie

## CARI

Carruurta Khatarta ku jirta ee Ireland (CARI) waa urur foolaad u ah taburacaadka oo daawayn carruurtu-bud-dhig u tahay siiya carruurta iyo kooxaha qoysaska ee la kulmay tacaddiyada galmada.

CARI
110 Lower Drumcondra Rd
Dublin 9
D09 N8E4

Taleefan: 1890 92 4567
Iimayl: helpline@cari.ie
www.cari.ie

### Children in Hospital Ireland

Children in Hospital Ireland waa urur tabaruc oo ay ka go'an tahay horumarinta iyo hubinta daryeelka iyo fayoqabka dhammaan carruurta ku jira isbitaalka iyo qoysaskooda.

Children in Hospital Ireland
Carmichael Centre
Coleraine House
Coleraine Street
Dublin
D07 RHA8

Taleefan: 01-290 3510
Iimayl: info@childreninhospital.ie
www.childreninhospital.ie

### Drugs.ie - Macluumaadka iyo Taageerada Daroogada iyo Khamriga

Drugs.ie waa degel madax banaan oo ay maamusho The Ana Liffey Drug Project. Websaydhku wuxuu higsanayaa inuu ka caawiyo shakhsiyaadka, qoysaska iyo bulshooyinka ka hortagga iyo / ama wax ka qabashada dhibaatooyinka la xiriira isticmaalka maandooriyaha iyo khamriga. Waxay bixisaa macluumaadka ku saabsan taageerada, tababarka, la-talinta, baxnaaninta iyo daawaynta.

Khadka Caawinta Dawooyinka iyo Khamriga ee HSE: 1800 459 459
Email: info@drugs.ie
www.drugs.ie

### My Options

(eeg qaybta khadadka taleefoonka degdeg ah ee sare)

### Khadka Macluumaadka Qaranka ee Fulinta Adeegga Caafimaadka

(eeg qaybta kore ee hay'adaha sharciga)

### My Child

Websaydka My Child wuxu bixiyaa hage loogu talagalay uurka, caafimaadka sabiyada iyo socodbaradaka oo ay ku qoran yihiin macluumaad lagu kalsoon yahay oo khubaro bixisay. Waxay kaloo bixisaa adeegyo iyo taageerooyin caafimaad.

Phone: 1850 24 1850

# 9. Caafimaadka (Caafimaadka maskaxda)

### Qof Ogeysii (Let Someone Know)

Websaydh ay maamusho HSE oo bixiya macluumaadka caafimaadka dhimirka, iyo sida loo raadsado caawimo.

www.letsomeoneknow.ie

### Reachout

Shabakad madax-bannaan oo ujeeddadeedu tahay in uu u sheego dadka da'yarta ah noocyada kaalmada iyo adeegyada taageerada ee la heli karo ee la xidhiidha caafimaadka dhimirka.

Taleefan: 01 764 5666
Iimayl: info@inspireireland.ie
www.reachout.com

### Xafiiska Qaranka ee Ka Hortagga Is-dilka

Qaybtan ka tirsan Maamulka Sare ee Adeegga Caafimaadka (HSE) waxay mas'uul ka tahay Istaraatiijiyadda Qaranka ee Lagaga Hortagayo Isdilka. Waxa kale oo ay isku dubbaridaysaa dadaallada ka hortagga idilka ee dalka oo dhan.

Stewart's Hospital
Mill Lane
Palmerstown
Dublin 20

Taleefan: 01 620 1672
Iimayl: info@nosp.ie
www.nosp.ie

### Jigsaw

Jigsaw waa Xarunta Qaranka ee Caafimaadka Dhimirka ee Dhallinyarada. Waxay ujeedadoodu tahay inay hubiyaan in qof dhallinyaro ah uusan dareemin kalinimo, go'doon iyo inuu ka go'an yahay dadka kale ee ku xeeran. Waxay taageerooyin muhiim dhalinayara ka siiyaan caafimaadkooda maskaxda iyagoo si dhow ula shaqeeyaa bulshooyinka Ireland oo dhan.

16 Westland Square
Pearse Street, Dublin 2

Taleefan: 01 472 7010.
Iimayl: info@jigsaw.ie
www.jigsawonline.ie

## Mental Health Reform

Mental Health Reform waa urur samafal oo diiwaangashan, oo dadka la kulma dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda, qoysaskooda iyo asxaabtooda kala shaqeeya kor u qaadista aasaasiga ah ee caafimaadka maskaxda, ka qaybgelinta bulshada iyo helistooda xuquudooda. Mental Health Reform waxay hiigsanaysaa inay bulshada u faa'iideeyaan iyagoo horumarinaya dhaqamada wanaagsan ee adeegyada la siiyo dadka la kulma dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda iyo horumarinta barista dadwaynaha, guud ahaan, dheefaha ay leedahay in dadka Ireland gaaro oo ku raaxaysto heerka caafimaadka maskaxda ee ugu sarreeya.

Coleraine House,
Coleraine Street
Dublin 7

Taleefan:01-874 9468
Iimayl: info@mentalhealthreform.ie

## Pieta

Pieta waa adeeg ujeedadiisu tahay in lagu caawiyo dadka xaalad isdil ku jira ama ku hawlan is-waxyeelaynta. Adeegyadeedu waa lacag la'aan shaqaalahooduna waa kuwo aqoon buuxda u leh oo waxay bixiyaan adeeg daawayn oo foolka-fool ah oo loogu talagalay dadka dareemaya inay isdili araab, dadka isku dayay inay is-dilaan iyo dadka ku hawlan inay is-waxyeeleeyaan.

Waxay bixiyaan khadcaawin bilaash lagu waco 24/7.

Taleefan: 1800 24 7247
U dir "HELP" 51444
www.pieta.ie

# 10. Naafada

### AsIAm

AsIAm.ie waxay hiigsanayaan inay diyaariyaan goob bulshada Autism-ka qabta ka hesho dhammaan waxay u baahan tahay. Waxay siiyaan dadweynaha iyo kuwa qaba xaaladdan caafimaad bogga bixiya macluumaadka Ootiisamka, waxay u shaqeyaan sidii madal loogu talagalay dadka qaba Ootiisamka si ay sheekooyinkooda iyo fikradahooda isugula wadaagaan oo ay cod xoogan ugu noqdaan walaacyada buslhada.

AsIAm
Rock House
Main Street, Blackrock
Co Dublin, A94 V9P1

www.asiam.ie

### Xiriirka Naafada ee Ireland

Xiriirka Naafada ee Ireland (DFI) waa urur taageero qaran oo loogu talagalay in ka badan 130 ururo naafo ah oo iskaa wax u qabso ah oo Ireland ka jira kuwaas oo adeegyo siiya dadka naafada ah. DFI waxay bixisaa adeegyo kala duwan, oo ay ku jiraan macluumaadka, tababarka, cilmi-baarista iyo u doodista.

Xiriirka Naafada ee Ireland
Fumbally Court
Fumbally Lane
Dublin 8
D08 TX48

Taleefan: 01 454 7978
Iimayl: info@disability-federation.ie
www.disability-federation.ie

### Down Syndrome Ireland

Down syndrome-ka Ireland (DSI) waxay u heellan tahay inay noqoto isha aasaasiga ah ee macluumaadka iyo taageerada dadka qaba cilladda Down Syndrome, qoysaskooda iyo bulshada xirfadleyda ah, iyagoo ka shaqeynaya sidii xubnahoodu u heli lahaayeen nolol tayadeeda kor loo qaaday oo ay la socdaan xushmad iyo aqbalaad ay helaan maadaama ay xubin ka yihiin Bulshada qabta Down Syndrome ee Ireland.

Citylink Business Park
Old Naas Road
Dublin 12

Taleefan: 01 4266500
www.downsyndrome.ie

## Enable Ireland

Enable Ireland waxay adeegyo bilaash ah siisaa carruurta iyo dadka waaweyn ee naafada ah iyo qoysaskooda oo ka kala yimid 40 goobood oo ku yaal 14 degmo.

Enable Ireland
32F Rosemount Park Drive
Rosemount Business Park
Ballycoolin Road
Dublin 11
D11 VX82

Taleefan: 01 872 7155
Iimayl: communications@enableireland.ie
www.enableireland.ie

## Adeegyada Naafada ee HSE

Adeega Fulinta Caafimaadka (HSE) waxat bixiyaan adeegyo kala duwan oo loogu talagalay dadka qaba naafo maskaxeed, jireed iyo dareen ama cudurka dhakaakowga (ootisiimka). Adeegyadan waxaa ka mid ah adeegyada caafimaadka aasaasiga ah iyo sidoo kale qiimeynta, baxnaaninta, dayactirka dakhliga, daryeelka bulshada iyo daryeelka deegaanka. Adeegyada qaarkood waxaa si toos ah u bixiya HSE.

Macluumaadka ku saabsan adeegyada naafada ee degmadaada waxaad ka heli kartaa shabakada HSE - kaliya raadi 'adeegyada naafada'.

www.hse.ie

## Inclusion Ireland

Inclusion Ireland waxay matalaysaa in ka badan 160 ururo iyo ololeyaal oo ka shaqeeya isbeddellada adeegyada iyo sharciga kuwaas oo wanaajin doona tayada nolosha iyo ka qaybgalka dadka qaba naafada garaadka ee bulshada Irishka ka tirsan.

Inclusion Ireland
Qaybta C2, The Steelworks
Foley Street
Dublin 1
D01 HV25

Taleefan: 01 855 9891
Iimayl: info@inclusionireland.ie
www.inclusionireland.ie

### Xafiiska Sarkaalka Racfaanka Naafada

Sargaalka Racfaanka Naafada waa sarkaal madax-banaan oo uu magacaabo Wasiirka Caafimaadka. Sargaalku wuxuu adeeg rafcaan siiyaa dadka aan ku qanacsanayn natiijada rafcaannada ka dhanka ah qiimaynaha baahiyaha naafada ee HSE.

Xafiiska Sarkaalka Racfaanka Naafada
Block 1, Miesian Plaza
50 – 58 Lower Baggot Street
Dublin
D02 XW14

Iimayl: appeal@odao.ie
www.odao.ie

### Ururka Waalidiinta Baahiyaha Gaarka ah

Ururka Waalidiinta qaba Baahiyaha Gaarka ah waxa loo sameeyay inuu kaalmeeyo dhammaan waalidiinta baahiyaha gaarka ah leh isagoo kor u qaadeysa daawaynta, waxbarashada, daryeelka iyo aqbalaadda la hagaajiyay. Waxa kale oo ay maamushaa kooxaha taageerada maxalliga ah.

Ururka Waalidiinta Baahiyaha Gaarka ah
Dabaqa 2aad, 13 Upper Baggot Street
Dublin 4

Taleefan: 087 774 1917
Iimayl: info@specialneedsparents.ie
www.specialneedsparents.ie

### Baahiyaha gaarka ah iyo deeqaha waxbaridda ee Waaxda Waxbarashada

Qaybta deeqaha gaarka ah iyo waxbarashada ee Waaxda Waxbarashada waa qayb lacag bixineed oo mas'uul ka ah habaynta deeqaha kala duwan ee loogu talagalay dhammaan dugsiyada hoose iyo waalidiinta haysta carruurta baahiyaha gaarka ah leh. Waxay sidoo kale lacago siiyaan ururo, mashaariic, shirkado iyo shaqsiyaad iyagoo metelaya qaybo kale oo isla waaxda ah.

Waaxda Waxbarashada]
Qaybta Deeqaha Waxbarashada iyo Baahiyaha Gaarka ah
Cornamaddy
Athlone
Co Westmeath
N37 X659

Taleefan: 090 6483750/ 3748/ 3927
Iimayl: sntg@education.gov.ie

### Websaydka AIM

Qaabka Helitaanka iyo Ka mid noqoshada (AIM) waa nooc taageerooyin ah oo loogu talagalay in lagu hubiyo in carruurta naafada ah ay heli karaan Barnaamijka Daryeelka iyo Waxbarashada Carruurnimada Hore (ECCE). Hadafkeedu waa in la xoojiyo adeegbixiyayaasha dugsiyada xanaanooyinka si ay y bixiyaan adeegyo xannaano oo loo dhan yahay oo ilmo kasta oo u qalma si macno leh uga qaybqaadan karo Barnaamijka ECCE oo uu goosan karo dheefaha tayada waxbarashada iyo daryeelka sannadaha hore.

Talooyinka iyo taageerada laga helayo sanadaha hore adeegga takhasuska ah waxaa heli kara:

Taleefan: 01 511 7222 or
Iimayl: onlinesupporrt@pobal.ie
www.aim.gov.ie

# 11. Waxbarashada

### Wakaaladda Ilmaha iyo Qoyska – Adeegyada Kormeerka Dugsiga Xannaanada

Hay'adda Carruurta iyo Qoyska (Tusla) waxay kormeertaa dugsiyada gogoldhigga, kooxaha ciyaarta, xannaanada, goobaha lagu xannaaneeyo, xannaano-maalmeedka iyo adeegyada la midka ah ee u adeega carruurta da'doodu u dhaxayso 0-6.

www.tusla.ie/services

### Ururka Ardayda Heerka Labaad ee Irish (ISSU)

Ururka Ardayda Heerka Labaad ee Irish waa hay'adda qaranka ee Goleyaasha Ardayda dugsiga. Waxay ujeedadeedu tahay inay matasho oo isku xidho ardayda heerka labaad ee Ireland. Waxa kale oo ay higsanaysaa in la maqlo codka ardayda heerka labaad ee gudaha nidaamka waxbarashada Ireland.

ISSU
9th Floor,
Liberty Hall,
Dublin 1
D01 X0T0

Taleefan: 01 443 4461
Iimayl: studentvoice@issu.ie
www.issu.ie

### Golaha Qaranka ee Manhajka iyo Imtixaanada (NCCA)

Hay'addani waa hay'ad cilmi-baadhiseed oo wasaaradda waxbarashada iyo xirfadaha kala talisa manhajka iyo imtixaanada laga soo bilaabo carruurnimada ilaa dhammaadka waxbarashada heerka labaad. Waxay la shaqaysaa ardayda, macalimiinta, hawl-wadeenada, waalidiinta iyo dadka kale si ay u taageeraan hal-abuurnimada dugsiyada iyo goobaha kale ee waxbarashada.

NCCA
35 Fitzwilliam Square
Dublin 2
D02 Kh36

Taleefan: 01-661 7177
Iimayl: info@ncca.ie
www.ncca.ie
www.curriculumonline.ie

### Golaha Qaranka ee Waxbarashada Gaarka ah

Golaha Qaranka ee Waxbarashada Gaarka ah (NCSE) waa hay'ad qaanuuni ah oo madax-banaan oo ka shaqeysa horumarinta gaarsiinta adeegyada waxbarashada dadka baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah leh. Waxay leedahay shabakad qaran oo ka kooban Qabanqaabiyayaasha Waxbarashada Gaarka ah (SENOs) kuwaas oo la shaqeeya waalidiinta, dugsiyada iyo HSE si ay u bixiyaan agab lagu taageero carruurta leh baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah. Waxaad ka heli kartaa adeegyadooda gudaha xaafadaada adiga oo wacaya lambarkan hoose.

NCSE
1-2 Mill St
Trim
Co Meath

Taleefan: 046 948 6432
www.ncse.ie

### Guddiga Imtixaanaadka Gobolka

Guddigan waxay mas'uul ka tahay horumarinta, qiimeynta, aqoonsiga iyo shahaado bixinta ee Imtixaanada Dugsiyada Hoose-dhexe iyo Dugsiga Sare. Waxay ka hoos shaqeysaa Waaxda Waxbarashada. Websaydhkeeda waxa ku jira macluumaad badan oo faa'iido leh oo ku saabsan imtixaanadan, oo ay ku jiraan waraaqo muunad ah, jadwalka imtixaanada iyo nidaamka sixitaanka imtixaanaadka.

Guddiga Imtixaanaadka Gobolka
Cornamaddy, Athlone
Co Westmeath

Taleefan: 090 644 2700
www.examinations.ie

### Golaha Waalidka Waddanka

NPC waxay u jirtaa si loo hubiyo in dhammaan waalidiinta la taageero oo awood loo siiyo inay si wax ku ool ah uga qaybqaataan waxbarashada carruurtooda. NPC waxay ka shaqayn doontaa sidii ay u kordhin lahayd awoodda iyo kartida sanadaha hore, qaybta waxbarashada dugsiga hoose iyo qaybaha dugsiga hoose ka dibba, si qaab dhab ah la isaga kaashado in kor loogu qaado maxsuula gaaraya guud ahaan carruurta.

12 Marlborough Court
Marlborough Street
Dublin 1

Taleefan: 01 887 4034
Khadka caawinta: 01 887 4477
Iimayl: info@npc.ie
www.npcp.ie

# 12. Waxbarashada iyo daryeelka carruurnimada hore

## Guddiyada Xannaaneynta Ilmaha ee Magaalada iyo Gobolka (City and County Childcare Committees)

Guddiyada Xannaanada Carruurta ee Magaalada/Gobalku waa taageero ay Waaxda Carruurta, Sinnaanta, Naafada, Is-dhexgalka iyo Taageerada Dhallinyarada, oo la aasaasay 2001. Waxay ka kaalmeeyaan oo ka caawiyaan qoysaska iyo bixiyeyaasha xanaanada carruurta arrimaha daryeelka ilmaha ee heer degmo. 30-ka CCC, oo ku yaala dalka oo dhan, waxay isku dubbaridaan hirgelinta siyaasadda qaranka ee daryeelka carruurta iyo barnaamijyada ee heer deegaan iyagoo ka wakiil ah Waaxda Carruurta, Sinnaanta, Naafada, Isdhexgalka iyo Dhallinyarada. Doorka muhiimka ah ee CCC-yadu waa inay fududeeyaan oo ay taageeraan horumarinta tayada, adeegyada daryeelka carruurta ee la heli karo si loo helo faa'iidada guud ee carruurta iyo waalidiintooda iyadoo la qaadayo hab carruur ku salaysan iyo hab iskaashi.

www.myccc.ie/

## Aim

(eeg qaybta Naafada ee sare)

# 13. Carruurta Ku Jirta Daryeelka

## EPIC (Xoojinta Dadka Da'da yar ee Daryeelka ku jira)

EPIC waa urur madax-banaan oo la shaqeeya una shaqeeya carruurta iyo dhalinyarada Ireland ee ku jira nidaamyada xannaaneynta ama ku soo noolaaday nidaam xannaano. Tan waxaa ka mid ah kuwa ku jira daryeelka deegaanka, daryeelka korinta, hoyga, taageerada sare iyo daryeelka khaaska ah. EPIC waxay kaloo la shaqeysaa dhalinyarada isku diyaarineysa inay ka baxaan nidaamyada xannaanadad iyo daryeelka ka dib.

EPIC
7 Red Cow Lane
Smithfield
Dublin 7
D07 KX52

Taleefan: 01 872 7661
Text: 087 903 6598
Iimayl: info@epiconline.ie
www.epiconline.ie

## Daryeelka Ehelka ee Ireland

Daryeelka Ehelka ee Ireland waxa ay la shaqaysaa qoysaska qaraabada ah iyo daneeyayaasha muhiimka ah, si kor loogu qaado aqoonsiga, xuquuqda carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska ee daryeelka qaraabanimada, iyada oo loo marayo bixinta macluumaadka, taageerada, iyo u doodista, loogu talagalay nidaamyada iyo isbeddelka sharci dejinta.

28 North Great George's Street,
Dublin 1,
D01 HY46

Taleefan: 01 6700 120
Iimayl: info@kinshipcare.ie
www.kinshipcare.ie

# 14. Guri la'aan

## Maamulka Hoyla'aanta Gobolka Dublin

Maamulka Hoy la'aanta ee Gobolka Dublin waxaa bixiya Golaha Magaalada Dublin oo ah hogaanka sharciga deegaanka ee ka jawaabaya guri la'aanta Dublin.

Golaha Magaalada Dublin
Adeegyada Hoyla'aanta
Xafiiska Guud
Parkgate Hall,
6-9 Conyngham Road
Islandbridge
Dublin 8
D08 PW40

Taleefan: 01 7036100 ee adeegyada soo socda:

- Adeegga Meelaynta Dhexe ee Golaha Magaalada Dublin (Hoyga Degdegga ah)
- Kooxda Waxkaqabashada Hoy la'aanta Qoyska ee Focus Ireland/Kooxda Qaabilaadda Qoyska
- Kooxda Ka Hortagga Hoyla'aanta ee Golaha Magaalada Dublin
- Fulinta Adeegga Caafimaadka ACCES Kooxda Caafimaadka Maskaxda ee Bulshada Bilaa Hoyga Ah

Kooxda Caafimaadka Qaybaha-Badan ee Adeega Fulinta Caafimaadka ee loogu talagalay Dadka Hoy La'aanta ah.

## Focus Ireland

Focus Ireland waxay la shaqeysaa dadka hoylaawayaasha ah ama halis ugu jira inay waayaan guryahooda. Waxay bixisaa talo, taageero, waxbarasho iyo guriyeyn si ay uga caawiso dadka inay helaan oo u haystaan guri. Focus Ireland waxay xafiisyo ku leedahay Dublin, Waterford, Limerick, Kilkenny, Cork iyo Sligo. Si aad u hesho liiska buuxa ee xafiisyadooda, oo aad ula xidhiidho, booqo website-ka Focus Ireland.

Focus Ireland
9–12 High Street
Christchurch
Dublin 8
D08 E108

Taleefan: 01 881 5900
Iimayl: help@focusireland.ie
www.focusireland.ie

### Adeegyada Qalalaasaha ee Saacadaha Shaqada ka dib ee HSE

Adeegga Ka-hortagga Qalalaasuhu wuxuu bixiyaa adeeg shaqaale bulsho oo 'saacadaha shaqada ka dib' ah oo loogu talagay carruurta ka yar 18 jir ee la kulmo dhibaatooyin xilliyada shaqada laga baxay ee aan adeegyada caadiga ah aan la heli karayn. Adeeggu wuxuu ka shaqeeyaa guuda ahaan aagga Dublin. Haddii aad ku nooshahay meel ka baxsan aagga Dublin, Tusla waxa uga shaqeeya Adeegga Badbaadada Goobta Degdegga ah ee loogu talagalay carruurta la ogaado inay khatar ku jiraan xilliyada shaqada laga baxay.

Si aad u hesho adeegyadan, waa inaad la xiriirtaa saldhigga Booliska ee degaankaaga. Sidoo kale eeg Waaxda Carruurta, Sinnaanta, Naafada, Is-dhexgalka iyo Websaydka Dhalinyarada.

### Novas

Novas waa urur iskaa wax u qabso ah iyo Hay'ad Guriyeyneed Ansaxsan oo la shaqaysa dadka da'da yar ee nugul, qoysaska iyo dadka waaweyn ee keligood ah ee danyarta ah iyo kuwa bulsho ahaan la faquuqay; badanaana ah hoylaawayaal ama halis ugu jira inay guri la'aan noqdaan. Novas waxay bixisaa adeegyo kala duwan iyo hoy loogu talagalay qoysaska la haybsooco ee Ireland oo dhan. Novas waxay bixisaa adeegyo khaas ah, macmiilka lagu saanjaray, oo ku dhisan caddayn tijaabo martay. Novas waxay aaminsan tahay in qof kastaa uu xaq u leeyahay guri.

Bellevue House
Haarlem Court
Old Court Road
Firhouse
Dublin 24

D24 RXY3

Taleefan:01 551 8262
Iimayl: info@novas.ie
www.novas.ie

### Peter McVerry Trust

Peter McVerry Trust waxay bixisaa adeegyo kala duwan oo wax lagaga qabto hoy la'aanta. Adeegyada waxa ka mid ah xarumaha tooska loo yimaado ee ku yaalla aagga Dublin ee loogu talagalay dhalinyarada bilaa hoyga ah, daawaynta balwadaha, hoyaad iyo guryiyaynta ku meelgaarka ah.

Peter McVerry Trust
29 Mountjoy Square
Dublin 1
D01 C2N4

Taleefan: 01 823 0776
Iimayl: info@pmvtrust.ie
www.pmvtrust.ie

## Bulshada Simon ee Ireland

Bulshada Simon waxay ka shaqeeyaan Ireland oo dhan waxayna taageero, daryeel iyo hoy siiyaan dadka hoy la'aanta ah iyo kuwa khatarta ugu jira. Si aad u hesho xafiiska Simon ee kuugu dhow, fadlan gal websaydkooda.

Xafiiska Qaranka::
St Andrews House
28/30 Exchequer St
Dublin 2
D02 R721

Taleefan: 01 671 1606
Iimayl: info@simoncommunity.com
www.simon.ie

# 15. Arrimaha qoyska iyo taageerada

## Hay'adda Ilmo-korsashada ee Ireland

Hay'adda Ilmo-korsashada ee Ireland waa hay'ad madax-banaan oo sharciyeed oo ay magacawday Dawladdu taas oo maamusha ilmo-korsashada Ireland dhexdeeda. Hay'adda Ilmo-korsashada ee Ireland waxay ka masuul tahay go'aan ka gaarista dhammaan hawlaha ilmo korsashada ee Ireland iyo sameynta amarada ilmo korsashada.

Hay'adda Ilmo-korsashada ee Ireland
Shelbourne House
Shelbourne Road
Dublin 4
D04 H6F6

Taleefan: 01 230 9300
Iimayl: corporate@aai.gov.ie
www.aai.gov.ie

## Adeegyada Korsashada Ka Dib ee Barnardos

Adeegani waa adeeg madax banaan oo sir ah oo loogu talagalay dadka la korsaday, waalidiinta dhashay iyo waalidiinta korsaday. Wuxu bixiyaa taageero loogu talagalay waalidiinta korsaday ilmo ay ka keensadeen waddanka dibadiisa, iyo sidoo kale adeegyo toos loo siiyo carruurta. Wuxu sidoo kale taageero siiyaa hooyooyinka ilmaha dhalay iyo dadka ilmaha korsaday ee raba inay xiriir la yeeshaan qaraabada ilmaha dhashay.

Adeegyada Korsashada Ka Dib ee Barnardos
3/24 Buckingham Street
Dublin 1

Taleefan:01 813 4100
Khadka caawinta:  01 454 6388
Iimayl: adoption@barnardos.ie
www.barnardos.ie/adoption

## Xafiiska Diiwaanka Guud

Xafiisku waa meesha lagu kaydiyo diiwaanada dhalashada, dhimashada, guurka, xiriirada madaniga ah iyo korsashada. Waxaad ka diwaangelin kartaa dhalashada ilmaha oo waxaad ka heli kartaa warqadda dhalashada xafiiskan.

Xafiiska Diiwaanka Guud
Government Offices Convent Road
Roscommon
F42 VX53

Taleefan: 090 663 2900
LoCall: 1890 252076
Iimayl: gro@groireland.ie
www.certificates.ie, www.groireland.ie

## Barnaamijka Taageerada Waalidiinta Da'da Yar

Iyadoo uu maamulo Treoir, Barnaamijka Taageerada Waalidiinta Da'da Yar (TPSP) waa adeeg taageero hooyooyinka da'da yar, aabbayaasha da'da yar iyo qoysaskooda laga bilaabo uurka illaa ilmuhu ka gaarayo 2 sano jir. TPSP waxay bixisaa taageero iyo macluumaad ku aaddan dhammaan qaybaha nolosha waalidiinta da'da yar sida caafimaadka, xiriirka, barbaarinta, daryeelka ilmaha, xuquuqda helitaanka kaalmada bulshada, waxbarashada, tababarka iyo wax kasta oo kale oo hooyadu ama aabuhu ka walaacsan yahay.

Barnaamijka Taageerada Waalidiinta Da'da Yar
Treoir
28 N Great George's St
Rotunda
Dublin 1
D01 HY46

Taleefan: 01 6700 120
Iimayl: tpsp@treoir.ie
www.tpsp.ie

## Treoir

Treoir wa adeeg macluumaad bilaash ah, sir ah oo loogu talagalay waalidiinta aan guursan, wada nool ama kala tegay, iyo sidoo kale qoysaskooda ballaaran iyo ciddii la shaqeysa. Waxay leeyihiin goobo xogta lagu bixiyo, khad talobixineed iyo siminaarro.

28 N Great George's St
Rotunda
Dublin 1
D01 HY46

Taleefan: 01 6700 120
Iimayl: info@treoir.ie
www.treoir.ie

## Adeegyada Korsashada ee Tusla

Tusla - Hay'adda Carruurta iyo Qoyska, Adeegga Korsashada Qaranka, wuxu ka masuul yahay:

- U qoondeynta carruurta cid korsata marka waalidkii dhalay codsado;
- Qiimaynta iyo kala shaandhaynta waalidka/iinta laga yaabo inay ilmaha korsadaan;
- Siinta macluumaad iyo u raadinta adeegyo dadka la korsaday, korsashada ka baxay ama kuwa lagu meeleeyay nidaam xannaaneyneed kale.

Si aad ula xidhiidho adeega korsashada ee degaankaaga eeg websaydka www.tusla.ie.

## Hal qoys

(fiiri qaybta khadadka taleefoonka ee sare)

## Barnaamijyada u doodista dhalinyarada Ireland

(eeg qaybta ururada dhalinyarada ee sare)

## Khadka waalidka

(fiiri qaybta khadka telefoonada ee sare)

# 16. Socdaalka iyo magangalyada

## Aan dawli ahayn

### Doras

Doras waxa ay ka shaqeeyaan sidii ay uu u wanaajin lahaayeen natiijooyinka nololeed ee dadka soo-galootiga ah ee gobolada Limerick iyo Galbeed-Dhexe iyadoo ay u marayaan adeegyadayada taageerada ee soo-galootiga ka caawiya helista xuquuqdooda. Adeegyadooda taageerada tooska ah waxa heli kara dhammaan muhaajiriinta iyada oo aan loo eegin sharciga ay haystaan ama xaaladdooda.

Doras Luimni
Central Buildings
51a O'Connell Street
Limerick
V9Y 268W

Taleefan: 061 310328
Iimayl: info@doras.org
www.doras.org

### Golaha Soo-galootiga ee Ireland (ICI)

Ururkan aan dawliga ahayn wuxuu kor u qaadaa xuquuqda soogalootiga isagoo adeegsanaya bixinta macluumaad, latalinta sharci, u doodis, ololayn, cilmi baaris iyo tababarro. Goluhu sidoo kale waa xarun sharci oo madax banaan.

Golaha Soo-galootiga ee Ireland
2 St Andrew Street
Dublin 2
D02 PD30

Taleefan: 01 674 0200
Iimayl:  admin@immigrantcouncil.ie
www.immigrantcouncil.ie

Khadkooda caawintu wuxuu furan yahay 7fiidnimo ilaa 9habeynimo Talaadada iyo 10 subaxnimo-1pm galabnimo Isniin, Talaado, Khamiis iyo Jimco.

## Irish Refugee Council (IRC)

Ururkan aan dawliga ahayn wuxu u dooda qaxootiga iyo magangalyo doonka. Waxa ay maamulaan Xarunta Toos ay u soo degaan kuwa u baahan caawimo ama hagitaan ku saabsan habka magangalyada. Waxa kale oo ay maamulaan Xarun Sharci.

Golaha Qaxoontiga ee Ireland
37 Killarney Street
Mountjoy
Dublin 1
D01 NX74

Taleefan: 01 764 5854
Iimayl: info@irishrefugeecouncil.ie
www.irishrefugeecouncil.ie

## Xarunta Xuquuqda Soogalootiga ee Ireland

MRCI waa urur qaran oo la shaqeeya soo-galootiga iyo qoysaskooda ku nool Ireland si loo horumariyo caddaaladda, sinnaanta, iyo awoodsiinta. MRCI waxay ka shaqeysaa barta ay isugu yinmaadaan socdaalka iyo siyaasadaha iyo sharciga shaqaaleynta. Waxay ka hawlgalaan awoodsiinta iyo ka qaybgelinta shaqaalaha soogalootiga ah ee ka shaqeeya qaybaha suuqa shaqada ee mushaharka hooseeya, ee maamulkoodu liito, kuwaas oo khatar ugu jira xaalado shaqo oo dhalinaya dhiigmiirasho. Waxay taageeraan dadka loo soo tahriibiyay si loogaga faa'iidaysto muruqooda iyo kuwa aan sharciga haysan ama halis ugu jira inay sidaas noqdaan.

13 Lower Dorset Street,
Dublin 1,
D01 Y893

Taleefan:: 01 8897570
Iimayl: info@mrci.ie
www.mrci.ie

## NASC

Nasc waxay la shaqaysaa soogalootiga iyo qaxootiga si ay ugu doodo oo ay u horseeddo isbedel ka dhaca gudaha nidaamka socdaalka iyo ilaalinta ee Ireland, si loo hubiyo cadaalada, helitaanka cadaalada iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha. Ujeedadoodu waa inay xaqiijiyaan xuquuqda dhammaan soogalootiga iyo qaxootigu ku dhex leeyihiin bulshada Ireland.

NASC
34 Paul Street
Cork
T12 W14H

Taleefan:021 427 3594
Iimayl: reception@nascireland.org
www.nascireland.org

# Hay'adaha sharciga ah

## Adeegga Dhalashobixinta iyo Soo-galootiga Ireland

Kani waa 'hal-meel oo koobsatay' dhammaan waxyaabaha la xiriira magangalyo-doonka, socdaalka, dhalashada iyo fiisayaasha.

An Roinn Dlí agus Cirt agus Comhionannais
Department of Justice and Equality

Adeegga Dhalashobixinta iyo Soo-galootiga Ireland
13-14 Burgh Quay
Dublin 2
D02 XK70

Taleefan: 01 616 7700
LoCall: 1890 551 500
www.inis.gov.ie

## Xafiiska Ilaalinta Caalamiga ah

An Oifig um Chosaint Idirnáisiúnta
International Protection Office

Xafiiska Ilaalinta Caalamiga ah waa xafiis ka dhex shaqeeya Adeegga Dhalashobixinta iyo Soo-galootiga Ireland oo ka masuul ah ka shaqeynta codsiyada Ilaalinta Caalamiga ah ee ku cad Xeerka Ilaalinta Caalamiga ah ee 2015. Wuxu sidoo kale tixgeliyaa, iyadoo isku hal nidaam maraysa, haddii codsadayaasha ogolaansho loo siinayo inay waddanka sii joogaan: TALEEFANKA: 01-602 8000 iimaylka: Xafiiska Ilaalinta Caalamiga ah

Xafiiska Ilaalinta Caalamiga ah
Adeegga Dhalashobixinta iyo Soo-galootiga Ireland
79-83 Lower Mount St
Dublin 2
D02ND99

Taleefan: 01 602 8000
Iimayl: info@ipo.gov.ie
www.ipo.gov.ie/en/IPO/Pages/home

## Adeegga Sharciga Qaxootiga

Adeegyadani waxay adeegyo sharci oo qarsoodi ah oo madax-bannaan siiyaan dadka codsanaya magangelyada, iyo adeegyo khuseeya arrimaha socdaalka iyo masaafurinta. Waxay si toos ah ula shaqeeyaan carruurta aan lala socon iyo dhibanayaasha ka ganacsiga aadamaha. Adeegyadu waxay qayb ka yihiin Guddiga Kaalmada Sharciga.

**Dublin:**
48/49 North Brunswick Street George's Lane
Dublin 7
D07 PE0C

Taleefan bilaasha: 1800 23 83 43
Taleefan: 01 646 9600
Iimayl:dublinrls@legalaidboard.ie

**Cork:**
North Quay House,
Popes Quay
Cork
T23 HV26

Taleefan bilaasha: 1800 202420
Taleefan: 021 455 4634
Iimayl: rlscork@legalaidboard.ie

**Galway:**
Seville House
New Dock Street
Galway
H91 CKVO

Taleefan bilaasha: 1800 502400
Taleefan: 091 562480
Iimayl: rlsgalway@legalaidboard.ie

## Amnesty International

Hiigsiga Amnesty International waa adduun uu qof kastaa ku raaxaysanayo dhammaan xuquuqda aadanaha ee ku xusan Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka iyo heerarka kale ee caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha. Amnesty International waxay qabataa cilmi-baaris iyo tallaabo diiradda lagu saarayo ka hortagga iyo soo afjarida xadgudubyada xunxun ee ka dhanka ah xuquuqda jireed iyo maskaxeed, xorriyadda garashada iyo ra'yiga, iyo ka-madax-bannaanida takoorka, kuwaas oo hoos imanaya shaqadeeda guud ee ilaalinta dhammaan xuquuqda aadanaha.

Sean Mac Bride House
48 Fleet Street
Dublin 2.

Taleefan: 01 863 8300
Iimayl: info@amnesty.ie
www.amnesty.ie

## UNHCR Ireland

UNHCR, oo ah hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan qaxootiga, waa hay'ad caalami ah oo mas'uul ka ah ilaalinta xuquuqda qaxootiga iyo dadka bilaa dalka ah. Waddanka Ireland, hay'addani, door toos ah kuma laha nidaamka codsashada magangelyada, laakiin unugeed ilaalinta iyo mararka qaarkood caawiya dadyoowga magangalyodoonka ah, qaxootiga, iyo kuwa bilaa waddanka ah ee u baahan taageero, kaalmo iyo talo. Caawimada noocaan ah looguma talagalin in lagu badalo latalinta sharciga ama faragalinta xidhiidhka ka dhexeeya magangalyo doonka iyo lataliyahooda sharciga.

102 Pembroke Road
Ballsbridge
Dublin 4
D04 E7N6

Taleefan: 01 631 4510
Iimayl: iredu@unhcr.org
www.unhcr.ie

# 17. Nidaamka Cadaaladda

### Ciidama Booliska

(fiiri qaybta Hay'adaha Dawlada ee sare)

### Adeegga Maxkamadaha

Adeegga Maxkamadaha wuxu maamulaa maxkamadaha Ireland. Wuxu macluumaadka nidaamka maxkamadaha siiyaa dadweynaha.

The Courts Service
15–24 Phoenix Street North Smithfield
Dublin 7
D07 XO28

Taleefan: 01 888 6000
www.courts.ie

### Khadka Caawinta Dhibanayaasha Dembiyada

Khadka Caawinta Dhibanayaasha Dembiyadu wuxu taageeraa oo caawiyaa dhibanayaasha dembiyada iyo dhammaan kuwa ay saameeyeen dembiyadu. Wuxu bixiyaa macluumaadka ku saabsan nidaamka cadaaladda dembiyada iyo u sii gudbinta goobaha kale ee caawin kara dhibbanayaasha.

Saacadaha furitaanka: Isniin - 10 subaxnimo ilaa 7.30 galabnimo Talaado ilaa Jimce - 10 subaxnimo ilaa 5 galabnimo Sabtida iyo Fasaxyada Bangiga - 2 galabnimo ilaa 4 galabnimo Axad - Waa xidhan yahay. Wixii ka baxsan saacadahaas waxaad u reebi kartaa farriin waana lagu soo wici doonaa.

Taleefan bilaasha: 116 006
Iimayl: info@crimevictimshelpline.ie
Qoraal u dir: 085 133 7711
www.crimevictimshelpline.ie

### Agaasimaha Xeer Ilaalinta

Agaasimaha Xeer Ilaalinta Guud (DPP) DPP
wuxu ka masuul yahay dacwad oogista isagoo ka wakiil ah dadka iyo Dowladda Ireland.

DPP
14-16 Merrion Street
Dublin 2

Taleefan: 01-678 9222
www.dpp.ie

## Irish Council for Civil Liberties

Golaha Xoriyada Madaniga ah ee Irishka waxaa ka go'an Ireland ka cadaalad badan, xor ah, oo ay xuquuqul insaanka iyo xoriyada madaniga uu qof walba ku raaxaysto. Iyaga oo si buuxda uga madaxbannaan dowladda oo si baqdin la'aana u wata u doodista xuquuqul insaanka, ayay furinta hore kaga jireen dhammaan ololayaasha xuquuqda aadanaha ee bulshada Ireland, waxayna saameyn weyn ku yeesheen sharciga, siyaasadda iyo ra'yiga dadwaynaha. Kuwaas waxaa ka mid ahaa ololayaasha furiinka sharciga ah, dambi ka rogida khaniisnimada iyo sinnaanta guurka; ka shaqaynta in shuruucda iyo hay'adaha loo siman yahay; ka-hortagga sharciga deg-degga ah iyo ka-saaridda ilaalinta nidaamka cadaaladeed ee dastuuriga ah; iyo u doodista joogtada ah ee xuquuqda haweenka, oo ay ku jiraan xuquuqda taranka.

Irish Council for Civil Liberties,
Unit 11, First Floor, 34, Usher's Quay,
Dublin 8
D08 DCW9

Taleefan: 01 912 1640
Iimayl: info@iccl.ie
www.iccl.ie

## Adeegga Caddaaladda Dhallinyarada Ireland

Adeegga Caddaaladda Dhallinyarada Ireland wuxu ka masuul yahay horumarinta nidaamka caddaaladda dhalinyarada. Adeeggu waxa uu leeyahay shaqaale ka socda Waaxda Carruurta, Sinnaanta, Naafada, Is-dhexgalka iyo Dhallinyarada iyo Wasaaradda Caddaaladda. Wuxu ka masuul yahay istaraatiijiyadda caddaaladda dhalinyarada iyo barnaamijyada weecinta ee Booliska.

Adeegga Caddaaladda Dhallinyarada Ireland
50-58 Baggot Street Lower
Dublin 2
D02 XW14

Taleefan: 01-647 3000
Iimayl: iyjs@justice.ie

## Adeegga Asluubta Dhalinyarada

YPP waa qayb gaar ah oo ka tirsan Adeegga Asluubta. Wuxu la shaqeyaa carruurta iyo dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 12-18 sano ee yimaada maxkamadaha ama kuwa ku jira Xerada Dhaqancelinta ee Oberstown. YPP wuxu dhiirigelilyaa isticmaalka xayiraadaha aadamaha iyo isticmaalka caddaaladda habdhaqan soo celinta si loo yareeyo in qofku dembigii dib ugu laabto. Waxaa jira 17 urur bulsheed oo bixiya adeegyo ay kaga wakiil yihiin YPP. Wuxu si dhow ula shaqeeyaa Adeegga Caddaaladda Dhallinyarada Ireland.

Adeegga Asluubta Dhalinyarada
Haymarket
Smithfield
Dublin 7

Taleefan: 01 817 3600
www.probation.ie

Dhammaan xuquuqdu way reeban tahay. Ma jirto qayb dukumeentigan ka mid ah oo dib loo soo saari karo, lagu kaydin karo nidaam, ama la sii gudbin karo, qaab kasta ama hab kasta ha noqotee, qaab elektarooni ah, toos ah, in la badiyo, la duubo ama si kaleba loo kordhiyo, iyadoo aan oggolaansho laga haysan milkiilayaasha xuquuqda daabacadda, Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta iyo Golaha Xoriyada Madaniga ah ee Irishka (ICCL).

CHILDREN'S RIGHTS ALLIANCE
Uniting Voices For Children

Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta
7 Red Cow Lane
Smithfield
Dublin 7
Ireland
TL: +353 1 662 9400
www.childrensrights.ie

Lambarka Diiwaangelinta Shirkadda: 316758
Lambarka Hay'adda Samafalka: CHY 11541
Lambarka Diiwaangelinta Hay'adda Samafalka: 20031909

© 2025 Isbahaysiga Xuquuqda Carruurta
Jamhuuriyadda Ireland

ISBN 978-1-9161457-2-6

Turjumaada iyo qaabaynta Hagahan Ogoow Xuquuqdaada waxaa si naxariis leh u maalgeliyay Guddiyada Adeegyada Carruurta iyo Dhallinyarada (CYPSC) iyada oo loo marayo Sanduuqa Ilaalinta Caalamiga ah ee CYPSC 2024.